
Aadan Xassan Aadan

*" Beleloo "*

# SAABXIDH

## *Diiwaan Maanso*



# SAABXIDH

***Diiwaan Maanso***

Iskudubbaridka : Iddiris Siciid Migil
Tiffaftirka : Maxamad Cabdillaahi Riiraash
Sawirka Jeldiga : Xassan Cali Cabdi

Copyright - 2005

©Idaylaba xuquuqdu way dhawran tahay. Buugga, ama qaybo ka mid ah, la ma sawiran karo, dib loo ma daabacan karo, si na loo ma faafin karo ogolaanshaha xaqleha, oo ah curiyaha, la'aantii.

# *TUSMO*


| | Bogga |
|---|---|
| Hordhac | 9 |
| Arar | 17 |
| Mahadnaq | 20 |
| Hibayn | 23 |
| **MAANSOOYIN** | |
| Kac Tallaabso | 25 |
| **Waa Mid Aan Arag** | 29 |
| Abtirsiimo | 32 |
| **Hablayahow War Iga Gura** | 45 |
| Dhurwaa | 53 |
| Sooyaal | 61 |
| Daruuryaha | 70 |
| Cabasho Agoon | 78 |
| Waa Soo Guduutay | 87 |
| Dhimbiil | 92 |
| Sirta Noloshu Waa Adi | 99 |
| Geliya Laabtiinna | 107 |
| Qaaddiroow | 113 |
| Halkuu Xaalku Marayaa ? | 116 |
| Maryan | 127 |
| Wakhtiyahow ! | 136 |
| Adduunyadan | 141 |
| Hadhka Soo Rogmaday | 149 |

| | |
|---|---|
| Iqbaal | 161 |
| Gooree | 169 |
| Canab | 184 |
| Shacabyahow ! | 189 |
| Saabxidh | 192 |
| Duni Aakhir-seban | 202 |
| Dadweynoow ! | 213 |
| Qoorteeda Yaa Sudhi ? | 221 |
| Dahabo | 229 |
| Qarnigii La Soo Maray | 236 |
| Magac Laysugu Faano | 242 |
| Guure Habeenaad | 245 |
| Gacalle | 248 |
| Hibo | 266 |
| Qosol Qoonsi leh | 268 |
| Alloow ! | 272 |
| Adduun Waa Borodtan | 276 |
| Dhagaxyahow ! | 283 |
| Saaxiib | 288 |
| Daa'uus | 293 |
| "Your babies are killed" | 301 |

# *HORDHAC*

Dadku, noolaha kale waxa ay kaga duwan yihiin waa fikirka oo lagu tebiyo hadalka. Afku na haddaba waa sidaha dhaqanka, waayo-aragnimada ummadda iyo taariikhda ahaanshahooda; af kaste na jiritaankiisu iyo ummadda leh ba, suugaantooda iyo halabuurkooda ayaa u ah tiirdhexaad ay ku fadhiyaan. Meel ku ma koobna, milay ku ma xidhna, da' na ku ma eka. Da' waliba tan kale waa in ay u tebisaa. Taasi hadday iman weydo oo la waayo, ummaddaasi waxa ay noqonaysaa mid sabool ah, ugu dambaynta na gudha oo geeddisocodka jiritaan-keedu istaago sidii **Masaaridii hore, Giriigtii** iyo **Roomaankii**.

**Jabuuti** waxa ay ka mid tahay ummadaha adduunka, guud ahaan, gaar ahaan na kuwa ku xeeran oo ay dhiig iyo dhaqan ba wadaagaan. Si arrimahaa an soo sheegnay loo hanto, tallaabooyinkii ugu horreeyay waxa la qaaday sannadahii 1982kii iyo 1983kii oo labo kulandhaqameed la qabtay. Waxa halkaas lagu soo bandhigay qaybaha kala duduwan ee dhaqanka bulshoweynta Reer Jabuuti, taasi oo albaab weyn furtay.

Si taa loo joogteeyo, waxa laga-ma-maarmaan noqotay in warfaafintu, gaar ahaan raadyaha iyo *TVgu* qayb libaax ka qaa-taan. Halkaasay na ka bilaabmeen barnaamijyadii caanka ahaa ee raadyaha iyo *TVgu*.

*«Dhaqan iyo Suugaan»* barnaamijka la yidhaa waxa aan ku xidhiidhinay da'roontii hore ee dhaqanka iyo suugaanta iyo da' yarta dambe. Xasuus gaar ah aan u sameeyo ragga raadka weyn ku yeelshay arrintaa oo kala ahaa, haddaan dhawr ka soo qaato: **Axmad Aadan** *« Cadcadle »*, **Cumar Good Buux, Mii-caad Miigane** iyo **Xabbad Ibraahim**. Affartaasi maanta way ina-ga hooseeyaane, waxa iyagu na qaybtaas oo kale ka qaatay dad

farabadan oo rag iyo dumar ba leh oo maanta nool, sidii na u wada hawshoodii hal-abuurnimada.

Tallaabooyinkii dambe ee dhankaa loo qaaday way badnaayeen:

- barnaamijka dhaxalgalka noqday ee *«Sirta Ereyga»* waxa lagu soo bandhigay maansooyinka ragga ugu waaweyn hal-abuurka soomaaliyeed ee maanta nool, kuwaas oo uu hoggaaminayay **Maxamad Ibraahim Warsame «Hadraawi».** *«Sirta Ereygu»* saamayn aad u weyn buu ku yeeshay dadweynaha **Reer Jabuuti** guud ahaan, gaar ahaan na dhallinyarada.

- barnaamijka kale ee *«Tix-Maal»*, oo aan odhan karno waxa uu ka soo xuubsiibtay *«Sirta Ereyga»*, ayaa suu-rageliyay in dhallinyaro hal-abuur ah, oo wiilal iyo gabdho ba leh, lagu barto, suugaantooda na lagu soo bandhigo.

Hadda ba **Aadan Xassan Aadan** oo ku magac dheer **«Beleloo»,** oo ah ninka maansooyinka diiwaankan *«Saabxidh »* curiyay, ayaa fure u ahaa *«Tix-Maal»* oo bilaabmay sanadkii 1999kii, ilaa maanta na socda. **Aadan** waa hal-abuur da' yar, tayoda suugaantiisu na waxa ay noqotay mid markii ba soo if-baxday. Taasaa na suuragelisay in uu barnaamijku markii ba hanaqaado. Sababaha tayoda u yeelay suugaanta **Aadan** waxa ka mid ah: iyada oo ay ka muuqato aqoon guud oo aad u ballaadhan iyo tu dhaqameed labadu ba.

Dadka **Aadan** aad u saameeyay waxa ka mid ah **Maxamad Iqbaal** oo ahaa gabayaa weyn oo **Reer Baakistaan** ah. **Maxamad Iqbaal** waa ninkii sababta u ahaa in **Baakistaan** ay **Hindiya** ka go'do. Taasaa na maansooyinka **Aadan** siisay aragti fog oo caalami ah. **«Hadraawi»,** oo ah abwaanka ho-ryaalka u ah maansoleyda soomaaliyeed ee casriga ah, ayaa isagu na raadayntiisu si weyn uga muuqataa.

Maansooyinka **Aadan** dhinac wal oo nololsha ka mid ah ba way taabteen, ha ahaato xag dhaqan, xag bulsho, xag jacayl, xag siyaasadeed iyo xag dhaqaale ba. Maanso wal ba waxa ku dheehan dareen culus iyo aragti bini-aadannimo. Wuxuu ku guuleystay in uu dadkii la socday barnaamijyadiisa taabsiiyo dhibaatooyinka ku habsaday dadka **Soomaaliyeed, Reer Falastiin** iyo waliba dhiilladii is-addoonsiga ee dadka la kala iibsan jirey oo inta **Afrika** laga guray **Maraykan** lagu cammiray. Isku soo wada duub, **Aadan** iyo suugaantiisu aad bay u kala weyn yihiin oo suugaantiisaa ka da' weyn.

Maanta kayd weyn oo cajalado ah baa la haynaa. Waxay ila tahay in la gaadhay milaygii qooraal na lagu kaydin lahaa. Waxaan rajaynaynaa in diiwaankan **Aadan** ee «*Saabxidh*» uu bilaw wanaagsan u noqdo diiwaanno kale oo la qoro, si ay na suugaanteennu ula dhiman dadka haya iyo cajaladaha ay ku jirto.

**Maxamad Cabdillaahi Riiraash**

## *ARAR*

*Fadhi-baradka maansada markaan*
*Farafaraynaayay*
*Fiidcawl kol ay tahay markaan*
*Shidayey faanuuska*
*Fikir foorihii galay markaan*
*"Filin" ka duubaayay*
*Fursad xidhan markii aan lahaa*
*Raadi furaheeda*
*Foof aanan dheeraan markaan*
*Foodhin ugu jiiday*
*Fidhin aan xidhnaanjirey markaan*
*Faaradlaha geeyey*
*Garaaddada fayiigsiyey markaan*
*Rabay inaan fiiqo*
*Faras aan la heensayn markaan*
*Foodda qabanaayey*
*Markaan faqayey ceelkii fankoo*
*Fadalku uu aasay*
*Inaad fiirisaan kuu hordhigay*
*Faalladay gabay e*
*Farta kuugu fiiqoo walaal*
*Faasax baad tahay e*
*U fajaaso beeraha fad baa*
*Soo fanqooqsaday e*

***Foof*** : *dibed u dareerka iyo daaq-doonashada xoolaha; soof*

Gabaygu wuxuu ka mid yahay qaababka kala duduwan ee ummaduhu isku dhaxalsiiyaan taariikhdooda iyo tajribo-nololeedkooda. Fac kasta oo soo kacaa ba wuxuu ka akhristaa gabayga nololshii awowyaashii. Ummadaha Geeska Afrika, gaar ahaan na Soomaalidu, waxay ahaayeen kuwo si gaar ah u tixgeliya gabayga iyo gabayaaga ba. Wuxuu gabaygu ahaa ka

la isugu warramo, wuxuu na ahaa habka ergadu ku gudato waajibaadkeeda, wuxuu door muhiim ah ku lahaa madasha garta iyo geedka xeerka. Waxa kale oo loo adeegsan jirey siyaasadda, colaadda iyo nabadda. Waxaa na lagu dhisi jirey qoyska oo gabdhahaa lagu sabi jirey. Waxaa kale oo uu ahaa maaweelo iyo mid hawlaha lagu guto.

Gabaygu hadduu qiimahaa u lahaa bulshadii shalay, maanta na halkiisii ma gabin. waxay ila tahay in uu weli gudanayo waajibaadkaasi ilaa inta uu adduunka joogo qof dareen lihi. Waxaan jeclahay in aan tilmaamo in uu gabaygu yahay dhir ciidda ay ka baxdaayi tahay bulshada. Dhirtaasi waxay bixisaa qodxo ama ubax, waa kol ba siduu yahay xaalka bulshaduye.

Mar kale gabaygu waa midhaha dareenka abwaanka. Marka uu wax dareemo ee uu dareenkiisu jiif iyo joog ba uga ba'o, caloosha ayaa olosha, kaddib na waxaa ka soo baxa qaac iyo qiiq, kaasaa na noqda gabayga aynnu akhriyayno.

Dhinac kale haddaan uga wareegno, waxa saaran gabayaaga, guud ahaan na suugaanyahanka, waajibaad iyo xil aad u culus. Waxaa na ugu horaysa mas'uuliyaddaasi in uu ka runsheego dareenkiisa, ummadiisa na runta u sheego. Da'da aan ka mid ahay, ee maanta gabyaysa na, waxaa u taalla hawsha ah in ay dadkooda ku hagaan hadalka huffan ee qurxoon iyo in ay ka ilaaliyaan hadimooyinka iyo hagardaamada dhaqanka oo habaaba ama la halmaamo.

Fanka iyo suugaanta, oo la mid ah nooleyaasha kale, waxay mar walba qayb ka yihiin casrigooga iyo wakhtigooga. Waxaan uga jeedaa : in seban walba leeyahay fankiisa, raggiisa iyo dhaqankiisa. Annaga na waxa naga saaran xil weyn in aan u

guntanno sidii raadkii raggii hore, tallaabada horey looga sii qaadi lahaa. Si na uma habboona in lagu doodo : *"rag waa raggii hore, hadal na waa intuu yidhi"*. Waxa taa innooga filan in uu seban walba rag leeyahay, taariikhdu na waxay ummad walba kala xisaabtami uun muddadii ay noolayd oo keliya.

Diiwaankan *"Saabxidh"* waa qayb yar oo ka mid ah wixii xil iyo waajibaad iga saarnaa ummaddayda. Diiwaankani waa fadhibarad, waa bilowga dedaal aan ugu jiro cusboonaynta iyo sii noolaynta dhaxalkii aabayaasheen, waa horukac iyo muquurashada mawjadaha nololsha, waa hurinta ilays aan rajaynayo in aan u dhiibno kuwa soo kacaya, wa saabxidh si aan haan loo jebin oo hore na loogu guuro ama caano loogu lusho. Ugu dambayn waxaan ku celinayaa *"fadhdhibaradka maansada markaan, farafaraynaayey"*. Waxaan jeclahay in aan tilmaamo in aan ereyada qaarkood sharaxaad kooban ka bixinnay, annaga oo ku agqornay ereyga uu macnaynayo. Waxaan meelaha qaarkood tilmaannay ujeedada maansada ka danbaysay ama loo curiyay. Wixii waano iyo waxsheeg ah na waxaan ku soo dhaweynayaa kal iyo laab furan.

**Curiyaha**

# *MAHADNAQ*

Marka hore, mahad aan la koobi karin, sida aan nimcooyinkiisa ba loo koobi karin, ayaan **Ilaahay** u soo jeedinayaa. Waxan qiranayaa inaanu kolley mahadnaqaygu meel ka gaadhayn oo aanu gudayn wixii nimcooyinkiisa ballaadhani xaq u lahaayeen. Waa Rabbiga aan naxariistiisa la'aanteed erey keli ah oo diiwaankan ka mid ah la qoreen.

Maansooyinka diiwaanka «***Saabxidh***» ayaan mar na ba ahayn qaar magac iyo martabad ba igu gaar ah. Waxa qayb weyn ku lahaa dadkii noloshayda saameeyey, sida labadayda waalid, macalimiintaydii, saaxiibbadayda faraha badan iyo dadkii deegaannadii iyo dalalkii aan ku dhaqmay ama aan booqday ku noolaa. Dadkaasi waxa ay iiga la qaybqaateen hawshan siyaabo kala duduwan, dhammaantood na qaddarin ayay mudanyihiin.

Dadkaasi, hadduu jeldiga sare ee diiwaanku na wada qaadin na, waxa nagu filan in aannu sharaftiisa wada leenahay, aniga na fursad bay ii tahay in aan maanta halkan uga wada mahadnaqo, dumar iyo rag ba. Dadkaas, qaar baa talo iyo tilmaan ka baxshay, qaar kale ayaa wakhtigoogii waax u huray. In kale ayaa dhacdoonyinkii dhaliyay lahayd. In baa muruq iyo mooro ku darsatay. In baa kolley kaalmo kale ka gashay. Iyada oo ay sidaa tahay, hadda na waxa jira dad aan si gaar ah u xusayo.

Waxa dadkaa ugu horeysa **Seynab Cali Cabdi** oo ahayd gabadhii ii soo dirtay buuggii sababta u noqday inaan gabyo. Waxaan isaga na mahad aan la qiyaasi karin u gudbinayaa, Allaha u naxariistee, saaxiibkay **Cabdirashiid Maxamad Aadan** oo gacan weyn ku lahaa ururintii iyo habayntii bilowga ahayd ee diiwaanka.

Waxa kale oo iyagu na xusid gaar ah mudan : **Dr Rooda X. Axmad Qummane, Muuse Jaamac Geeddi, Xaliimo Xusseen Warsame, Xaamud Cabdi Suldaan** iyo xaaskiisa **Faadumo Maxamad Yuusuf**, kuwaas oo hadh iyo habeen ila

garab joogay tirtirsiin iyo dhiirrigelin intii aan tirinayey maansooyinkan. Waxaan iyaga na aad iyo aad ugu mahadnaqayaa labadayda saaxiib ee qaaliga ah ama macallimiintayda **Maxamad Cabdillaahi Riiraash** iyo **Maxamad Daahir Xassan**, kuwaas oo ku guuleystay in ay gabayadayda u soo saaraan dadweynaha. Waxa mahaddaa la wadaaga idaacadda **(RTD)** iyo maamuleheeda **M. Cabdi Caateeye** oo saamayn ku lahaa curinta iyo ururinta maansadayda.

Waxa iyagu na mahad iyo maamuus mudan dhammaan xubnihii ururkii ardayda Soomaaliyeed ee **Maaleesiya**, gaar ahaan na **Xassan Sh. Cali** ***«Al Imaam»***, **Maxamuud Cabdi Nadiif** ***«Quraysh»*** iyo **Yuusuf Cismaan** ***«Al Kawnayn»***. Waxa kale oo aan u mahadnaqayaa asxaabtayda oo dhan, gaar ahaan na **Axmad Xaashi Miicaad, Dayib Dubbad Rooble** ***«Shimbir», Muumin Xassan Barre,*** **Ciise Khayrre, iyo Maxamuud Cabdillaahi Faarax.**

Waxaan aad ugu mahadnaqayaa macalinka weyn ee **Saalax Xaashi Carab** oo labadii sano ee u dambaysay aan kala hadhay intii u badnayd wixii uu aqoon xambaarsanaa, hadday afka tahay iyo hadday suugaantiisa tahay ba. Sidoo kale waxa uu **Saalax** soo akhriyay diiwaankan, talooyin na igu biirshay.

Waxa kale oo aan mar na hilmaami doonin, mahad maguuraan ah na u gudbinayaa saaxiibkayga qaaliga ah ee **Iddiris Siciid Migil** oo ay faruhu kaga gubteen, maanka na muddo ku mashquuliyay qorista, sixidda iyo isku-dubbaridka diiwaankan.

Waxaan isaga na halkan ku xusayaa walaalkay **Iddiris Cawleed (Xarbi)** oo aad iskugu hawlay marar badan sidii uu diiwaankan ugu heli lahaa maalgelin iyo taageero . Wuxuu Idiris aad u jeclaa inuu arko diiwaankan oo daabacan.

Waxa sidoo kale dadaal lama illaawaan ah ka geystay soo saaridda diiwaankan Duqaytida kala ah: **X. Ismaaciil Taani Xuseen, Xaashi C abdillaahi Orrax, Maxamad Daahir Afrax** iyo **Cumar Siciid Bile** oo aanu la'aantood iftiinka arkeen.

Isku miirankeega, waxaan uurka uga mahadcelinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda; Mudane **Ismaaciil Cumar Geelleh** oo dadaalkii dheeraa ee dadkaas oo dhami galeen dunida u soo saaray. Wuxuu Madaxweynuhu sidii caadada u ahayd, dhiirrigelinta ka sokow, gacan deeqsinimo ka geystay daabacaadda diiwaanka.

Dadkaa iyo cid walba oo mudan in aan mahadiyo uurka ayaan tixgelin iyo xurmayn ugu hayaa, mahadi na ha gaadho.

Curiyaha

## *HIBAYN*

Hanaqaadistaydii
Hareeraha intaan dayey
Intaan hoos u fiirsaday
Hayaan dheer intaan maray
Hog waliba intaan galay,
Abaal waa halkiisoo
Haahaaban maayee
Waxaan kuu hibeeyoo
Hufan oo qurxoon iyo
Miyaan hadiyad raadcayn !

Dabadeed hayaankii
Miyay ila habboonaan
Hooyaalay gabay iyo
Inaan heeso curiyoon
Kolkaa kuu hibeeyaa !
Hayeeshee hongooboo
Waxaan hooyo ! qorayaa
Hadalkaagii weeyee
Maxaan kuu hibeeyaa ???

## *KAC TALLAABSO*

*Kac tallaabso oo tali adaa,*
*Lagu tabaayaaye,*
*Kac oo faafi Tawxiidka oo,*
*Tebi Islaamkaaga.*

***Waxay labadaas meeris ahaayeen kuwii ugu horreeyey gabay aan tiriyo, kaddib kolkaan ku fikiray inaan gabayga farta ku dayo sannadkii 1989kii dhammaadkiisii. Xilligaas oo aan aad ugu raadaysmay gabayo uu qoray Maxamad Iqbaal oo ahaa gabyaa u dhashay dalka Baakistaan. Gabayga, oo markaa iga ahaa isbilkeedin iyo tarjamaad-samayn, ayaan markii dambe ku darsaday fikraddayda oo aan meerisyadan kale raaciyey, kaddib markay luntay maansadii labadan meeris ay ka mid ahaayeen. Fikradda guud se waa tii Maxamad Iqbaal.***

Ninka taagan meeshoow maxaa
Tuurka kugu joojay ?
Waxan uu "*tareenkii*" ka tagay
Sow tolkaa ma aha ?
Taariikhda waxan meel ka galin
Sow tolkaa ma aha ?
Wax takooran oy cidi tabayn
Sow tolkaa ma aha ?
Tawaawaca* raggaa aan ka korin
Sow tolkaa ma aha ?
Waxa deyn la wada tiicayaa
Sow tolkaa ma aha ?
Waxan xaajadood toocsi* tahay
Sow tolkaa ma aha ?

***Tawaawac*** : *calaacal; cabasho*

***Toocsi*** : *tijaabinta iyo bilkeedinta muurka yaryar (geela ama fardaha).*

Waxan tuug xadaysaa u talin
Sow tolkaa ma aha ?
Shacab tororogleeyaa* cidladu
Sow tolkaa ma aha ?

***Tororoglayn*** *: hadal badan oo macne ka madhan samayn*

Talo kale ha joogtee dadkaan
Taraq* samaynaynin
Tukhun iyo dad aan beeranayn
Timirta geedkeeda
Oo turub ciyaaroonan rabin
Tacab inuu gaadho
Hadduu teneg ka liico na dad aan
Toosin garanaynin
Dunta niman tidcaynoo hu' tolan
Sow tolkaa ma aha ?

***Taraq*** *: kabriid; qaraf*

Iyagoo tabtaasiya dad aan
Soconin taagtooda
Inay madaxxa taaj wada geshaan
Niman ku taamaaya*
Iskujoog inay wada toshaan
Niman ku  taamaaya
*Taksi* jiidan inay wada helaan
Niman ku taamaaya
*"Tii-Fii"* * inay wada gataan
Niman ku taamaaya
Saxni-toolka* inay wada dhigtaan
Niman ku taamaaya
Tukaanley inay wada noqdaan
Niman ku taamaaya
Ama taajiriin wada noqdaan
Niman ku taamaaya
*Tilifoon* inay wada gataan
Niman ku taamaaya

***Taam (f):*** *(ku ...) muddo badan maanka ku hay.*

***Tii-Fii*** *: waa ereyga qalaad ee Tv*

***Saxni-tool****: erey loola jeedo saxniga guryaha la duldhigo ee soo qabta signalka dayax-gacmeedka*

Inay wada taqsiimaan caleen
Niman ku taamaaya
*Tabaakiyo siggaarka* na cabbaan
Niman ku taamaaya
Raggaa taallo wada taawiyaa
Sow tolkaa ma aha ?

Tunjileec waxa isku la dhaqmaa
Sow tolkaa ma aha ?
Faqiir aan tawaankiisa socon
Sow tolkaa ma aha ?
Wuxuu taajirkood dhereg tuffaa
Sow tolkaa ma aha ?
Dadkan beentu tawxiid u tahay
Sow tolkaa ma aha ?
Waxan diiday toolmooni sow
Adi tolkaa ma aha ?
Turxaan iyo waxaa ceeb dul tugan
Sow tolkaa ma aha?
Waxan toobadkeenkii ka tagay
Sow tolkaa ma aha ?
Cadowgood dadkaa taakulayn
Sow tolkaa ma aha ?
Dadkan aan tacliin taawinayn
Sow tolkaa ma aha ?

Ma tawaawaccaa kuu la baxay
Tuurta guradeeda
Mise waxa i taabtaan adiga
Toosin madaxxaaga ?
Kolley tacajubkaa aad qabtaan
Kuu tirsanayaaye
Tawfiiqda Eebbiyo adoo
Tiirsan magacciisa
Kac tallaabso oo tali

Adaa lagu tabaayaaye
Kac tusaale noo noqo dadkii
Toosni laga waaye
Kac oo *tooshka* aad haysadtiyo
Huri tiriiggaaga
Kac oo faafi tawxiidka oo
Tebi Islaamkaaga

DHAMMAAD

# *WAA MID AAN ARAG !*

*1993kii, oo ahayd markaan maansada farafaraynaayey, ayaan u fiirsaday waxyaabihii ka dhacayey adduunweynaha, gaar ahaanna dunida muslinka ah. Markaa anoo ku eegaya aragtidaydii koobnayd ee aan nololsha ka haystay ayaan qoray. Waxaan markaasi saarnaa* tareen, *gurcud na way ahayd. Mugdigii iyo cidla'dii na qayb bay ku lahaayeen.*

Dunidani madow ee mugdigu
Meel waliba gaadhay
Murug baan ka qaadoo ma karo
Inaan macneeyaaye
Musxafkii Quraankiyo xaqqii
Mawle ku cadeeyay
Mustafoow Rasuulkiyo sunnahii
Maxamad noo keenay
Muran dheer markii lala galee
Madaxa loo taagay
Masiibada ka weyn ee dhacdaa
Waa mid aan arag e

Manaaradaha eedaanka oo
*Moortar** lagu jiiday
Maatida la laynaayo ee
Meel kaste ba taalla
Maydkaa dhalaalee kufrigu
Miino ku asqeeyay
Marti oon ku nahay degelladii
Mawle nagu beeray
Maalkaan lahayn oo cid kale
Lagu masruufaayo

***Moortar** : Qori ka mid ah hubka waaweyn oo aanay tiiradiisu toosnayn.*

Masiibada ka weyn ee dhacdaa
Waa mid aan arag e

Majaraha ka lumay maamulkiyo
Mudaneyaasheenna
Musuqmaasuqoo midab qurxoon
Lagu mariimaayo
Xilkoo meherad loo qaatay oo
La isku maan dhaafay
Si mucaarad loo noqon jahliga
laga mabsuudaayo
Masiibada ka weyn ee dhacdaa
Waa mid aan arag e

Muslimiinta suusuuban oo
Macangag* loo haysto
Tuuggoo la maamuuso oo
Sheekhu magac beelo
Muruqoon shaqayn oo dadka na
Xeelad lagu maalo
Maskaxdoo dagaal muuqan iyo
Miidho lagu qaado
Masiibada ka weyn ee dhacdaa
Waa mid aan arag e

***Macangag*** : *qof madax adag oo aan gar qaadan*

Masjidkaa madluunkee dadku na
Ka ba masuugaayo
Makhmaaradaha oo lagu macnayn
meelo barakaysan
Dhiilladu markay qaylisoo
loo mashxaradaayo
Iyo muunaddoo mid ah hadda na
Midab-takoor yaalo
Masiibada ka weyn ee dhacdaa
Waa mid aan arag e

Mid kaloo ka sii daran haddaan
Miimka ka higgaadsho
Duqqan maamulkiisiyo dayacay
Malihii reerkiisa
Inan meheraddiisii hagroo
Madaxxa cooshcooshay
Marwo aan la garan meesha iyo
Milayga ay seexan
Maroorsiga hoggaankiyo raggoo
Madaxa loo taago
Maxay ugu mabsuudeen haween
Waa mid aan arag e

Waxaas oo masiibo ah haddaan
Marag kale u yeelo
Dacartoo la miiroo la yidhi
Malabka yaa hoorsan
Miinada qarxaysoo la yidhi
Mudhaha yaa iibsan
Maska halaqqa oo lagu macnayn
Mulacca rooraaya
Maroodiga bakayl magansadee
Madaxxa laadlaadshay
Maxaa lagu macneeyaa dadyahow
Waa mid aan arag e

DHAMMAAD

## *ABTIRSIIMO*

*Waxaan marnaba shaki ku jirin in qof walba ama bulsho waliba leedahay isirro u gaar ah iyo dhaqqan ma guuraan ah. Anoo taas ka dhaqaaqaya ayaan tiriyey maansadan si aan ugu tilmaamo dhallinta soo kacaysa wax ay ku abtirsadaan kuna faani karaan. Waxaan taas ka tilmaamay dhankii diinta, dalalka iyo dad wixii noo dhow. Ugu dambayn na bulshada oo ka kooban affar waaxood waxa looga baahanyahay in ay gacmaha is qabsadaan si loo gaadho horumar, barwaaqo, badhaadhe iyo nabad waarta. Waxaan maansadan qoray sanadkii 1995kii.*

Afkaygii irmaanaa
Igadh noqoy ayaamahan
Oo oodme ibihii
Buqdhan jiray aqqoontoo
Wuxuu ku andacoodaa
Murtidii abwaankee* :
*"Isha xidho afka na dhawr*
*Arag maqal warka na ood"*

*Abwaan* : *abwaanka halkan ku xusan waa Maxamad Ibraahim Warsame « Hadraawi »*

Talo aaway noqotaye
Aftidii ayaa bixin ?
Arjigii ayaa qori ?
Ardaydii ayaa bari ?
Alifkii ayaw dhigi ?
Amaahdii ayaa celin ?
Abaalkii ayaa gudi ?
Aleeshii ayaa tixi ?
Aloolkii ayaa guri ?
Yaa abuuri badarkii ?

Awrkii ayaa rari ?
Yaa jiri irmaantii ?
Ashkirkii na heensayn ?

Adigaan awooddiyo
Kuu dhiibay amarkee
Na abbaani qalinyahow
Ilays iyo iftiin noqo !

Ushii Muuse lala diray
Iyo noqo itaal kale !

Anfariir markuu dhaco
Kaan eersanaayiyo
Abbaanduulahay noqo !

Awliyada dhammaanteed
Kuwa Eebbe caabuda
Abkay tiirsadaan noqo !

Dadka kii irdhoobee
Ambadee habaaba na
Ergadiisii kaa dhigay !

Ataar-xume inkaar-qabe
Atoorkay gar qabanayn
Inkeyska na hubkii noqo !

Taladii ajawdee
Lagu ka la irdhoobo na
Cidda lagu aroorshee
Albaabkeeda marisiyo
Odaygeedii kaa dhigay !

*Bud :* budh

Abeesada budkeed* noqo !
Ayaxa na suntii noqo !
Sharka ooddii kaa dhigay !
Khayrka na albaabkii !
Ha engegine hibiqlee !
Orriyoo insaarixi* !
Abidkaa ba taagnow !

*Insaarixi (f)* : (*neef dhawaan dhalay*) *xoolaha kale ka soo horree oo ci'.*

Ambaqaadka sheekada
Afaafkeeda maansada
Mahad Eebbe gaadhsii
Nebigii udgoonaa
Salaan iilka ugu gee
Oo uunka maqashii
Ubax iyo in aan sido
Ergadii furqaaneed

Nin waliba astaan lehe
Waxaan aaminsanihiyo
Cidda anigu aan ahay
Indhooluhu ha eegtee
Udub dheer u taag oo
Eedaan ku jiid oo
Xaqa oogta ka caddee
Abaqaal ha waaree

Astaantaydu waxay tahay :
**Ilaahay** rumaysani
Kutubtii Islaamkiyo
Malagyada asraartiyo
Aakhiro rumaysani
Axad iyo Salaasiyo

Isniin iyo Khamiis iyo
Arbaciyo intii kale
Toddobada ayaamood
Mid na eed ma saaree
Wuxuu **Eebbe** ii qoray
Iyada na rumaysani

Ashahaadadii qiray
Waan oogay faralkii
In la urursho maahee
Addinkayga fidiyoo
Maalkii na eed tiray
Ayaamaha la soomo na
Afka awday oo xidhay
Xajka aaday oo tegay

Aayadaha Quraankiyo
Ereyyada Rasuulkaan
Amarka na ka qaataa

Haddii aabbe magacliyo
Isir lagu xafiiltamo
Islaamkaan ku faanaa

Abtirsiimadaydiyo
Asalkaan ku dhaati na
Waa Aadan iyo Nuux
Ayaad tahay na ma ogoli!

Gobol lagu ekaadiyo
Xisbi lagu adeegtiyo
Qabiil lagu ugaadhsado
Caqiidada Islaamkiyo

Iimaanku diidyoo
Aqoontaydu dhaaftoo
Arinkaasi waa been
Anigu na uf baan idhi!

Eedaanku meeshuu
Ka onkodo adduunyada
Ehel baan ku leeyahay

**Ubukh** iyo **Tajooriyo**
**Awdal** iyo **Hargeysiyo**
Agagaarka **Xamar** iyo
**Iimey** iyo **Mandheeriyo**
**Addiis** iyo **Shinniiliyo**
**Adari** iyo **Diridhabe**
Adhaxdiyo wadnaha iyo
Indhahayga weeyaan

Oogada **Xijaas** iyo
**Imaaraadka Carabtiyo**
**Urdun** iyo **Marookiyo**
**Aswaan** iyo **Abuujiyo**
Gobollada **Afqaan** iyo
**Anqariyo Istaanbuul**
Aduunyada dhamaanteed
Ashahaado meeshii
Ilaah lagu aqoonsadi
Unugyada jidhkaygay
Ku abbaarantahay oo
Iyagaan u heesaa
Kolla waan u ooyaa
Ilaalaan ku meershaa
Axdi baa na noo yaal

Agoomaha **Kashmiir** iyo
Ka ooyaaya **Boosniya**
Ee waayay aabbiyo
Aqalkii dugsoonaa
Ayuu uurku tabayaa
Indhuhu na la ooyaan
Oo iiga ba'ay gama'

Oogtaa la shiday iyo
Aqallada burburay iyo
Uurkaa la dooxiyo
Ubucdaa* la wadhay iyo
Duqaa ooridiisii
Iyo ubad wuxuu dhalay
Aroorida ka jiifiyo
Aahdiisiyo axdiisiyo
Eegmada qalloocdiyo
Ilmaduu iska tirayuu
Arag waxan lahaa iyo
Orodkii la gaabtoon
Usha ugu tukubayaa

*__Ubuc__ : calool; uur-ku-jir. Waxa ay maansadu tusmaynaysaa uurdooxashadii iyo kufsashadii sida foolxun uga dhacayay Boosniya iyo meelo kale oo muslimiintu degto*

Cadawgay Ibleys iyo
Nafta tii adeecdee
Amarkiisa yeeshiyo
Ururrada kufaartee
Ololaha dagaal iyo
Aargoosi bahalnimo
Inay nagu idleeyaan
Afyuumtay cabaaniyo
Arinkoodu siiyee
Makri noo aloosiyo

Gucundhada **Israa'iil**
Ragga ootay **Falastiin**
Affartaasi weeyaan

Usha ehelladaadu na
Eebada cadaawaha
Ogoobeey ka kululoo
Waa iin qarsoonoo
Ku qaboobin aayar e
Miyuu amar-ku-taaglaha
Werdigiisu "*ani*" yahay
Ammaantu na sedkii tahay
Shacabka na ugaadhsadi
Ka darrayn **Israa'iil** ?

Intaas oo cadaawe ah
Waxa igaga sii daran
Jirjirroole aadmiya
Kugu saba abboowiyo
Af-gobaadsi beenoo
Kolkuu kaa ag meero na
Ableydii gumeystaha
Kugu jara afweyntoo
Ilaahay xasuusnayn

Inkaar-qabe afkiisiyo
Uurkiisu waa labo :
Hadda waa Abuu Bakar
Hadhowto na Abuu Jahal
Islaamkuu ku dhaataa
Aayaadka diinta na
Horuu uga irdhooboo
Aqalkiisu waa naar

Axmaqiyo ardaalka ba
Qalinyahow awooddiyo
Xilka aan ku aaminay
Inaan aalad leeyahay
Itaal aan la garan karin
Adigaa ilhaamsane
Ereyyadan bal gaadhsii

Waxaan aaminsanahiyo
Astaantayda garataye
Anigu na ayaan ahay ?
Ayaan ahay  ayaan ahay ?
Ma ogtahay ayaan ahay ?

Aflagaado iyo been
Nin aan lagu aqoon oo
Xaqa aan agmarin oo
Runta lagu ogyahay oo
Ammaanada gutaan ahay
Ballan-oofiyaan ahay
Inan lagu nastaan ahay
Dan-yartiyo agoomaha
Dadka kii itaal daran
U adeega baan ahay

Geesi aabiyaan ahay
Ma aqbalo ihaanada
Eedaa-dagaal iyo
Awaaruhu markuu kaco
Dalkayga na ajnabi iyo
Isticmaar uu soo galo
**Axmad Gurey** sidiisii
Ama geesigii* **Eyl**
Iyo **Ilig** ka talin jiray

***Geesi** : geesiga maansadu sheegayso waa halgamahii iyo gabyaagii soomaaliyeed ee weynaa Sayid Maxamad Cabdille Xassan*

Libaax soo abraaroo
Lagu aarsadaan ahay
Olol iyo rasaas iyo
Eebiyo billaawiyo
Abley labo aflaan ahay
Onkod laga baqaan ahay

Mar haddii ammaankiyo
Nabad loo abaarsaday
Ooddeedu adag tahay
Arad lagu nastaan ahay
Laysku aaminaan ahay

Inankaa mar baan ahay
Mar na oday da' joogoo
Ummaddiisa haga oo
Hadimada ka eegoo
U arimiya baan ahay

Markuu oonku daashado
Abaaruhu ku raagaan
Duqqa alaliyaan ahay
Halkuu roobku ka onkodo
Ama ilo ka boodaan
Ku aroorsha baan ahay

Aafada dagaal iyo
Afeefaha colaadeed
Markay soo afuufmaan
Duqa oodda saaree
Nabadda alkumaan ahay

Mar kale na ilwaad-qurux

Edeb iyo asluub badan
Iyo ugub haweenoo
Ixtiraam u dhalatoo
Astaanteed xilshood too
La ammaano baan ahay

Ku ma ababin suuqoo
Casarkii ma oogsado
Ma aafeeyo beelaha
Waxaan saaka iibsaday
Amin kale ma hiifoo
Ka ma ooyo galab kale

Isir waxan u leeyahay
Aqoontoo la biirsado
Aqalkoo la laasimo
Asturnaan na lagu baxo

Isir waxan u leeyahay
Waalidkoon adeecoo
Anshax suubanaantiyo
Ixtiraamka aan qabo
Indhahaygu ka ma bogan
Ku ma taago eegmada
Uf na ku ma idhaahdiyo
Erey aan haboonayn

Waxa ii imaamoon
Abidkay ku daydaa
**Affadii Rasuulkee** *
Ammaan loo dhammeeyee
Aayaadka diinta na
Aqbashee rumaysiyo

*Affadii Rasuulka : Waa marwadii ugu horaysay qof muslima oo nebiga rumeeya, Khadiija Bintu Khuweylid*

Dumarkii Asxaabtooy
**Asma** ugu horraysiyo
Amran ina **Cimraaniyo**
**Aasiya** ayaan badan
Iyo hooyaday **Idil**

Mar na hooyo ubadkiyo
Aqalkeeda jiratiyo
Oori sharaf leh baan ahay

Awlaaddu waa dheef
Ilaahay ku siiyee
Waxa aan ku ababshaa
Caqiidada Islaamkiyo
Edebtiyo akhlaaqdiyo
***Al-Baqriyo Idaajaa***
***Anfaaliyo Alhaakumu***
Ama aayahiisiyo
Inuu hoyga **Aakhiro**
Abidkii xasuustaa

Aqalkaygu waa xero
Askar aan ku tabo baro
Kol na waa iskuul oo
Arday bayla joogtoo
Akhriskiyo qoraalkiyo
Ereyyada macaan iyo
Asluubtaan ku bixiyaa

Kol na edeg cibaadiyo
Mixraab aan ku ooyoo
Ku akhriyo quraankoo
An ku oogo faralkoon

Ku ekaado weeyaan

Alle mahaddii weeyee
Aqalkaa i deeqoo
Inaan suuqa aadoon
Ku illaawo qoyskiyo
Indhahayga meel kale
U ma taago abidkay

Odaygayga ku ma xumi
Gogolshiisa odax iyo
Ood-geyda qudhaciyo
Tiin ugu ma aasoo
Uurkiisa ku ma gubo
Urqunkii dhammaa iyo
Inanteennii **Aamina**
Islaan baa ku boodiyo
Ashkatiyo ergo an gu'in

Oogada jidhkaygiyo
Ardaagayga ka ma arag
Wax uu eegi karin oo
Ilshu aanay qaban oo
Neecaw udgoon oo
Eedaanka waaberi
La urshoo macaan iyo
Ubaxxoo aroortii
Indhahiisa furay iyo
Ugbaadkoo baxaan ahay

Asaagga ila jaarka ah
Uskag ula ma  meeroo
Balo ka ma abuuree

Axsaantaan ka taliyaa

Qalinyahow awooddiyo
Xilka aan ku aaminay
Afartaas xubnoodoo
Ididiilo dheer iyo
Aayatiin wadaagtoo
Abbaankiyo hoggaankiyo
Kooga amarka qaadti ba
Ulajeeddo mida loo
Alle aammintaan nahay

Irfi* baannu sidannaa,
Aqqoon baan ku daraynaa,
Ilbax baan ku soconnaa,
Sidaa uunka maqashii

***Irfi*** *: qalabka qodaalka ee dibida lagu xidho midkood*

DHAMMAAD

## *HABLAYAHOW WAR IGA GURA*

*Wuxuu gabaygani ahaa farriin ku aaddan haweenkii ka qaybqaadanayey shirkii lagu qabtay magaalada* Bikiin *ee dalka* Shiinaha, *shirkaas oo lagaga hadlaayey* "xoraynta haweenka". *Waxay aragtidaydu ahayd in ay bulsho waliba leedahay dhaqan gaar ah oo ku duugan uurkeeda iyo dhuuxeeda. Haddaba haddii la doonayo in la xoreeyo haweenka waa in la ilaaliyo dhaqanka dal walba, waxaan uga jeedaa : waxa laga yaabaa waxa meel ku suubban in meel kale aanu ku habboonayn, ama in ay dhibaatada Reer Galbeedka haysataa annaga na khusayn ee ay tahay inaan annagu ka fikirno mashaakilladayada. Waxaan qoray farriintan 30/08/95kii.*

Ma aqaanno gabaygoo
geeraar ma tiriyee
Inaan habar gambooley
Gocashada naftaydiyo
guubaabo siiyaan
U guntaday falkeedee
Hablayahow war iga gura

Guulloow Ilaahay
Nin waliba gartii, sii
Haweenka na gobnimadood
Wuxuu ugu gunaanaday :
*"Gabdhayahow sedkiin suga*
*Oo guur xalaaliyo*
*Nin garaad leh sahadsada*
*Garbo hayska xoorina*
*Guryihiinna laasima*
*Indhihiinna gaabsada*

*Jidhkiinna na gabbaadiyo*
*Maryo guudka kaga xidha*
*Iimaan gun dheer iyo*
*Cibaado na gargaarsada"*

Gees kale haddaan dayo
Markii godobta* laga galay
Xaqoodii la gaasiray
Ee suuqa lagu gaday
Godad dheer na loo qoday
Ee iilka lagu guray
Waxay galabsadeenee
Lagu gali na uu yahay
Gulufyada dagaalkiyo
Gurmad may galaysaa ?
Garta loo fadhiistiyo
Geed may tegaysaa ?
Ma la guursandoonaa ?
Mise garacyaley iyo
Gabray noqoni doontaa ?

*Godob* : *aano; dagkane; utun*

Waa male guracan oo
Golayaal shisheeyiyo
Gaaladu ku talisee
Gabbalkaa markuu dhacay
Gurcudku na madow yahay
**Nebi** geesinimadiyo
Xaqa lagu gardaadshoo
Gabbashada aqoon oo
Gaadhsii la yidhi baa
**Rabbi** ugu gargaaroo
Gacmahiisa hoos dhigay
Ilmadii ka gabax tidhi

Goob waliba tilmaan lehe
Gegadaas* bannaan ee
Gumburtu na ku taallee
Cibaadada u gaarka ah
Goor ay dadweynuhu
Bidix midig isgaadheen
Ayuu gacaladaydaay !
Ka akhriyey go'aankoo
Go' caddaaladeed iyo
Gibil nuura ku hagoog

*Gego* : *meel bannaan. Halkan waxa maansadu u adeegsadtay tilmaanta* ***Carrafo*** *oo ahayd goobtii uu* ***Nebigu*** *(nnkha) ka akhriyay khudbaddiisii u dambaysay, taas oo uu kaga hadlay xuquuqda haweenka*

Wuxuu yidhi: "garwaaqsada
Xaqqa gaar-ahaaneed
Hooyadu la gees tahay
Waxaad ugu garawdaan
Uurkaad gasheen iyo
Goshaad seexateen iyo
Gujadii horaaddada
Mirta gama'-u-diidkii
Markay iin ku gaadha na
Kol ba gees-u-cararkii
Inaad geesi noqotiyo
Guul-ku-la-jacaylkii!!

Janno gadashadeediyo
Guri daahyo weyn oo
Sariir gama' macaan iyo
Gogol jilicsan taalloo
Gabdho Xuuralcaynii
Gudihiisa buuxaan
Geedaha ku yaalla na
Shimbiruhu ka goohaan
Kol ba laan u guuraan
Geeraar macaan iyo

**Gabay ay ka tiriyaan**
**Ninka taasi goostoow**
**Garab-debacsanaantiyo**
**Gommaddeeda ka agdayo"**

Gebogebada sheegkada
Go'iwaaye wuxu yidhi :
***"Nin guhaadsha baa dheer***
***Ka gartee xaqoodii***
***U gudaaya baa dhow"***

Godkan kale haddaan dego
Maahmaah gabowdaa
Gabdhayahow waxay tidhi :
***"Guntaa laga tolaa weel"***
Waxaan uga gol leeyahay
Geyigaan ku dhaqannahay
Geeskani miskiinka ah
Waxaa guul u hanan kara
Waxa geediyayn kara
Oo dunida gaadhsiin
Waa gaari dumar oo
Garashiyo aqoon iyo
Edeb lagu gardaadshoo
Ogoow gabanno korisee !

**Gini** iyo **Malyuuneey**
Warkaad iga gurayseen
Inuu gudhay ha moodina
Maan gaadhin hadafkii
Weli goolkii maan dhalin
Galoof ololka badisiyo
Gabno dhiiqda ma ihiye
Illeen gaaxdii baan siday !

Guuxaad maqlayseen
Iyo gooha baxayaa
Afgobaadsi ma ahayn
Galaayuus na haba odhan
Gobanimo-u-dirir iyo
Waa gaaf arooseed
Oo loo galaabaxay

**Geeriyaad** dad joogoo
Kuu go'doomay meel dheer
Gurmad loo diraayiyo
Gacmo-haadin weeyaan

Dhaqan debad ka soo guday
Gaddaafada shisheeyaha
Gaashaan difaacoo
Giraangiriya weeyaan

Godadloow cadaawaha
Gumeystaha aqoontee
Gabdhaheenna hodayee
Durbaanka u garaacee
Ugu baaqay guul iyo
Xornimaan gelbinayaa
Iyo lagu-gabraartaha
Garaadkiisa maalayn
Gumuc iyo rasaasiyo
Hubka lagu garaacee
Lagu ganayo weeyaan

Warkii guudku waa kaa
Kani kale na waa gaar

Gebtii shalay nin kuu dabay
Adna aad ku garatee

Galimaayo aad tidhi
Gefkii uu sameeyiyo
Gardarrada ma daynin e
Shirqoolkuu guntaayuu
Gacmo kale ku xidhayaa
Gocornimo na waa taas !

Guurtida la saariyo
Weftiyada guclayn ee
Gundhinaaya madaxee
*"Tareennada"* gudbaayiyo
Gaadiidka duuliyo
Lagu gurayo doonyaha
*"Bikiin"* gogosha loo dhigay
Gar idiin ma naqayaan
Garaad niga maqnaa iyo
*"Galoon"* niima tolayaan
Oo ma ba geyaan taas
Balse gedo kalaa jira
Guntoodu na mid ay tahay
**Galladloow Ilaahay**
Godkuu shalayto aasay
Guga maanta faqayaan

Waa guuto weerar ah
Waa gulufyo shaydaan
Gol-qaniin-ku-maal iyo
Gurrac-kaga-danaystiyo
Affar gacan-ku-dhiigliyo
Waa gaadmo-dilayaal
Hayeeshee maxay goyn ?
Gartoodu ba ma dhaafsana
Gurcud inay ugaadhsani
Ama xaabo gurayaan

Godkuu shalay ka soo baxay
Doqqon baa gurguurtoo
Gadaal ugu hilooboo
Goodirka iyo cawshu ba
Gadoodoo ka baydade
Goshii lagu wareemee
Gurigiin ba' dumaroow !
Waa maxay garaadkani
Gumeysiga u baahdee
Garaaca u hamuumee
Garab maray xaqiiqadu ?
Gallad kale ha joogtee
Gambadii ma tuurteen ?
Timihii ma goyseen ?
Gabbal maysku yeesheen ?
Afka ma is guduuddeen ?
Surwaal gaaban iyo *jiib*
Garbagale ma xidhateen ?
Gaaddadiyo naaskiyo
Guladkii ma muuqdaa ?
Galabtii kol ay tahay
Daaraha guntoodiyo
Jidka ma is gadaanteen ?
Googoys ma noqoteen ?
Rag na waa geddiisoo
Haddii oodda laga guro
Gantaal kaa ma celiyee
*Aaheey !* guuldarriyo ciil
Gellin-dhexe mar ay tahay
Garac sow lamaad hoyan!

An soo gaabsho hadalkee
Warkaan guudka ku akhriyey
**Gini** iyo **Malyuuneey**

Waxaan uga gol leeyahay
Gurigaad ku nooshahay
Gammoorkiyo suntiisii
Gaaddiyo xajiinteed
Gumartiyo qadhmuunkeed
Gucundhiyo wareenkeed
Gubtaan lagu ma beeroo
Gobka* laga ma doorbido
Geedaha qadhaadh iyo
Gaagaabka hoosiyo
Garaska iyo geydhaha

**Gini** iyo **Malyuuneey**
Gudbay maansadaydee
Idinkiyo guddoon wacan

*Gob* : *geed weyn oo bixiya midho macaan oo la cuno.*

DHAMMAAD

# *DHURWAA*

*Xanuunka* "Siidaagu" (SIDA – AIDS) *waa masiibo lagu cadaabay aadamaha qarnigan cusub, waxaase dhammaan la qirsanyahay in uu aadamuhu ka aabbe yahay dhalashadiisa iyo faafitaankiisa. Haddaba waxaan ka mid ahaa dhawaaqyadii ka soo yeedhayey cid kaste oo danaynaysa bulshada iyo bedbaadadeeda. Waxaan is-idhi : bal ha lagu dayo, billoo la arke cid maqasha oo joogsata.*

*Waxa la dhigayey xafladdo lagu xussayey xanuunkaasi. Xafladahaasi iyo sidii loo dhigayey imay cajabin, waxaanan u arkaayey in la sii kobcinayo cadaawihii wax gumaadayey. Waxaan kaga qaybqaatay, taariikhdu markay ahayd 01/12/1995kii, maansadan oo aan u bixiyey magacan foolxun ee* "Dhurwaa".

Dhammoow kaan ka dheegmiyo
Dhudi hooyaday iyo
Dhallintiyo barbaartaay
Dadweynoow dhammaantiin
Nin waliba dhankiisaan
U la dhuuxi taladee
Dhegihiinna ii fura

Waa dhaawac igu yaal
Iyo dhiilo iyo murug
Dhulkeennii wacnaayee
Dhaqan suuban iyo sharaf
Diin lagu dhisnaan jiray
Inaan dhoobo marinnoo
Dhiriq* lagu xardhaayoo

***Dhiriq** : saalada xoolahu marka ay qoyantahay.*

Ceeb uga dhignaa dheeh
Dhalanteed na ma ahee
Dhaqan Reer-galbeed iyo
Cudur uu dhalaa yimid !!!

Farta saaray dhabankoo
Talo wayga dhaygag e
Dadweynoow ni dhaarshee
Dhurwaagani dilaagee
Nin wax dhimay ha joogee
Dhallaankii na weeraray
Ma dhulkuu ka soo baxay ?
Cirka muu ka soo dhacay ?
Ma dharaar nin joogiyo
Wefti dhoof ku yimid oo
Inna dhaafi doonaa ?

Ma dhab baa xanuunkani
Oo waa dhib iyo halis
Mise waa ba dhalanteed ?

Wax ba yaanan dheeraan
Dhurwaagani wax dilayaa
Dhexdeennuu ka soo baxay
Dhabteennaan ku haynaa
Dhaqaalaha ku siinnaa

Sow guurkii ka ma dhigin
Dhadhaab aan la mari karin
Dhilladii na may noqon
Habka dhuuni lagu helo
Lagu kabo dhaqaalaha
Ama reero lagu dhaqo

Barbaartiyo dhallaankii
Dhiddig iyo laboodkood
Gebi sow kumay dhicin
Dhabbadii na ka ma lumin

Dhinac kale haddaan dayo
Sow daaro dhaadheer
U ma dhisan khamaar iyo
Dhaladii* qadhmuunayd
Ninka xeerka dhigan iyo
Iska dhaafa diintee
Dhama geedahaa kulul
Sow geesi la ma dhaho !

***Dhalo** : quraarad; qaruurad. Maansadu waxay ku tusmaynaysaa khamrada.*

Dhurwaagani wax dilayaa
Dhexdeennuu ka soo baxay
Waan dhiirigelinnaa
Xafladaa ba loo dhigay
Oo dhaanto loo tumay
Dharaaraha daraaddii
Ciid baa badh laga dhigay !

Dadoow dhaawacaan qabay
Waxaa ii ba sii dheer
Dhurwaagaan ogaa iyo
Waxaad dhacamo mooddeen !

Dhidarkoo* ku weerara
Dhawaaq maad u dirataa ?
Aar dhibi casaysoo
Kayn *dhiida !* ka haya na
Wehel maad ka dhigadtaa ?

***Dhidar** : jaad ka mid ah dugaagga. Maansadu waxa ay dhidar ku tilmaamaysaa cudurka eydhiska (AIDS-SIDA).*

Caarada dhiskeeda na
Dhufays maad u aragtaa ?

Dhimbiil kugu dillaacdaa
Dharo way ka booddaa
Dhan na way u duushaa
Hadday kuu se dhowdahay
Dab ka maad ku dhiciyoo
Gabbaad maad ka dhigataa ?

Dheemaal gamoor baa
Dhuuntayda joogoo
Dhagax baan ka daba liqi
Ama aan ku dhaadhicin
Mid dhacaysa may tahay ?

Harraad bay dhufaanoo
Biyo waan dhex joogaa
Dhunkaashaa se ii roon
Mid dhacaysa may tahay ?

Ma bislaaday dherigii ?
Dhadhaarradu ma daaleen ?
Mise weli wax baw dhiman ?

Dhaartiyo daliilkiyo
Su'aalaha is daba dhacay
Waxaan nii hor dhigayaa
Cinjir baa wax naga dhabi
Dhakhtarradu ha qaybshaan
Dhallintu na ha doontaan
Ma wax lagu dhawaaqaa ?

Is dhexgala barbaartaay
Iska raaca dhinacyada
Oo suuqyadaw dhaca ?
Ma wax lagu dhawaaqaa ?

Dhooshuu jeclaadee
Dhalanteedka caashaqa
Debnaheeda lagu dhigay
Inuu dhuuqo mooyee
Ninka diinta dhawree !!!
U dhawaanin gabadh kale
"*Siidaagu*"* ku ma dhaco
Ma wax lagu dhawaaqaa ?

***Siidaa** : erey ka samaysmay ereyyo af faransiis ah (SIDA) oo tilmaama cudurka qarnigan ee eydhiska (AIDS).*

Farta saaray dhabankoo
Talo wayga dhaygage
Ma in aan dhammaannoo
Dhulka aan ka guuraa
Ragoow ! loo dhaqaaqoo
Loo dhaanshay haamaha ?

**Dhilaneey** walaaleey
**Dhuuxoow** ! ina adeer
Dhimashadu xaq weeyee
Dhabankaagan timirtiyo
U eg dhoolka waaberi
Ama dhayda xooluhu
Inuu dhadho ma jeceshahay ?

Dhafoorkaagan taagani
Inuu hoos u dhaadhaco
**Dhuuxoow** ma jeceshahay ?

Dhabarkaagan toosani
Inuu dhiico yeeshiyo
Dhacadiid ma jeceshahay ?

Xubnahaagan dhagaxii
Inay kaa dhintaan iyo
Kol ba dhicis ma jeceshahay ?

Dhiiggaad lahaydiyo
Dhididkii jidhkaagu na
Dhibta lagu sumoobiyo
Dheecaan inuu yahay
**Dhilaneey** ma jeceshahay ?

Jidhkaagii dhisnaayee
Billaawuhu dhambali jirin
Waranku na dhex mari jirin
Dhaxantiyo kulayluhu
Inay wada dhibaan ooy
Dhamac kaga darraadaan
**Dhuuxoow** ma jeceshahay ?

Waalidkii ku dhalay iyo
Kii kuu dhowaa iyo
Dhammaan ehelladaada na
Kol ba dhinac-u-carar iyo
Dhibta maad la jeceshahay ?

Adoo dhaawaccaa qaba
Dadku inuu ku dhaafoo
Dhinac kaaga weecdoo
Dheeldheel na lagu daro
**Dhilaneey** ma jeceshahay ?

Waxaas oo dhibaato ah
Iyo kuwa kaloo dheer
Dhagarqabe waxaa sida
Ama dhala xanuunkaa
Ka dhawaaqday duniduye
Miyuu yahay wax lagu dhego
Ama loo dhawaadaa ?

Dhamaantiin dadkaygoow
Haddii aad u dhuganteen
Dhurwaagani wax niga dila
Dhakhtarro na u waydeen
Dhaqan-suubanaantiyo
Dhawrsanaanta weeyaan

**Dhilaneey** dhar adu xidho
Dharka kiisa adag xidho
Ragga kaan dhanayn ee
Iimaanku dhiman yahay
Qalbiga na ka dhaawacan
Haw caddaynin dhoollaha
Dhudhunkaaga yuu qaban
Oo yuu ku dhaawicin!

**Dhuuxoow** ina adeer
I dhegayso adigu na
Nin waliba wuxuu dhami
Waxaa loogu dhaanshaa
Dhiilkuu samaystaye
Hablahaad la dhalatiyo
Midda kuu dhaxaysiyo
Kuwa ay dhalayso ba
Haw dhurin masiiboo

Qalad yaanu kaa dhicin
Naftaada na ha dhaawicin

Dadka kii wax dhalayoow
U dhis ubax dhiggiisa ah
Intuu dhaafin dawgiyo
Dhabbadii xaqqa ahayd
Ama uusan dheeraan

Maansada haddaan dhigo
Dhammaadkeeda sheekada
Salaan baan ka dhigayaa
Dhaliishiyo gefkeenna na
**Guullaheen** ha dhaafee
Aamiinta ila dhaha
Aamiin !

*DHAMMAAD*

# *SOOYAAL*

*Sanadkii 1996kii ayaan hortaba farriintan u diray dadka Soomaaliyeed ee garanwaayey meel ay iska soo qabtaan. Waxay dad badani ku macnaynayeen dhibaatada Soomaaliya ka taagnayd in dibedda laga wado oo cadaawe ka taliyey, anna waxaan joogay in dhibta cadaawuhu ay jirto laakiin waxyeeladeedu soo baxayso marka qofka ama ummadda la dhibayaayi cadowgeeda ku garabgasho. Waxaan u jeedaa : jeermi-syadu waxay waxyeelaan qofka marka uu isaga dacfi ku yimaaddo!!! Kolkaa labaa is-biirsaday : taariikhda co-laadeed ee diinta ku salaysan iyo burburka nololsha soomaalida ku dhacay.*

Sooyaalka taariikhdu waa
Saymo dirireed e
Sawir keliya weeyoo hadda na
Subaxba waa cayn e
Samo iyo barwaaqiyo wanaag
Lagu sinnaanaayo
Saxariir abaar iyo colaad
Lagu saraayoobo
Siffaheegu waa kaasiyoo
Waa silsiladdaas e
Socod weeye iyo joogsad iyo
Seexad iyo toos e
Nin na dhaxal ma siiyee rag baa
Sooha xadhiggeed e
Saakiyo waxaa loo tartami
Weliba saakuun e

Intaan seefta qaateen guntiga
Suunka ku adkeeyay

Ma seexdoo habeenkii **Cabdoow***
Saahid baan ahay e
Subcintii **Quraankiyo** werdiga
**Saatir** igu beego
Salligii **Rasuulkiyo** salaad
Aan u sara joogo
Markaan saacaddoodii guteen
Gees iskugu sooco
Hammi aan la soofiyo socdaal
Ii hadhay sugiye
Sawirkayga uun baa fadhdhiya
Saanta* guradeed e
Jawigaan sabbeeyaa sidii
**Nebi Suleemaan e**
Dhul shisheeye soormaan diffaac
Uga sameeyaaye
Sijilaadka taariikhda iyo
Siraha loo dhiibay
Sebankaan waraystaa wuxuu
Sugay qoraalkood e
Sadarrada waqtiga soo socdaan
Saray u eegaaye
Saadaashu waxay sheegaysaan
Sahamiyaa goore

**Sirilaanka Saxaraha Galbeed**
Hawdka **Sarayeefo**
**Shiinuhu** dhulkii uu suntaday
Ama se **Ruush** siiyay
Saxariirta **Shiishaan** heshiyo
Seefta lala fuulay
Seeraha **Kashmiiree Hindiya**
Sabab la'aan hayso
Masjidkii* saciidada lahaa
Sidatan loo iibshay

***Cabdi*** *: waa Cabdi Samirre oo nin gabyaa ah, qoraha buuggan na ay saaxiib yihiin.*

***Sáán*** *: haragga òògada nafleyda qaarkeed ku rogan. Halkan ereygu waxa uu tusmaynayaa gògòl.*

***Masjid*** *: meel dadka muslimiintu ku cibaadaystaan. Masjidka maansadu tilmaamaysi waa Beytul Maqdìs oo ay Yuhuudi hadda ka taliso*

Sufeydaa carshiga fuulshanee
Salowga beeraysa
Shacabyada saluugga u dhintee
Sarakac loo diiday
Silicaa tolkay wada barkaday
Ama se saameeyay
Ma sahwiyin ma seegani inaan
Wada sifeeyaaye
Sawirrada badh uun baan rabaa
Soo bandhigidood e

Gobol saancadkiisii batoo
Seban ba ooyaayay
Saxardiid na magacciisu yahay
Ama se **Soomaali**
Sakatiga ka joogee naflaha
Seexadka u diiday
Sababaha abuuraan rabaa
Soo bandhigidoode
Ama siifaddaa waxa dhalaan
Nii sarsari qayb e
Samirroow* bal soo celi hadduu
Siiggu* iga rooro

Sartan qudhuntay seeskaa burburay
Surimmadaa oodmay
Sagalkaa masiibee kiciyo
Siigadiyo boodhka
Dadkan wada sabooloobay ee
Sadaqadda u dhoofay
Khariidadda in laga suuliyaa
Magaca **Soomaali**
Ninka saaka moogow ogoow
Waad silloon tahay e

***Samirre*** *: waa Yaasiin Cabdi Samirre oo ay qoraha buuggan saaxiib yihiin.*

***Siig*** *: jaad ugaadhdha ka mid ah oo weyni iyo dherer isku darsaday.*

Sal ballaadhan bay leedihiyo
Xididdo, saaxiib e
**Sareeyoow Ilaahay** markuu
Nebiga soo saaray
*Sallallaah caleyhiye* ! Markuu
Sarakacee yeedhay
Saxaabadii uu soo diray markay
Beledkan soo gaadhay
Waakay siraadeen xaqay
Seban ku baaqeen e
Nin sareedo kuu wada samaa
Lagu abaalaaye
Dadka kali markuu saydhay ee
Saafi laga waayay
**Soomaali** waxay yeeshay baan
Nii sawirayaaye:
Lo'doo soof ku dheeraatay oo
Weyday waxay siibto
Iyadoo sidaasiya hadday
Sabadkii soo gaadho
Qarankii* la siin jiray kolkii
Samada loo daadsho
Siday ugu qamaamtay kol na ba
Uga sokaynaynin
Sed weeyaan **Ilaah** na la damcay e
Sow ma ka la boobin
Dabadeed la maan seexanin e
Sadarka maan qaybin
Sabaddada **Kismaayiyo** ilaa
**Seylac** dhinaceeda
Dadku wada sinnaayoo dhammaan
Diinta lagu soorye
Kuwii seracca beeraayay ee
Galayay **Siidaamo**

***Qaran*** **:** *laanta hadhuudhku ka baxo; qasab.*

Ee sanamka caabudi jiree
Saatir garanwaayey
Iyo saala-weynoow Axmaar
Soohdintaa degayay
Raggii suurad loo soo xardhuun
Sudhayey laabtooda
Eedaanka subixii miyaan
Sawdka maqashiinin
Siqiir iyo kabiirkood miyaan
Sadarka deeqsiinin

Nin horow sumaysnaa haddaad
Malab ku sooryayso
Sonkortuu u qaataa illeen
Dacar sideediiye
Sawirkii horeetiyo sidaan
Ararta kuu siiyay
Saxardiid waxaa salowga baday
Siifaddiyo ciilka
Farta saara waa taa sirtaad
Iga sugayseen e!

Wax ba yaan sarbeebin e haddaan
Saafo hadalkayga
Saddex eebbe niman caabudoo
Sun iyo deebaaqa
Oo saaqyo lagu siini jiray
Saaxirnimadooda
Cadceeddaa siraaddiyo xaqaa
Cidi sakhaalaynin
Inay sacab ku daahaan miyuu
Siiyay malahoodu
Si-xun-loo-cadaab Qays miyuu
Sabarad weyn qaatay

Sujuud been ah goortuu derbiga
Saaray goroddiisa
Soddon jeer intuu dhaartay uu
Samada haahaabtay
Shacbi uu sakhraanshoo khamrigu
Saaqay madaxiisa
Miyuu yidhi saraakiil dhabiyo
Saajacyaan nahay e
Saddexdii **Ilaah** een lahayn
Meesha laga saarye
Suldaankii awowgiin ayaa
Loo safanayaaye
**Soomaali** weeyaan waxaa
Seefta nii luliye
Idinku na sidaan nigu ogaa
Ka ma sokaysaan e
Inaad ka ba sarraysaan ayuu
Diinku sugayaaye
Hurdo yay ni saasin e markaan
Subaxa eedaamo
Warmahiinna soofaysta oo
Weerar kula siibta

Illeen sanamyo weeyoo caddayn
Ma ba su'aalaan e
Sheekhii intii lagu salliyay
Ma isla sooyaantay
Siinbaar* waxaa loo tumoo
Lagu sakhaalaa ba
Sahal bay u qaateen inay
Noo saraarmariye
Silaaxii cusbaa iyo intaa
Seefta laga daayay

***Siinbaar :*** *qalabka muusikada mid ka mid ah oo dhuun dheer oo la afuufo leh oo codad kala duduwan laga soo saaro; foodhin*

Serged iyo sergaan iyo miyaa
Samayda loo taagay
Siliciyo wareerkii qabsaday
Selel miyay qaadday
Sokeeyiyo xigaal iyo waxay
Seedi tabanaysay
Iyo saaruq oo idil miyay
Sawdka maqashiisay
Ciidankii saliibkee fadhdhiyay
**Rooma** sabadkeeda
Iyo **Boortaqiis** siifadoo
Damacu saameeyay
Inta siidhi la isugu dhuftee
Gebi la sooyaamay
Khariidadda in laga suuliyaa
Magacca **Soomaali**
Sarkaal iyo siyaasi ba miyaan
Sacabka loo taagin
Saxeexii go'aankaa miyaan
Suulka lala boobin
Saha maalinkaa sare kiciyo
Saaka waxa joogi
Ogoow waa isa-sudhantaasiyoo
Waanay socotaaye
Fanka seefta soomaaliyeey
Waad u sidataaye
Hayeeshee hadday seeto hayn
Way sirgaxantaaye
Markay taladu kaa siibateed
Seegto marinkeeda
Fartaadaad ayaa subagga daray
**Cali** su'aashaaye
Metal soo dhoweeyaad kolley
Iga sugaysaan e

Geedkuu xar iyo suus galuu
Suulku jebiyaaye
Metal kale na waa "*sayniskoon*"
Suurad niga siin e
Sanka laydha lala raacayaa
Waxa sabbaynaaya
Saxar iyo sun iyo *jeermis* iyo
Siigo iyo boodh e
Waxay *sababul-mawd* tahay markuu
Ruuxu saacido e
Sinsaarada cadaawaha intaad
Ceebta wada saarin
Saranseerka kaaga ah maxaa
Suubiyoo qariyay ?
Raaskii hadmaa laga sinqaday
Seban la oollaayay
**Sayidkii** wuxuu niiga digay
Sawka lagu soofay
Sawdkii **Suldaan Timacadde na**
Sowka weli yeedhi
Garaadkoo suquli* kaa gashaan
Saaxi noqonayn e
Suugaanta aan tirinayiyo
Sadarka maan daysto!

*__Suqul__ : gooryaan yaryar oo ku dhalsha caloolsha dadka iyo duunyada ba.*

Darajada sallaan dheer ayuu
**Saatir** guud dhigay e
Sitaar niga ma saarnoo dhammaan
Saafi loo aragye
Safaahada haddaan la iska dayn
Saancadkiyo beenta
Waxa aad sugtaan waa **Axmaar**
**Seylac** soo dega e

Ama **Saaxil** oo lagu qabsado
Saacad gudaheed e
Ama soohdintoo idil ayuu
Saaxirkii iman e
**Soomaali** gaalowday oo
Sanamyo jiidaysa
Iyo saaruqyuu furi **Markiyo**
Suuqyadii **Xamar** e
Sawaabkiinna aakhiro na waa
Saqaro naareed e
Labadaa siyood ka la calmada
Suurtii la afuufye !!!

DHAMMAAD

## *DARUURYAHAY !*

*Waxay ahayd xilli ay dhaceen abaaro xoog badan oo weli ba raagay. Abaarahaasi way caamyeeleen Geeska Afrika oo dhan, laakiin waxaa si gaara ii taabanaysey ta dalkeenna ka dhacday. Haddaba waxaan maalin maal-maha Ilaahay ka mid ah la kulmay daruur i dul socotay, kolkaasaan ashkato ula badheedhay. Waa wax aad u qu-rux badan marka aad la sheekaysanaysid ma-noole, eed ula dhaqmaysid sidii wax nool ama kas iyo garasho leh !!! Waxay ahayd taariikhdu : bishii 2aad 1996kii.*

Daruuryahay walhanaysaa
Hogolyahay darroorkiyo
Di'itaanka maagani
Dalkayaga miyaad arag
Hoos ba maad u soo dayin
Oo maanad daalacan ?

Gugii aan ku dagannee
Dadweynuhu u sare kacay
Danab faaruquu siday

Karantii iyo dayrtii
Damaashaadka loo riday
Iyagu na ka sii daran

Dirirkii ka daba yimid
Kaliishiyo diraacdii
Tifiqdii ba loo diid

Fadad dulundulcayn baa
Dushayada yimaad oo
U dullaama gees kale

Daruuryahay walhanaysaa
Dhulku waa daleed weli
Dabaylaha xagaagu na
Weli way durduriyaan

Daruuryahay walhanaysaa
Dixdu maaggad* weeyaan
Weli daad ma soo marin
Durdurkii na uu gudhay

*Maaggád* : *meel oomane ah, aan bìyò lehayn*

Daruuryahay walhanaysaa
Dugsi ma laha kaymuhu
Geed diiran baa hadhay
Inuu daato na u dhow

Daruuryahay walhanaysaa
Dooxyadu cagaar ma leh
Darif iyo dareemiyo
Caws la daaqi ku ma hadhin

Daruuryahay walhanaysaa
Dhulkii doogga bixinlaa
Dogob* baa ka qiiqoo
Dambas baa ka sare kacay

*Dògòb* : *geed gabòòbay oo jidhíf yeelshay, dabadeed na dhacay*

Daruuryahay walhanaysaa
Dabjoogtii dhammaatoo
Dabarkeedii uu go'ay
Xeryahay dugsanayeen

Adigaa dul haadee
Dugsi maad ka aragtaa ?

Hashii deelka lagu dhigay
Loo jeexay dacaluhu
Ma durduriso aradkee
Duleedkay hambaadhaa

Dillo iyo sacii bullo
Iyo duumo qaynbaar
Doobi lala ma hoos galo
Ruqay gebi u daadteen

Doobiro Af-madow iyo
Laxdii deylo-gaab iyo
Deero na dhaqaaq ma leh

Dameerkii caddaayee
Dusha laga silbado laa
Ma dubaaxsho aradkee
Diqsigaa ku shawrama

Daruuryahay walhanaysaa
Duurjoogtii cayntiyo
Daayeerkii buuraha
Wixii habar dugaagaa
Badh baa duday badh baa diday
Badh baa duufay oon jirin
Badh na dalal kale u carar

Inta noole duusha na
Wixii baal dillaacsaday
Galawgii* na daaduun
Debedduu u haajiray

***Galaw*** *: shimbir si gaar ah u ci'da oo laga helo dhulka oomanaha ah; fiin*

Daruuryahay walhanaysaa
Dhankan dayay duqbaa yaal
Dantu ciishay baa yaal
Daankiisa gaajadu
Dubkii ay caddaysoo
Dhexdu duubantaa yaal

Dhankan kale haddaan dayay
Dumar wada lammaan oo
Dekedaha dhex jiifoo
Abaaruhu dubteen oo
Dulsaar haysan baa yaal

Daruuryahay walhanaysaa
Gabdho doonan baa jiray
Doob guur rabaa jiray
Dareenkiyo jacaylkii
Damaciyo kalgacalkii
Iyo debacsanaantii
Dacdarraa ka maydhoo
Nin waliba dantaa tidhi
Hareeraha ha daymoon

Ducay faraha taageen
Dembi ay faleen baa
Dib u soo harraatiyay

Daruuryahay walhanaysaa
Diiftiyo dhibaatada
Dulligiyo masiibada
Dadku uu ka simanyahay
Anigani duryamayaa
Dareen gaara mooyee
Duwanaan se ka ma lihi

Daruuryahay walhanaysaa
Waa kaas dalkaygii
Duunyadiisii waa taa
Dadkiisii na waa kaa
Adigaa dul haadee
Degellada dhammaantood
Dugsi maad ka aragtaa ?

Dayaxxii ma soo bixin
Gurcudku na dam weeyaan
Gibil buu na nagu daday

Taariikhda duugga ah
Dib haddaan u soo faqay
Daawidii indhuhu gudhe
Dabadeed na ciil dhacay

Daruuryahay walhanaysaa
Dafdaf aan wax lagu qaban
Dibindaabyo iyo been
Gugii noo darraadee
Nagu aa'ay danabkiyo
Dayr baan ku aragnoo
Darraad baan u samirree
Ma dirkoodii baad tahay ?
Dakaniyo col maad tahay ?
Ood na daawanaysaa ?
Mise daacad baad tahay ?
Ducashadu ma been baa
Mise doobigaygaan
Daruuryahay hogaystaa ?

Daruuryahay walhanaysaa
Kol ba dhinac u durugtoo

Dandanaanigaagiyo
Damdamtaadu badatay e
Waxaad daadahayneed
La soo duushay waa maxay ?

Ma dabaylo xoogliyo
Daad soo butaaciyo
Duufaan ayaad tahay ?
Mise mayay darrooroo
Lagu diirsadaayoo
Dambaskii na fuuliyo
Naga maydha diiftoo
Raqdii dooxa taalliyo
Duufkii isgaadhee
Dekaduhu la ciireen
Daadkiisu qaadiyo
Sida malabka doocaan
Dambar hoorayaad tahay ?

Daruuryahay walhanaysaa
Waxaad hayso soo daa
Dantayada hadduu yahay
Ha na dayso gaajadu
Doogu na ha soo baxo
Xooluhu ha dararaan
Ha dubaaxsho qaarkood
Qaar kali ha dananaan

Dhulku darayamuusiyo
Cagaar haysku dedo oo
Maryo dooga ha huwado

Da'da yari ciyaar iyo
Farxad haw dareeraan

Wilwilaha ha doontaan
Carruurtu na duleedkiyo
Dawyada ha buuxshaan

Codkii diiranaayee
Dookhaygu la qabsaday
Dareenkayga kicin jiray
Shimbirii dudubin jiray
Soo-dillaacca waaberi
Daray dheer ha fuulaan
Heesaha ha duubaan
Ha tuntaan darbuukoo
Defka haw garaacaan
Haddii kale daruureey
**Daa'imkii** na uumee
Adiga na ku soo diray
Derbi dheer ha kaa rido !
Dushayada ha kaa raro !
Dihashada dhul kale gee
Ku dillaac **Israa'iil** !

**Daa'imoow Allahayoow**
Adu deeqsi baad tahay
Anigu na daciif iyo
Addoon daallan baan ahay
Waxaan kaa dalbeen rabo
Kol na ii ma diidid e
Ducadaydu waxay tahay
Dhulkoo nala dekaamiyo
Dayaxiyo cadceeddiyo
Xidigaha dushaydoo
Soo daata naga hay !

**Daa'imoow Allahayoow**
Baddood nagu dirtaa iyo
Dabaylaha wax jiidhiyo
Duufaanno naga hay !

**Daa'imoow Allahayoow**
Dadkii aan ka beermiyo
Dalka aan ku noolahay
Naxariis ku daymoo
Ka dulqaad dhibaatada
Dulligiyo cidhiidhiga
Dacdarada abaaraha !

**Daa'imoow Allahayoow**
Dembigaan samaynee
Deeqdaadii naga xidhay
U dulqaado **Eebboow** !
Ducada na **Ilaahoow**
Dib ha noogu soo celin !

DHAMMAAD

## *CABASHO AGOON*

*Waa wiil yar, waa agoon. Wuxuu ogaa dhul nabad ah, hooyo koolkoollisa, aabbe kolba kor u qaada oo ciyaarsiiya. Ma ogeyn waxa ka dhacaya hareerihiisa. Subax aanay cidi ba ku ballamin ayuun baa la isla oogsaday. Waa maxay ? Waa dagaal sokeeye oo indho wax lagu arko iyo dhego wax lagu maqlo toona lahayn. Wax kaste ba cagtaa la marshey. Sawaxanka baxaya wuxuu u haystaa golay iyo ciyaar, waxaa se la soo gaadhay gurigoodii, wax uu filayn na uu dhacay : waxa la dilay aabbihii, hooyadii iyo walaalkiiba.*

*Ciiddii markii la wada ciyaarayay, taariikhdu na ahayd 28/04/96kii ayaan ku soo maray fikir-socdaal, anoo jooga Jabbuuti, isaga oo goobtii weli yuurara !!*

Ciiddii Islaamkee
Cosobloow **Ibraahiim**
Cirka laga farriimaay !

Ciiddii Islaamkee
Cassiisoow **Ilaahay**
**Ismaaciil** ku caymshaay !

Ciiddii Islaamkee
Cawaaloow **Rasuulkii**
Caalamkoo dhan loo diray
**Rabbi** uu cibaadiyo
Calaamo uga yeelaay !

Ciiddaan jeclaayeey
Dharaar caafimaadoo
Caajis aanu jirineey
Ciyaar iyo boqooleey !

Calooshoo xumaan iyo
Colaad aan lahayn iyo
Carabkoo macaan oo
Cid kaste ba salaamaay !

Ubax cayn waliba loo
Carfi iyo udgoonliyo
Caleen laysku dhiibaay !

Dharaar caafimaadoo
Cishqi aan u qabayeey
Cisho la ma illaawaay !

Ciiddii Islaamkaay !
Dharaar caafimaadeey !
Cudur-daar ma leehoo
Cafis maan helaayaa
Haddaan cidhif is buuroon
Caruurraha farxaaya na
La ciyaari waayoon
Keli ciil la yuuraro ?
Mise caasi baanoo
Canaan baan mutaystoo
Ciqaab baa la ii qoray ?

Dharaar caafimaadeey !
Maxaan kuu ciyaaraa
Maxaan calamo qaataa
Maxaan cagabidhoodaa

Cashiirrada siyaartaa
Tuke* baal cad baanee !

Dharaar caafimaadeey !
Maxaan kuu ciyaaraa
Heesaha codkoodiyo
Shimbiraha cidoodiyo
Culumada dhegaystaa
Ciyaalka na ku raacaa
Tuke baal cad baanee !

Dharaar caafimaadeey !
Cimrigaygu waa tiro
Cadadkeedu toban yahay
Carjaw liicsamaysiyo
Curdin jilicsan baan ahay
Cududdaydu ma adkaan
Waqtigu na ma ceesee
Dhulkuu igu cacamiyoo
**Caloow** aabahay iyo
**Cadar** hooyadey iyo
Curadkii iga weynaa
Mooryaan caqiidiyo
Caqli aan lahayn baa
Cagta marisay waa hore
Cariishkii dab lagu huri
La dareersay cuudkii
Cidlaan maanta joogaa !!

Dharaar caafimaadeey !
Indhahaygu waa ceel
Wejigaygu waa caad
Timahaygu waa ciid
Cagahaan ku joogsado

***Tugke** : shimbir madow oo hilibka cuna; qambaar. Abwaanku wuxuu halkan ku muujinayaa sida uu cunugga aan lebis wadan uga tagkooranyahay carruurta kale ee lebisan maalinta ciida*

Qolof baa cuslaysoo
Kabo way ka caageen
Calooshaydu waa madag
Cabitaan sharaab iyo
Cunto shalay ba maan arag
Kol cambuulo ay tahay

Feedhahan cidlada yaal
Calal aan dulsaariyo
Caw aan ku jiifsado
Ciidyahay ma haystoo
Cirkaa ii hagoogoo
Camuuddaan ku seexdaa

Dharaar caafimaadeey !
Maxaan kuu ciyaaraa
Cunug ooyayaanoo
ku cadaaban **Xamaroo**
Qof ciidsiiya waayoo
Caloolyow la jiifee!
Maxaan kuu ciyaaraa
Cunug ooyayaanoo
Cuqdadaysan baanoo
Cadho dhaamisaanoo
Ciil koraya baanee!

Dharaar caafimaadeey !
Ma cayaayiraayoo
Ma bilaash ciyaayee
Waxa caynkan ii galay
Waxa ciilkani i baday
Cudur uu qabiil dhalay
Ayaa soo cabaadoo
Shacabkii cadaabnaa

Kol keliya cantuugoo
Cidaadaha ka yeeloo
Cashiiriyo xigaaluu
Nin waliba nin cunay oo
Aniga na cadaawuhu
Igu calali gawskoo
Caatada i haysaan
La calaacalaayaa

Cajab iyo la yaabeey !!!
Ma dhulkaa ila caymaday ?
Ma cirkaa igu soo dumay ?
Ma bad bayla caaridday ?
Ma waallaan la cararoo
Caqligaa iga meelmaray ?
Ma waxaan ka ciyayaa
Ceeryaan ahoon jirin ?
Mise kaymo curuf iyo
Cadaaladi shaqayn oo
Cid ba lagu xurmayn oo
Dugaag ku cartamaayaan
Casharrada ku qaataa ?

Cajab iyo la yaabeey !
Caku eedda calankaay !
Cuqubada dalkaygaay !
Cawrida agoontaay !
Canyayuubka noloshaay !
Cindigayga jabayeey !
Cimrigayga lumayaay !
Cidladiyo haraadkaay !
Ciilkiyo baroortaay !
Cidhiidhiga i haystaay !

Cajab iyo la yaabeey !
Fanka ciidankiisiyo
Codkarkii halkuu maray ?
Maxaa culimadii helay ?
Aawaya cuqaashii ?
Cirroole na miyuun jirin
**Ilaahay** cuskanayoo
Waxa hadhay carruur iyo
Carmalkuun bedbaadshoo
Codkaygani maqlaayaa ?
Mise deyr ceshaa jira
Cabashada agoomaha ?

Culimada wax layntaay !
Cafaariid dagaaleey !
Dugaagga is cunaayoow !
Coomaadiyaashoow !*
Hubkan lagu carbaadhiyay
Ciddeed ugu gargaarteen ?
Calankeed ku dhaliseen ?
Cuudkeed ku dhiciseen ?
Cadowgeed ku jebiseen ?
Maxaad caawa haysaan ?

*Coomaadi* : *jaadadka gorgorka mid ka mid ah.*

Ciddaan la hadlayaayeey !
**Ilaah** caadilaa jira
**Kitaab** ceeb lahayn oo
Wax kaste ba caddeeyiyo
**Rasuul** caalimaa jira
Caqiidiyo xaqbaa jira
Cilmi iyo aqoon iyo
Caqli saafiyaa jira
Caado aan xumayn iyo
Curfi toosan baa jira

Su'aal cadho ku daabacan
Bal aan soo cidaadee
Camalkaad samayseen
Tee buu cuskanayaa ?
Ama aad u celisaan ?

Carshi laysku laayiyo
Qabiil lagu collooboow
Maxaad dawlad calanliyo
Qaran aad u celiseen
Cahdigii* badaawada !
Maxaad curaddo layseen ?
Immisaa cagooloo
Curyaan aad ka yeesheen ?
Imisaad cidlayseen
Ama caydh u bixiseen ?
Cabsidii **Ilaahay**
Maxaad kala carrawdeen !

*Cahdi* : *(waa erey carabi ah) xilli; wakhti*

Cabbiroo qiyaasoo
Cid kaste ba waraystoo
Cilmiga na dhegaystoo
Taariikhda ceeb iyo
Cambaar baad la hoyateen

Dharaar caafimaadeey !
Waxaan kaa codsanayaa
Cudurkani tolkay helay
Ha ka caafimaadee
Bal ku caawi waanoo
Inay ku cibraqaataan
Codkaygaasi gaadhsii

Dharaar caafimaadeey !
Nabad curadtay noo noqo !

Cirkoo mayaygu hooriyo
Caaniyo barwaaqiyo
Cadceeddoo iftiintoo
Gurcudkii ka carariyo
Cuqdad-maydha noo noqo !

**Casiisoow Allahayoow** !
**Alloow** ciiddan soo celi !
Anigoo an ciil qabin
Cid wali na walaal iyo
**Caloow** aabbahay tahay !

**Casiisoow Allahayoow**
**Rabboow** ciiddan soo celi !
Dhulkoo wada caroosoo
La calool samaadoo
Nabad lagu caweeyoo
Carwo loo dareeroo
Carruuruhu qoslaayaan !

**Allow** ciiddan soo celi !
Dhulkoo dawlad calankiyo
Shacabka ba cisaysiyo
Ciidan nabadda eegiyo
Madaxweyne caadil ah
Loo caleema-saaroo
Doog iyo cagaar baxay !

**Alloow** ciiddan soo celi !
Iyadoo curyaankiyo
Carmaltii la saaciday
Oo caydha laga baxay!

**Casiisoow Allahayoow** !
Dadkii cararay soo celi !

Cidhiidhiga qurbaha iyo
Celiyada shisheeyaha
**Rabboow** nooga soo celi !

**Casiisoow Allahayoow** !
**Caloow** aabbahay iyo
**Cadar** hooyaday iyo
Dad wixii carraabee
Ceelkii madoobaa
Inta ciidda lagu shubay
Cidla lagaga soo tagay
Cafiyoo **Allahayoow** !
Ku casuum jannada oo
Cadaabkii ka dheeree !

Ciiddii Islaamkaay !
Dharaar caafimaadeey !
Caano iyo nabadeey !

*DHAMMAAD*

## *WAA SOO GUDUUDTAY*

*Waxa dhacda in badan in dadku kala dareen noqdaan, kala dabci iyo kala abuur ba. Talo kasta oo la iskugu yimaado na waa lagu kala duwanaadaa. Ma jirto fikrad iyo ujjeeddo gaar ah oo aan ka lahaa, laakiin waxaan maansadan marayey xilli (bilshii 4aad 1996kii) aan naftayda la sheeko badnaa oo deganayn. Waxa laga yaabaa in aan kaga baxsanaayey sheekooyinkaa badan ee nafta, waxaan se doorbiday in aan ka soo qaato baadiyaha sawir mar walba dhaca oo markhaati u ah ismaandhaafka : waa labo walaal ah iyo hashoodii...*

Gagadoonka waayuhu
Kol ba labo is geyin buu
Gogol mida ku seexshaa

Hashaydani godnaatee
Gaajada la liicdaay !
Geydhiyo gunuunucca
Galaayuuska iga daa
Ku ma gabin dhankaygee
Waxa sida tan kuu galay
Gocor bayla kaa jira
Garashiyo aqoon daran
Dhaqashada na an geyin
Oo geel ba loo dhalin!

Hashaydani godnaadtee
Gaajada la liicdaay !
Ku ma gabin dhankaygee
Waxa sida tan kuu galay

Gurranoow walaalkay
Ayaa gocashadaydiyo
Taladii aan gaadho ba
U daruura gaashaan
Aniga na guhaad iyo
Igu qaaday guulguul

Markuu roobku gaagaxo
Ama uu galgaal yahay
Alalka iyo guuraha
Habeenkii la soo gudo
Wax la soo gurguurto ba
La soo gaadho ceelkii
Is gadaamo qayrkay
Anna geyfanaantii
Gorofkii madoobaa
Gunta aan ka soo bidho
Sow waa geddiisee
Intuu gees ka joogsado
Ma gembiyo darkaagii

Haddaan gudunta qaatoo
Inaan kuu garaacoon
Kuu gooyo doono na
Geedkii an fuulo ba
Waa biri-ma-geydoo
Gacmahaa ku laabmiye
Ama waa gamoor oo
Geelu ba ma daaqee
Maxaa geedka kugu diray
Ayuu igu guhaadshaa

Nirigtaadan gaabani
Habeenkay go'doontay
Garanweydo xerada na

Anaa baadi goobee
Guriguu iska seexdaa

Haddii guuto weerara
Ama guluf colaadeed
Galab lagu la beegsado
Giiryaale weeyoo
Gaashaan ma qaatoo
Ma gumaado cadowgee
Sida gilingilka* u carar

*Gilingil* : *shimbir yar oo madaxxa cad oo aad u feejigan*

Markay gaajo qabato na
Gacal buu iska yeelaa
Guntiguu adkaystaa
Go' buu kuu hagoogtaa
Candhadaadan gudhan ee
Galoofowday waa hore
Ayuu goondhabeeyaa
Ama godol ka raadshaa
Iyo gaax an jirin oo
Gacantuu ku mariyaa
Geeraar ku seexshiyo
Gujjuu kaaga maalaa

Hashaydani godnaatee
Gaajada la liicdaay !
Gurranoow walaalkay
Gar na iga ma qaatoo
Horaan uga la giigee
Xalay gellin-dhexaadkii
Ayaan gocasho-boodkii
Gogoshiisa ugu tagay

Si aan good la weeraray
Ama aar gaboodya leh

Ugu galay godkiisii
Gellin iga ma raagin e
Kol uun gawska may dhigay
Ma gilgilay jidhkaygii

Wuxuu yidhi ma goohiyo
Gartii lagugu baabiyo
Gabay baad la socotaa ?
Gacanqaad na iga diid

Gadaal baan u joogsaday
Ka gaddoon ayaan idhi
geydhaadi baan tabay
Gamaskaan wareentoo
Anigoo gemboon baan
Afka gacanta saaroo
*"Gugii waa kan baaqdoo*
*Geyi laga hayaamuu*
*Ku habsaamay geeluye*
*Danta guud an eegnoo*
*Ha la guuro"* baan idhi
*"Ku ma gaadhin"* buu yidhi
*"Guunyadu luntaan"* idhi
*"Maxaa kaa galuu"* yidhi
*"An aroorsho geelee*
*Keen gorofka"* baan idhi
*"Ma ba geydid"* buu yidhi

Waxaan idhi : *"gabooboow*
*Gurranoow walaaloow !*
*Ima galin warkaaguye*
*Aan gorfayno xaajada"*

Goroddiisa kor u lali
Gacmahiisa wada saydh

Indhahiisa igu giir
Gees waliba na iga eeg
Go'aankii na wuxu yidhi :
***"Kolla gaabsanmayside***
***Gardaradan badheedhka ah***
***Ani hayla soo galin"***

Hashaydani godnaatee
Gaajada la liicdaay !
Garaadkaygu wuxu yidhi
Gibil na iga saarayn
Gurranoow walaalkay
Intuu golaha jiifee
Talo ay ka go'antahay
Anna ciilku hay gubo
Adna gaajadaw samir

Hashaydani godnaatee
Gaajada la liicdaay !
Garaadkaygu wuxu yidhi
Gibil na iga saarayn
Gabbalku ba hadduu dhaco
Waxaa soo gadaal mara
Waa soo guduutee
Guubaabadaa hay !

DHAMMAAD

## *DHIMBIIL*

*Anoo u dhoofay dalka* Maaleesiya *oo waxbarasho na u tegey ayaa, ani iyo ardaydii kale een la socday, waxa nagu soo dhaweeyey dhallinyar Soomaaliyeed oo aad ii cajebisay. Dabadeed markii ay fursad ii siiyeen in aan halkaa ka hadlo ayaan ugu deeqay maansadan oo aan iyaga si toos ah ugu ammaanin, laakiin sababt ayaa u sharaf ahayd. Waxaan sidaa u yeelay si cid wali ba miisaan uga dhigato oy u horjoogsato muraayadda maansada. Waxaan ku sheegay sidaan u sawiranaayey dhallinta lagu meel mari karo. Waxay ahayd/02/1997kii.*

Dhulku wuxuu qoslaayuu
Dhoollaha caddeeyaa
Ubax dharab dul yaal iyo
Dhirta midhaha bixisiyo
Kuwa cadarka dhiiqiyo
Cagaar wuxu ku dheehdaa
Dhabankiisa saaraa
Markay samadu **Dhuuxoow**
Soo dhawrto dunideey
Dhulka hoos u eegteey
Dhibaatada abaartiyo
Dhaqannada is-jiidhiyo
Dhalan-guurka aragteey
Raxmad **Eebbe** dhaanshiyo
Dhibco rooba oydaa

Anna dhaxanta jiilaal
Ama dhalalo dayreed
Ka ma dhabo jidhkaygee

Dharka waa ban saaraa
Kolka aan dhex joogsado
Dhallin aan ku diirsado

Haddaan dhidibbada u tumo
Maansadan dhimbiisha ah
Metel soo dhaweeya na
Haddaan miiska soo dhigo

Sidii kayn la dhawroo
Dhirteedii is-qabatoo
Dhamastiyo maraagiyo
Dhuurtiyo higlada iyo
Dharkaynkiyo galoolkiyo
Dhumaygiyo cadaaddiyo
Dheentiyo madheedhkiyo
Dhiddinkiyo sarmaantiyo
Baxarsaafka dhererkiyo
Dhumucda ba ku caan baxay
Dhammaantood walhanayoo
La dheelliyay culayskoo
Dhuwankoo bislaadiyo
Dhanfaruur macaaniyo
Dheemaalku daatoo
Ballaygu na dhex jiifoo
Rahu *dhaa* da ! ka hayoo
Dhinac kale dabayluhu
Dhabanka u salaaxaan
Dharaartii shimbirahoo
Dhoorka uga baxayoo
Dhaqankooga gaarka ah
Cod ka dhiibanaayoo
Mid waliba dhiggeedii
Ka dheeree is-leedahay

Anna waxan dhawaaqaa
Waxaan dhiirranaadaa
Dhab waxaan u heesaa
Dhallin aan ku diirsado
Kolka aan dhex joogsado

**Dhuuxoow** dadkoo idil
Qof dhaqaaqa gabay iyo
Dhoorrey kol ay tahay
Nin waliba wax baa dhibay
Markaasuu u dhoofaa
Saqda-dhexe u toosaa
Dhaayaha u waayaa
Dhegaha na u beelaa
Qaar baa u dheelmada
Ama dhimasho door bida
Oo **Aakhiro** u dhaxa.
Nin kaste na waxaa dhibay
Waxa uu ku dhaatee
Uurkiisa lagu dhigay
Dharaartuu haleelo na
Dhulku qaadan waayaa
Aniga na waxay dhibay
Xididdada dhexdoodiyo
Dhuuxiyo wadnaha iyo
Waxa dhiigga ii galay
Dhab waxaan u aaminay
Nololshu ba dhunkaal iyo
Laf la dhuuxay inay tahay
Dhadhdhankeegu milix yahay
Dhallinyaro hadday jirin

Dulmi yaa ka dhiidhiya ?
Dhiigooga yaa hura ?
Kolkay dawlad dhalata na

Dhidibbada ayaw tuma ?
Danta yaa u dhididoo
Dhaqaalaha ayaa kaba ?
Dadka dhoohan yaa haga ?
Markay talo dhammaatee
Doonidu dhaqaaqda na
Ayaa dheelitaankiyo
Dhicitaanka uga ba'a ?
Dhaxal maaha sharaftuye
Yaa u dhabar-adaygoo
Kala baxa dhadhaab adag ?

Rag an dhawri weeyaan
Dharaartood se weli tahay

Dhallin weeye diintiyo
Dhabta hooyadood iyo
Wixii dherebta* lagu baray
Weligood ka dheeraan
Dhaqan reer-galbeediyo
Wixii dhoof ku soo galay
Dhegta aan u raaricin
Dalkooda na dhurwaagiyo
Ka ilaasha dhidarkoo
Dhinacyada ka joogsada
Shacabka na an dhaadhyin e
Ku xambaara dhabarkoo
Dhaqankoo xumaadiyo
Ka ilaalsha dhugatada
Oo dhuuni-raacciyo
Dhiigmiirashada neceb

Dhallintaan ku diirsadi
Dhiddig iyo lab weeyaan
Dhammaantood tol weeyaan

***Dhereb*** **:** *harag la xardhay oo la qurxiyay oo dhallaanka lagu xambaaro, lagu na seexiyo.*

Hadday debed u dhoofaan
Waa dhaan aqoon iyo
La soo laabma dheeraad

Dhallintaan ku diirsadi
Dhaldhalaalka noloshiyo
Dhabaqdeeda beenta ah
Dhab intay u qaataan
Naftooda u ma dhiibaan
Waxan dhuuni galin oo
Saxadooda dhaawaca
Dhirta xoolo daaqaan
Hanti ku ma dhammeeyaan
Sigaarka na ma dhuubtaan
Geedaha dhanaan iyo
Ma dhamaan biyaha kulul

Waqti dheeman lagu gadin
Ma dheelaan khamaar oo
Qosol ku ma dhammeeyaan

Dhallintaan ku diirsadi
Dhusuq sooma laaqdaan
Uskagga na ma dhuuqaan
Dharka* ay hillaabtaan
Dhegdhegga u ma quudhaan
Dhoobada ma mariyaan
Dhegadka na ma saaraan

*Dhar* : hu'; marashi

Dhallintaan ku diirsadi
Fac weeyaan u dhaargalay
Inay dunida dhaafaan
Si ay taas u dhaliyaan
Intay dhaan aroorshaan
Soo dhuuxa waxa jira

Dhulka lagu horowmaray
Garaad aan dhama'ayniyo
Inta ay ku dheehaan
Dhaqankay lahaayeen
Dhaxalsiiya qaar kale
Oo sii dhamaystira
Dhiskii ay bilaabeen

Dhallin weeye dawgiyo
Dhabbaday ku joogaan
Oodaha dhex yaal iyo
Dhudhubteeda garan oo
Dhib wixii hor yaalla na
Dhacan-dhacan iskaga gura

Dhallintaan ku diirsadi
Haddii dhaawac lala rabo
Niman dhiirran weeyoo
Habka looga dhuuntiyo
Dhabbarada yaqaan oo
Dhaqaaq-joog u tababaran

Qaddar baa wax dhaafshee
Haddii dhoogta lala helo
Niman weeye dhaartoo
Weligood is dhiibin e
Iyagoo dhursugid qaba
Dhutiga ba ku meel mara

Dhallintaan ku diirsadi
Dharaartay is khilaafaan
Ama dhaco is-maan-dhaaf
Nin na dhagax ma qaatoo
Ma dhirfoo ma diriree
Horta ways dhegaystaan

Dhigta doodda keentay
Kol ba dhinac ka tiirshaan
Waxa lagu dhammeeyaa
Dhunkashiyo is-gacan-qaad

Dhallitaan ku diirsadi
Waa dhawrto-diid oo
Dhulkooday ka maalaan
Dhaqdhaqaaqa nololsha na
Dhammaan way tixgeliyaan

*Iskuul* kooga dhiga iyo
Ka shidaaya dhuxushiyo
Dhakhtarkiyo tumaalku ba
Iyagay ka dheegmeen

Dhallintaan ku diirsadi
Dhihis iyo wax-ii-dhiib
Iga-dhici cadaawaha
Mid na kugu ma dhaafaan
Dhankay kaa xigaan uun
Dhayal loo ma soo maro

Dhawaaqaan maqlaayoow !
Inta aad tahay ka dheeree !

Dhimbiilshaan arkaayaay !
Dhamacdaada sii huri !

Habeenyahow na dhaaf oo,
Haddeed kuu dhammaatee
Dhulkayaga iskaga guur !

DHAMMAAD

## *SIRTA NOLOSHU WAA ADI !*

*Waxaan dhoofay oo aan dalka ka tegey anoo naf kale qalbiga kaga lammaan laakiin se la socon. Markii an gaadhey halkii aan ku socday, oo ahayd Maaleesiya, ayaa waxa igu soo kacay xiise oo iga dhigay nin daad qaaday. Waxaan hadh iyo habeen ba markaa wehel ka dhigtay gabay iyo guux. Waxaan tiriyey maansadan sida fiican u muujisay dareenkaygii 30/03/1997kii.*

**Simaneey** naftaydaay !
Sadarrada **Quraankoo**
*Sabbixiyo Walleyl* iyo
*Saad* iyo *Wassaafaad*
Calanka u sidaan iyo
Salawaadka **Nebigiyo**
Salaantii Islaamkoon
Salka ubax u dhigay baan
Hud-hudkii **Suleemaan**
U soo saaray baalkee
Ayaamaha Salaasada
Xilliyada Salaadda na
Subixii mar laga baxay
Ayuu sudhi albaabkee
Ka saar oo qalbiga saar

**Simaneey** naftaydaay !
Kalgacayl sidiisa ba
Ma siffeeyo qalin oo
Sadar lagu ma qeexoo
Ma suureeyo gabayguye
Sir weeyaan ku daabacan

Halbowlaha salkiisiyo
Surimada waraabshiyo
Sambabbada dhexdoodiyo
Seedaha wax qaadoo
Suugaan dhammaanteed
Haween saracyadoodiyo
Sabarkiyo sibraha iyo
Socodkiyo dhaqaaqiyo
Sanqaroor gammaan iyo
Sunnayaasha lagu dhigay
Saraw dhaafi weydoo
Solladiyo* halkuu yaal
Sallaan way u waydee
Sirta noloshu waa adi !

*Sollo : meel ragkó ah oo sare. Waxa badanaa la dhigtaa waxyaabaadka la rabo in ay gacan carruureed gaadhin.*

**Simaneey** Adduunyadu
Samadaasi weeyaan
Adna siinaddeediyo
Dayaxaa la sudhay ee
Ka siraadi baad tahay !

**Simaneey** adduunyadu
Waa sadarro daabacan
Cidda lagu sifeeyiyo
Saxeexeedu adi yahay !

**Simaneey** Adduunyadu
Soor iyo sed weeyaan
Dhadhan laga sugaayoo
Laga sooci karin oo
Saxansaxo udgoonliyo
Subaggeegu adi yahay !

**Simaneey** Aduunyadu
Harraad ku ma samaatee

Samsamkii **Rasuulkoo**
Saxar aan lahayn iyo
Biyo saafi yaad tahay !

**Simaneey** Adduunyadu
Fannaan wuxuu sameeyiyo
Suugaan hadday tahay
Sancadii qurxooniyo
Sawdkeedu waa adi !

**Simaneey** Aduunyadu
Hadday tiro sugnayn oo
Ka sokaysa toban oo
Sagaal dhaafin ay tahay
Siyaadaad ka leedahay !

**Simaneey** adduunyadu
Samaan iyo hadday tahay
Sareediyo barwaaqiyo
Sinnaan iyo walaalnimo
Sumaddeedii baad tahay !

**Simaneey** adduunyadu
Salow iyo dhibaatiyo
Silic iyo abaar iyo
Saxariir hadday tahay
Sabirkeedii baad tahay !

**Simaneey** naftaydaay !
**Sacaadiyo Hibaad** tahay !
**Suleekho** na mar baad tahay !
**Saxarliyo Sahraad** tahay !
Kol na **Suubban** baad tahay !
Mar na **Saafi** baad tahay !
**Siraad iyo Sedaad** tahay !

Mar na **Seynab** baad tahay !
Anna saamigaygiyo
Saaciidadaydiyo
Saldhigaygii baad tahay !

**Simaneey** dharaartii
Saacaddii madoobaa!!
Sacab maad lulaysoo
Ma sabooti baa dhacay ?
Kuwii siday farriintee
Soo diray waraaqaha
Ama soo kac igu yidhi
Ma sun bay i waraabsheen ?
Sixir may igu taabteen ?
Sidee baa la ii karay ?

Sax inaan ahayn oo
Saraayiyo fal aan qabay
Wax i suuxshay mooyee
**Sirilaanka** goor aan
Dusheeda sabbayn iyo
Saq-dhexaan baraarugay
Sawirkaygii baan helay
Sadrigiyo wadnaha iyo
Saabku na i madhanyahay
**Ilyaas** baan sariirtoo
"***Siman aaway*** ?" baan idhi
"***Xaggee baan u soconnaa ?***"
"***Haadkani sabbayn iyo***
***Gaadiidka samada na***
***Maxay saaray ?***" baan idhi
"***Oo suunkan igu xidhay ?***"
"***Sidee baan u soo koray ?***"

**Simaneey** naftaydaay !
Soddon jeer intaan kacay
Sow kaa ma raadcayn
Dadkii sarabka loo dhigay !

**Simaneey** naftaydaay !
Naftu waxay i siisoon
Ku hammiyay siddeed jeer
Inaan ka ba sannaadhoon
Saqafkeeda jiidhoon
Daruuraha siyaaxoon
Saaruukh la soo ganay
Sidiisii u soo lalo

Soo dhaadhacaygii
Cidlaan saabir joogsaday
Halkii aan ku soconniyo
Sabadkii markaan imid
Cirkaan saacad eegoo
Gacmahaan sarow diray
**Saadtiroow Ilaahay**
Subxaan laga ma quustee
Weli waan sugaayaa

Saaxiibbaday iyo
Dadka kaan su'aali na
Jawaabtuu i siiyaa
Waxa ay ku simantahay :
*"Berray soo baxaysaa"*
Ama *"sahan dambay iman"*

Sebi laga arooroo
Been lagu sabaayoo
La siraayo baan ahay

**Simaneey** naftaydaay !
Qalbigay saddama oo
Waan suluglemeeraa
So'dii aan fadhiista na
Dhulkaan samay ku jeexaa

Salaaddiyo cibaadada
Sahwi bayga kala dhima
Subcintii **Quraankiyo**
Werdigii sugnaa een
Weligay samayn jiray
Isa seegnay waayadan

Saxal iyo Marriikhiyo
Nin **Shuhuura** sudhan oo
Illeen saaqan baanee
Sawdka iga baxaayiyo
Sallax aan ku joogsaday
Suulkayga taabtaan
Sanqadhaadi moodaa

Subaxoo dillaacoo
Dahab lagu sibaakhiyo
Dayaxoo siraadiyo
Ubaxoo samaysmoo
Sayaxii dul yaal baan
Sawirkaagii moodaa

Saqda-dhexe habeenkii
Markuu seexdo qayrkay
Odxo lagu sinbiidhmaa
Ii saarma gogoshoo
Sas baa igu abuurmoo
Madaxay saloolmoo

*"Siinyaallo"** bixiyoo
Sintaan ugu fadhiistaa
Suxulkaan wareentaa
Fartaan dhabanka saaraa
Mar na waxan saloogtaa
Saqafkiyo albaabada
Sidaas baan suxuurtiyo
Eedaanka subaxii
**Simaneey** ku gaadhaa

***Siinyaal** : (erey faransiis ah) signal*

Siliciyo dhibtaan qabo
Samadaa ilmaysoo
Dhirtaa ubaxxa saydhoo
Shimbiruhu **Sareedooy**
Cidoodii ka saahide
Anna hadal ka soomoo
Soortii ma cuno oo
Hurdadii ma seexdoo
Jidhkii baa i suuqmoo
Saxadii naftaydu ba
Khatar bay ku sugan tahay
Haddaan gaadho saakuun
Adoon **Suubbaneey** iman

**Simaneey** naftaydaay !
Sudeef* iyo dalxiis iyo
Dawaaf suufiyeed iyo
Suuqmeerid u ma bixin
Salowgiyo dhibaadtada
Saxariirta aan qabo
Dibi soofay ma ihiye
Sababteenna weeyoo
Sahan baan ku maqanee
Ha saluugin maalmaha

***Sudeef** : dhulmar; dalxiis*

Sebanka na ha ceebayn
Samirka na ha moogaan
Sekadii jacaylka na
Anigaa isa saaraye
Sida aad u jeceshahay
U seexoo u soo toos

Dharaartaan sugayniyo
Aroos lagu samaado na
**Saatir** baan baryaayaa
Inuu suurageliyee
Soo raac dabaylaha
Safaaraadka dunidiyo
Sawir-qaadayaashiyo
Kuwa qora saxaafaddu
Dhammaan way ku sugayaan
Intaad soo baxayso na
Mawlac aan siyaartoo
Sawirkaagu yaallaan
Qalbigayga kuu sudhay

**Saatiroow Allahayoow !**
San-ku-neefle oo idil
Haddii aanad saacidin
Talo suubin maayee
**Alloow** sahal ammuuraha !

**Saatiroow Allahayoow !**
Samray oo adkaystaye
**Alloow** sahal ammuuraha !

DHAMMAAD

## *GELIYA LAABTIINNA*

*Aniga iyo saaxiibkay Xassan Sh. Cali, oo aan isla joognay* Maaleesiya, *ayaa waxa na wada helay daltabyo oo waan xiisoonnay. Kadib markaan habeen isla soo jeednay een u fiirsaday wixii Xassan hayey ee tiiraanyo iyo murug ahaa, ayaan illaaway taydii oo waxa aan ka doorbiday in aan tiisa ka hadlo. Waxa aan isku dayey in aan farriin u dhiibo dayaxxa oo habeenkaa aad u ifayey ila na soo jeeday. Waxay maansadani ku socotaa wiilashii uu Xassan kaga soo tagay Xamar iyo afadiisii. Taariikhdu waxay ahayd 21/04/1997kii.*

Gabbal dhacay habeenkoo mugdiga
Dunida gaadhsiiyay
Dadkoo wada gamaanyooday* oo
Gogosha loo hoyday
Oo gebi* la seexdoo hurdada
Gaax la miranaayo
Waxa aan la gawriiro ee
Gegada ii saaray
Waxa aan la guuxaayo ee
Gama'a ii diiday
Gaaridaan jeclaadiyo waxay
Gabanno ii haysay
Ayaan galab ka soo dhoofayoon
Soo gadaal maray e
Garaadkii **Cisaam** baan tebiyo
**Aanas** oon gabay e
Waxa gubaya laabtaydu waa
Gocashadoodaas e
Dayaxyahow gargaar baan rabiyo
Gacan walaaleed e

*Gamaanyood* : *lulood; hurdood; hurdo ama lulo ha ku saaqdo.*

*Gebi* : *dhammaan; idaylo*

Adaa guri ku hoyanaynin iyo
Gogol la seexdaaye
Adaa ii garaabaaya oo
Guda habeenkiiye
Adaa garan waxa i haysta oon
Garab ku weydiin e
Gacanqaadka ii dhiib adaa
Gacallahayga ahe

Nin gasiirad joogoo qalbigu
Gaardiyaan ahay e
Gorgor baadadkii laga guroo
Gaydhan baan ahay e
Gaadiid an raaciyo ma jiro
*Tigidh* an goostaaye
Adaa badaha guuxiyo ka lala
Gebi wax joojaaye
Adigaa Galbeed aadayoo
Garan dalkaygiiye
Waxaad sii guclayso ba markaad
Beleddadii gaaddho
Geyigaan ka soo dhoofay iyo
**Xamar** markaad gaadho
Goobtii **Bakaaraha** ayaad
Garani doontaaye
Rugtu geesta bidix bay halkaa
Kaga gudboonayd e
Intood gorodda laalaadisood
Gacanta sii dayso
Hoygay galaan iyo markaad
Garato muuqooga
Guddoonsii salaan gaar ahoo
Gebi ahaantood ba

Jidhkuun baa go'doomoo
Dalkii gaadhi karahayn e
Waxaad iiga geysaa in uu
Gurigu ii muuqdo
Waxaad iiga geysaa in aan
Goor kaste ba joogo

Waxaan geesiyaashaan dhaloow
Guure ugu dhoofay
Idinkoo ganuunkii dhamoo
Gama'san oo jiifa
Gogoshiyo halkaad seexadteen
Waxan u gawriiray
Gellin waxan duljoogo ba waxaan
Gacanta nii saaray
Gafuurkayga waxan nii duldhigay
Ama afkoo guuxi
Ilmo gobo'da haysaa waxaan
Niigu gabax siiyay
Waxan socod u goosteen guntiga
Xoog iskugu giijay
Garbadii dareenkiyo waxaan
Geed ba uga booday
**Aasiya** gunteediyo dhul aan
Geela lagu maalin
Dhul aan giirre soofiyo lahayn
Goodir miranaaya
Garanuugta cayntiyo dhul aan
Gool la qalanaynin
Digir iyo galley iyo dhul aan
garowga xiisaynin
Gasiin waxan niqiin iyo dhul qoosh
Lagu ganaanaynin

Dhul geedkii ad qaado ba besbaas
Gorodda loo saaray
Oo geedagaal iyo la cuno
Milixda oo goor ah
Dhul gumeysi diidoo hadda na
Gaalo lagu beeray
Oo soo-galaytida la dhaho
Gebi ba reerkeenna
Gujo iyo gulgula-doobin iyo
Guluc laguu eego
Dhul laguu garaabayn haddaad
Gees u yara baydho
Gurmadkii walaal iyo dhul aan
Gacal na ii joogin
Waxaan galo waxaan gudo dhul aan
Laygu garanaynin
*Malay** hadalka loo gaabsho oo
Gaadmo kugu laaya
*Maaleesiya* waxaa igu gabree
Geeddi igu keenay
Guulguul *ustaad* iyo *kalaas*
Goor kaste ba jooga
Itixaanno gaashaamo adag
Igu gufaynaaya
Geddaydaa nin joogaa wax baro
Waxa geyaysiiyay
Ama geylanaan* iyo wuxuu
Golongol ii gaadhay
Gaajada waxaan ugu samreen
Seexad uga giigay
Jidhkaygii galaallaa waxaa
Gibil madow saaray
Waxa goday dhafoorkee indhaha
Goofka iga yeelay

***Malay*** : *waa magacca loo yaqaan dadka ku dhalshay ee ku dhaqan dalka Maaleesiya.*

***Geylanaan*** : *hawllanaan; dedaal badnaan.*

Gas waxaan u yeesheen timaha
Goynta uga daayay
Inaan keli gannoodiyo dadkoon
Gooni uga joogo
Gantaalaha dareenkiyo qalbiga
Gocasho boodkiisa
Gidaar tiirsigaygiyo xubnahan
Wada gariiraaya
Iyo goonjab madaxxa i jebshiyo
Socodka oo gaaban
Waxaasoo galiilyo ah waxaan
Guudka ugu qaatay
Bal gardaadi baan leehay oo
Libin ha gaadhaan e
Waxaan uga golleeyahay ba waa
Gaagab-bixintiin e
Guulaamo rooboo curtoo
Soo gudaa jira e
Gabbaadiyo waxaan nila rabaa
Guri la seexdaaye
Gaajiyo iyo abaar siifadeed
Baa guyaal jiri e
Guunyiyo aqoon baan rabaa
Niga gargaartaaye
Haddaan gebagebeeyoon warkiyo
Hadalka soo gaabsho
Murtidani gabowdee qalbigu
Gaaxday iga hooya :
Gudin iyo hangool iyo williyo
Gorofkii haaneedka
Iyo gogoldhig weeyaan waxaan
Gaadhi karayaaye
Ninkii gayfan uun baa hantiya
Guusha magacceed e

Nin gaasiray naftiisoo gembiyay
Gorofkii aad siisay
Inuu godob ka sheegtaa hadda na
Waa gef iyo been e
Nin waliba wuxuu galabsaduu
Gacanta saaraaye
Sidaasuu Ilaahay gartay e
Geliya laabtiinna

DHAMMAAD

# *QAADDIROOW !*

*Waxa hubaal ah in uu yahay aadamuhu mid taag daran oo nafta iyo damacceeda faraha badan ka adkaysan. Kol uu dambaabaa, hadda na uu toobadkeenaa, hadda na halkii buu ka laabmaa.*

*24/05/97kii waxay ahayd maalin ka mid ah maalmaha aan is lahaa ma toobad keentaa!!*

Qaadiroow Allahayoow qalbigu
Way qadhqadhayaaye
Ibleys baa naftii qaatay oo
Waan qarxanayaaye
Qoolkiyo mareegtuu ku xidhay
Qaadi kari waaye
Quraankaan dhegaystiyo wacdiga
Laga qisoonaayo
Qiyaamaha xasuustiisa iyo
Qaybka iman doona
Qabuurahan arkaayiyo waxaa
Culimo qaylyaysa
Quruumaha dhammaadee anoo
Jooga qubanaaya
Inaan ku cibraqaatay ahayd
Oon qaddariyaaye
Hayeeshee nin qaarqaad* ku jira
Qawlku galiwaaye
Nin Ibleys qafaashi na ka daran
Oo qaldhabayaaye
Qajeelo ba cibaadada sidaan
Ugu qamaamaayay
Qaballuus* sidiisaan dhaqaaq
Qoobka rogayaaye

***Qaarqaad** : aad-u-bugkid; sagkaraad; had ba qaar la-kicid; saabqaad.*

***Qaballuus** : socodka qof daallan ama dhib qaba; cagajiid.*

Eedaanka oo qaw leh oo
Gebi la qiirooday
Qubbaddoo dhawaaqdiyo dadkoo
Wada qalqaalaaya
Qaadkaan cunaayaan **Alloow**
Qiimageliyaaye
Qiil baan u raadshaa wakhtiga
In aan qalleeyaaye
Qayil oo barjee baan idhaa
Waa lagaa qoriye
Faral qaawan goortaan idhaa
Maad iska ba qaadid
Qushuuc ka ma helaayiyo dareen
Lagu qaboobaaye
Qaamuusyo ii yaalay baan
Kala qorsheeyaaye
Qiyaamkiyo sujuuddii ayaan
Kala qabyeeyaaye
Naftan qooqday goortaan idhaa
Qabo hoggaankeega
Anoo toobad qoondaystayoo
Qalaya beerkayga
Oo toban qaraar baan guntay e
Qaanta iga dhaaf le
Dembi ka ma qadnaadee hadda na
Waan qudhqudhiyaaye
**Alloow** naarta qiiqeeda iyo
Qaaca lagu sheegay
Qarqarsiga cadaabkee naflaha
Lagu qisaasaayo
Qalbigaan ka ooyaa markii
Laga qisoodaaye
Afkan qaadmay indhahoo qayaxan
qawlallada jiidmay

Qashuushkaad arkaysaa naftoo
Qulubsan* weeyaan e
**Alloow** quudarraa igu jirtoo
Quusi iga dheere
Qufraankaaga weeyaan waxaan
Quudayaa weliye
Qaflad lagu dul saaraa ka culus
Qaaraddoo idil e
Qufulkaa in aad iga rogtaan
Kuugu qaylsaday e
Qirtay waxan sameeyiyo **Alloow**
Qaladdadaydiiye
Quwaddaada uun baan gacmaha
Hoos qabsanayaaye
Adigaa **Qafuur** ehe haddaad
Qaladka ii dhaafin
Xaggeen qaban adoo qudha ayaa
Qaadiroow jira e

**Yaa Xayu Yaa Qayuumoow** anoo
Wada qushuucaaya
Adigaa **Qahaar** ehe haddaan
Qodob ku weydiisto
Qalbi nuurka qaybshiyo **Alloow**
Qabowga iimaanka
Qasadkaan lahaa waa intaa
Een u qaylsaday e
Inaad igu quwaysaan rabaa
**Qaadir** baad tahay e

***Qulubsan*** *: qof qulub hayo ahaan; hammi hayo ahaan.*

DHAMMAAD

## *HALKUU XAALKU MARAYAA ?*

*Maansadani waxay ka mid tahay maansooyinka aan ku xasuustay dalkii iyo dadkii markaan dibedda uga baxay een tagay dhul shisheeye. Waxaan Xirsi, oo ah magac-u-yaalka maansada, ka waraysanayaa dalkii iyo dadkii sida ay yihiin. Waxaan joogay wakhtigaas* Maaleesiya, *taariikhduna waxay ahayd 01/07/97kii.*

Ayaamuhu xasuus iyo
Xadantooyin badanaa!

Qaddar xeerashiisiyo
Xukunkiisu adagaa!

Waqti kaa xumaada na
Xadhkahiisu daranaa !

Jacayl xiise kululaa
Xummad iyo kar badanaa!

Qof **Ilaah** xusaayaa
Xasillooni badanaa!

Ninka ceeb u xayta na
Xiinkiisu badanaa!

Rag markay xidhxidhayaan
Dumar xeelad badanaa !

Bissad kugu xanaaqdiyo
Ninka xoog ku taliyaa
Xangaruufo kululaa !

**Xakiimoow Ilaahay**
Xeerkiisu wacanaa!

Xil ad qaadday culusaa
Xishood qiima badanaa!

Xiisaha bilawgiyo
Xaydaanka guud iyo
Arartaan xarrago-dhigay
Wax ba yaan ku xiiqin e
Xirsiyoow waxaan rabay
Xijjaabka an ka qaadee
Xudduntiisu waxay tahay
Xadantada qurbaha iyo
Dal-tabyiyo xanuun baa
Xilligii an joogo ba
Xayiraaya nololshee
Xog-ogaal inaad tahay
Ayaan kuu xasuustee
Halkuu xaalku marayaa ?

Dhammaan xaafaddii iyo
Xaaskii ma nabad baa ?
Xajkii aabbo muu tegey ?
**Xasna** maa la guursaday?

Xertii **Yuusuf Kownayn**
Xalqaddii aqoontiyo
Xadraddii ma oogtaa ?

Xawaashkiyo khudaartii
Xadiidkii gaboobiyo
*Xaabsade** ma keenaa?

***Xaabsade*** *: mid ka mid ah nuucyada tareennadii isku xidhi jirey Jabbùùti iyo Diri-Dhabe*

*"Sabaaxii"* xaggaa sare
Xabxabkii macaanaa
Ma ka soo xammaallaa ?

**Sabaax** : *nuuc ka mid ah baabuurta xamuulka*

**Xamareey** hasheennii
Xadhuunkii ma daaqdaa
Dooxii **Xumbuli** iyo
Xareeddii qaboobayd
Waxay soo xayaaddo ba
Xaruntii dugsoonayd
Ma ku soo xerootaa ?

Wershadihii ma xiimaan ?
Mise waad xaraashteen?

Haraadkii xagaayada
Iyo xooggii *"korontada"*
Xal miyaanan loo helin ?

Xuquuqdii shaqaaluhu
Weli may xanniban tahay?

Xaggan kale **Ugaasoow**
Sidee loo sugaa xays ?
Sidee loo jirtaa xayn ?
Sidee loo listaa xoox ?
Sidee loo dhamaa xoor ?
Sidee loo shitaa xulad ?
Xilka seed u gudataan ?
Sidee loo maraa xaal ?
Ragga seed u xulataan ?
**Xaram** seed u aaddaan ?
Sidee loo dhaqaa xaas ?

Xirfadaha aqoontiyo
Sidee loo bartaa xaraf ?

Xarbigii sokeeyaha
Sidee loo xujeeyaa ?

Shacab xarafsanaayoo
Xasilaan ka imid ee
Sidee loo xadaayoo
Xaqa looga weecshaa ?

Xagan kale **Ugaasoow**
Xadhiggii walaalnimo
Sidee loo xajinayaa ?
Xasad iyo nacayb iyo
Xumaan maa la leeyahay ?

Iyagoon xanaaq qabin
Niyaddoodu xalantahay
Raggu xaadhimaha guud
Ma xafiiltamaan oo
Ma xifaale-doodaan* ?

Qabiil mayni kala xidhay ?
Mise waad ka xiirteen
Oo waad xabaasheen ?

Xurguf soo qabowdiyo
Xummad aan badnayn oo
Xilli hore la soo maray
Ma xasuusataan oo
Maad xiisogelisaan ?
Mise xaajiyaashii

***Xifaale*** **:** *si huffan oo edeb iyo maadi ku jirto oo wax la isugu sheego*

Xil-dhibaannadeennii
Dadka way ka xaadheen ?

Culimmada xadiistiyo
Xarafkii **Ilaahay**
Car ! miyaaad xurmaysaan ?
Mise waad ka xadafteen
Xaashiga dastuurkoo
Waa laysku xuuxshaa ?

Xarumaha aqoontiyo
Xisbiyada kuwee badan ?

Duqda xaabaleydiyo
Xadhiglaha dillaalka ah
Wixii laga xayuubshaa
Xaggee buu ku hoydaa ?

Carruurtii xashiishkiyo
Xabagtiyo *"daroogada"*
Xafiisyada hortoodiyo
Xabaalaha la kuudaday
Xakamaha ma saarteen ?

Xaaraanta-quutiyo
Ninkii xoog ku daaqsada
Dadku may ku xoomaan* ?
Mise xeerka diintiyo
Xaqaa lagu dabbaalaa ?

***Xoon :*** *(ku ...) ku soo urur*

Wuxuu soo xammaaluu
Xaydnaado waayo ba
Dadka kii xabeebsada

Xuuftooma* ee dhaca
Maxaa lagu xishmeeyaa ?

*Xuuftoon : daal iyo tacab badan dartii neeftu ha kugu dhegto.*

Biliqada xafiisyada
Halkan baa xag-xagad lehe
Ka xayuubi hebel oo
**Xusseen** iigu dhiib iyo
Xarfaddii ma dayseen?

Xukunkiyo hoggaankiyo
Inta xaajaleyda ah
Xuduud maw dhaxaysaa ?

Xisbiyadu galgalashada
Xajiinta-iska-reebkii
Xumaanta-iska-maydhkii
Shacab-xeeladayntii
Halgankii xoriyaddeed
Xilkii loo gudboonaa
Miyaa lagu xamaartaa ?

Xinif iyo colaad iyo
Xirribo-iska-eeg iyo
Xiniinyo-iska-saar iyo
Xoodaan-ku-qalad iyo
Kol ba xiisad-kicin iyo
Xigaalaha-habayn iyo
Xididdada-u-goyn iyo
Xasad maad ku dhaqantaan ?

Xawliga dhaqaaluhu
Xanjaadkuu ka liiciyo
Xagal-daacadiisii
Xulbad maad ka siiseen ?

Ma ka siibmay xuubkii ?
Xawaaraha ma kiciyoo
Xusul-duubo maw lalay ?
Mise xaabsi iyo boob
Xanuun maamul keenaa
Ka xadqaaday oo dilay ?

Xarunteenna oo qudha
Xilligii gumeystaha
Iyo maalmahii xigay
Ilaa xiisaddeennani
Wixii xoola soo galay
Xaagaan kol ay tahay
Iyo xoogsigeennii
Ma abaar xasuuqdiyo
Ayax xoomayaa liqay ?
Mise waa xattooyoo
Xukunkeedii baa hadhay ?

**Xabashida** hubkeedii
Geedkii xadhaadhaa
Xashiish lagu sumoobiyo
Xabsi aad arkayn oo
Xaaskaaga qadiyoo
Jeebkaaga xada iyo
Xusullada wax kaa xidha
Xannibaad inuu yahay
Xaqiiq maad u garateen ?

Waa cudur xajiin iyo
Xaliib aad ka qaaddoo
Garaadka na xab geliyoo
Naftaada na xasuuqee
Ma xisaabtanteen weli ?

Xidhmadaa caleenta ah
Xarfadiyo dareemada
Lacagtaad u xoorteen
Xilligeedii waa kan e
Maxaa nooga xaasilay ?

Waa boog xanuun lehe
Dhaqaalaha xumaadiyo
Xoolahan la qubayeed
**Xabashida** u geysaan
Xikmaddeed ku garateen ?
Mise xeelad weeyaan
Xudunteeda aan helin
Iyo xuunsho-daba-roor ?

Nabaddaa xasuus lehe
Xasilloonideennii
Xeebtii qaboobayd
Iyo xaaxigeedii
Miyaa lagu xayaadaa ?

Xagaagiyo kulaylaha
Xoogii bannaanaa
Nin ba xaadhintiisii
Xamdi muu ku seexdaa ?
Mise **Xamar** sideedii
Xabad baa shaqaysoo
Casarkaad xerootaan ?

Xaash-xaashka galabtii
Ma xarrago dareertaan ?

Xaqqii loo halgamay iyo
Wixii loo xaraabaday

Ma xaqiijiseen oo
Xuduuddii ma gaadheen ?

Xidigahaa la soormee
Maw xaydateen socod?

Beertii xornimadiyo
Xeradii midnimadiyo
**Xarbiyoow** walaalkay
Maxaa lagu xasuustaa ?

Dadkii galay xabaalaha
Xabadaha dadkii liqay
Xabsiyada kuwii galay
Iyo xaasaskeennii
Inta miino lagu xidhay
La xasuuqay gebigood
Ama soodh-ku-xadhadhkii
Iyo silig-ku-xeerkii
Xumaantii gumeystaha
Xiska maad ka saarteen ?

Annagoon xumayn oo
Geeliisa xadin oo
Ka xodxodan walaashii
Ninka orod xawaaro ah
Ka soo xaytay **Yurub** ee
Dalka xoog ku soo galay
Dabadeed xishood li'i
Xaqiraad daraadeed
Xasharaad sidiisii
Nagu xaadhay salabaha*
Xukunkiisa **"Laahaay"**
Xafiiskeedu muu nacay ?

***Salabe** : ulo dhudhuuban oo manfiiqda laga sameeyo.*

Mise waa xaggeennoo
Inaan xaashigeegii
Ku xarriiqno qalin oo
Xeerkeeda marinno ba
Xisaabteenna ku ma darin ?

Ma rag baa ku sii xidhan
Ama xeedho ku la cuna
Oo weelasha u xala ?

Xaggan kale **Ugaasoow**
Xalay baan riyoodoo
Xangey iyo marroor iyo
Xabagtii cadaaddiyo
Xamakow cunaayoon
Xanjo raamsanaayee
Xaggee baan u qaadaa ?

Mar na faras xariiroo
Xakamaha aqoon baan
Kaga xiiminaayee
Xaggee baan u qaadaa ?

Mar na xaadhin weyn baan
Dad ku xeerinaayoo
Xirsiyo u dhigaayee
Xaggee baan u qaadaa ?

Kol na daad xanniban oo
Gellin soo xaraartaan
Xumbaduun ka gurayee
Xaggee baan u qaadaa ?

Kol na xuunsho iyo haad
Iyo xuur gabowdaan

Xal la raadinaayee
Xaggee baan u qaadaa ?

Mar na xeedho weyn baan
Anigoo xafaaro ah
Xeraad* laygu siiyoo
In aan xaabo daayoo
Wax ka xaadsan waayee
Xaggee baan u qaadaa ?

***Xeraad* :** *dhuuniga ama soorta la cuno habeenkii*

Maansadan xog-doonka ah
Xadkaa aan ku joojee
**Xirsiyoow** waxaan rabay
Xadantiyo su'aal iyo
Xanuunkaasi weeyee
Bal  i soo xasuusoo
**Ina Xaashi** gaadhsii

DHAMMAAD

## *MARYAN*

*Waxa ila joogay nin saaxiibkay ah oo ka calaacalayey gabadh uu doonay weli se aanay u suurogelin in uu la aqal galo. Wakhtigaa, oo ahaa bishii 6aad ee 1997kii, waxaan joognay meel fog oo rajo ay isku arkaan ba yarayd. Waxa se aniga iga dhex guuxayey dareenkii gabadha oo meesha ka maqnayd. Waa jacayl daacad loo noqoni waayay sida ay iyadu u arkaysay, waa jacayl sibiq ku galay, cadhada iyo ciilka ku baahay na waa midhihii degdegga iyo keli-tashadka.*

Hoheey ! **Maryaneey** hoh !
Miyaad maqal aaddo
Minaarad la joojay
Musmaar qof wareemay
Muraaddo la gaadhay
Muraayad dillaacday
Mas'uullo la doortay
Mujaahid shahiiday
Shirqool la maleegay
Marduufyo la qaatay
Wixii dhaca maanta
Si uu magaciisu
Samaanno u maydhmin
Inaa mahrajaanno
Tiriig lagu meershay
Sharaab na la miisay
Dadkii martiqaadku
Dhammaan ka mabsuudo
Xasuus lagu muujo

Hoheey ! **Maryaneey** hoh !
Maxaa ku halmaamshay ?

Idaacadda maaxda
Wargeysyada meera
Wixii majallaada
Gugii meherkaaga
Mudnaanta la siiyay
Inaa lagu muujo

Hoheey ! **Maryaneey** hoh !
Miyaan jimce joogin ?
Dhammaan bisha *"Maayo"*
Miyaanay dhammaanin ?
Maxaa ku halmaamshay ?
Inaad mustareexdo
Murjaan dhaldhalaali
Marriin isa saarto
Anana na macsuunto ?

Waxay tidhi **Mooge**
Abboowe macaane !
Intaan is marriimin
Marwooyin ciyaara
Intaanan macsuumin
Miyaad i su'aashid
Waxaan ka macaashay
Walaal meherkayga ?

Waxay tidhi **Mooge**
Markii gurigeenna
La xaajo mormaayay
Markuu yidhi aabbe :
*"Billoo murgacootay*
*Innoo miyir aabbo !*
*Jacaylka na mayrac"*
Anna an ku maleeyay

Inaan rabo **Muuse**
Waxaan mahadhooyin
Halkaa uga muujay
Waxaan u majiiray
Naftaydani maahsan
Qodxaa ku mudaaya
Ma aanan lahayn e
Aroos manfaciisu
Mansheeyo adduunka
Ayaan muhanaayay

Adoo na ka maagin
Abboowe macaane !
Halkuu maray ? Meeday ?

Waxay tidhi **Mooge**
Waxaan muhanaayay
Inaa musdambeeddo
Miscirir iyo jiitin
Xerooyin la meersho
Dhaqaaqasha maalka
Kolkaa lagu miiso
**Maandeeq** ololkeeda
**Muraas** na cidiisa
*Me'eeda !* ridayda
*Macaacda !* laxdayda
Anoo ka mabsuuda
Anoo mustareex ah
kolkaa an ka maalo

Adoo na ka maagin
Abboowe macaane !
Maxaa helay ? Meeday?

Waxay tidhi **Mooge**
*Makaan* lagu hoydo
Maacuuni* dhex taallo
Haddaan metel doono
Mafiiq lagu xaadho
Ashuun mardabaan ah
Tibtiisiyo mooye
Ama aan middi doono
An jaarka u meerin
Mareeg qolqol daadsan
Carruur maqal eegta
Intaas iyo muurka
Ayaan muhanaayay

Adoo na ka maagin
Abboowe macaane !
Maxaa helay ? Meeday ?

Waxay tidhi **Mooge**
Waxaan muhanaayay
*Makaan* lagu hoydo
Intii mudan reerka
Martida ku dhaxaysa
Miskiinka ka quuta
Muxtaajka dawaafa
Anoo kala miirin
Maamuus la dareemo

Adoon ka masuugin
Maxaa helay ? Meeye ?

Waxay tidhi **Mooge**
Cirkoon mayay hoorin

***Maacuun*** *: weelalsha iyo alaabta guriga laga isticmaalo, gaar ahaan kuwa loo adeegsado cunnada iyo cabidtaanka.*

Miraale hillaacin
Tog daad mari waayay
Dhir aanan magoolin
Maxaad ula yaabtay ?

Waxay tidhi **Mooge**
Haddaan murtiyeeyo
Cid ba ima muquunin
Anaa se malluugga*
Muuqaal dhab ah mooday

*Malluug :* *muqaal aan si sax ah loo arkayn ama u caddayn.*

Anaa malmalleeyo
Sidii malab leefay

Kulayl mamac-gaajo
Anaa dhereg mooday

Anaa moqor gaaban
Dabbaal u muquurtay

Anaa muruq jiidmay
Mindheelli u qaatay

Anaa midigtayda
Malloolli* u dhiibay

*Malloolli :* *neef lab oo badanaa shilis wax se aan rimin; quble.*

Anaa mufsid dhaartay
Malaa'iig u qaatay

Anaa musuqmaasuq
Muftaaxyo u dhiibtay

Anaa nin maroor ah
Malcuun i dagaaya
Macruuf u sameeyay

Anaa murugtayda
Muwaafaqo-seegga
Munaasabo gaalo
Mawliidka **Rasuulka**
Manaaqib ka qaaday

Anaa murugtayda
Majaajilo been ah
Intaan is maqiiqay
Dantay ka mashquulay
Macbuud na ku seegay

Anaa nin i maagay
Muunsoodka afkiisa
Musaamaxo mooday

Anaa murtad gaal ah
Dharkii muslin qaatay
Masaajid u dhiibtay

Anaa ma-kasoobay
Anaa miyi guuri
Magaalo u qaatay

Anaa murugtayda
Intaan murjis qaatay
Ku muday wadnahayga

Waxay tidhi Mooge
Hadeed makasawga
Muwaafaqa-seegga
Haddaan ka malaysan !

Haddaan maskaxdayda
Si fiican u maalin !

Miyaa ? ama mee ?
Maxaa ? ama mooye
Miliilic-sakhaalka
Haddaan iska moosin!

Halkuu ficil muuqan
Haddaan midab fiirsho !

Maadays hadalkiisa
Haddaan micne siiyo !

Nin aanan mutaysan
Haddaan malahiisa
Muddeec u ahaado !
Amaan magan siiyo !

Wuxuu waqti maaxdo
Dhacdo ba maalinteeda
Haddaan madbacaynin !

Haddaan maqas qaadan !
Mindiil an ku jeexin
Marooyinka beenta !

Markaan gadanaayo
Wax loo mustareexo
Haddaan odhan : *"meeqa ?"*
Miisaanka an saarin !

Dugaag miciyaale
Maqaar Bini-Aadan
Hadduu igu maalo !

Haddaan miyir seexdo !
Haddaan mirta toosin !
Madowga caddaanka
Haddaanan ka miirin !

Kolkaan macaluulo
Maciishad an waayo
Masiibo i gaadho
Haddaan mabda'ayga
Ku iibsado moofo !

Makhluuq wax dhibaaya
Shirkiyo madashiisa
Haddaan ka dhex muuqdo !

Dharaar mudhaheeda
Macaanka magaabo
Haddaan kaga maarmo
Wixii ma-huraan ah !

Waxaan galin maanka
Mashruuc iga daahan
Wax uu macnahiisu
Si fiican u muuqan
Haddaan maskaxdayda

Intaan ku musmaaro
U lulo madaxayga !
Jacayl madaddaalo
Haddaanan mamnuucin !

Haddaan maxabbooy na
Waxaad kol ba maagto
Markhaati u yeelin !

Maskii hilqadaale
Godkuu igu miidhay
Haddaan dul munuuso
Anaa macne beelay !
Anaa ba majnuun ah !

DHAMMAAD

## *WAKHTIYAHOW !*

***Waxaan marayey xaalad aad iyo aad u adag oo aan tirsanaayey miidho. Waa hakad taariikhda nololshayda soo gaadhay, dabadeed na isbeddel dhaliyay, dhacdoonyin badan na ku salaysmeen. Waxaan ku qamaamay wakhtiga oon aaminsanahay in aanu wax dembi ah lahayn. Taariikhdu waxay ahayd 17/02/1998kii.***

Wakhtiyahow wadaad daacadaan
　　　　Waayo kuu qabay e
Garaad waafiyaad ii ahayd
　　　　Ama se waayeel e
Walaal iyo waxaad ii ahayd
　　　　Waalid oo kale e
Weli aan xishmeeyaad ahayd
　　　　Wacad **Ilaahay** e
Waxyi aan waraystaad ahayd
　　　　Waaga berigiiye
Waddo iiga weyn baad ahayd
　　　　Toban wadiiqoode
Guri waasacaad ii ahayd
　　　　Oo la wehelshaaye
Webi iyo waxaad ii ahayd
　　　　Waqalka roobeede
Burhaan waaban baad ii ahayd
　　　　Laga warraaqaaye
Weftigayga waakaad ahayd
　　　　Cidi wax yeelayn e
Waayadan xaggeed ii waddaa
　　　　Waa war iyo yaab e ?

Wareer igu riddaa iyo qalbiga
Weyrax gelisaa ba
Waran igu muddaa iyo fallaadh
Igu wareentaa ba
Wadhaf sida walaac soo wahsaday
Igu wab siisaa ba
Walbahaarka waabayda kulul
Igu walaaqdaa ba
Waadaan an soo daray xadhkaha
Kala walxaysaa ba
Kol ba weysadaan qabo waswaas
Waalan gelisaa ba
Dedaal aan horow waday wax kale
Igaga wiiqdaa ba
Wanaaggiyo wacnaantii an rabay
Iga wax-yeeshaa ba
Wadkii uun inaad soo waddo na
**Waaxidkaa** garan e
Wakhtiyahow maxaan kaa wataa
Waa war iyo yaab e ?

Waxtar baan sugaayee miyaad
Walacsi doonaysay ?
Miyaad shalay warqado iiga sidin
Wabarro* ii yeedhay ?
Miyaan shalayto uun soo waddicin*
Wadarta aan sheegto ?
Miyaad odhan wanaag soo socdoo
Waari baa jiriye ?
Aroos loo wilwile doonto iyo
Weled intaad laabto
Miyaad odhan wax soo baro cirkaa
Layska wacayaaye ?

***Wabar*** *: nin qabiil ama reer u taliya, tol u madax ah; ugaas; garaad...*

***Waddici*** *: (erey ka soo jeeda afka carabiga) sii dhawee; sagooti; sabooti*

Waddan aan horow arag miyaad
Igu waliimaynin ?
Maanta na xaggeed ii waddaaa
Waa war iyo yaab e ?

Waxtar baan sugaayee miyaad
Walacsi doonaysay ?
Werdi baan rogaayee maxaad
Wahabka ii saartay ?
Ma anaa wajaqe doonayoo
Waajib gudan waayay ?
Waddadii ka ma an weecan iyo
Waayo-baradkiiye
Warsheddaan u soo dhoofay baan
Weli sameeyaaye
Duruus waafiyaan waa berya ba
Kala wardoonnaaye
Wacays baan qabaayee adaa
Waalay dunidiiye
Wadnahay dhaqaaqoo haddeed
"*Waw*" "*ya*'" lagu reebye
Waabay cadhaa i saaqdayoo
Waan welwelayaaye
Naftii waraqqa soo dhaaftay oo
Weyday hilinkiiye
Wareerkaa adaa iigu wacan
Wacad **Ilaahay** e
Wakhtiyahow maxaan kaa wataa
Waa war iyo yaab e ?

Wuxuu yidhi adeeroow i maqal
Wiil yar baad tahay e

Waraaqaha inuu tiirsadiyo
Wehel inuu moodo
Weligii nin daad qaaday baa
Laga wacaalaaye
Adduunyada wareerkeed ilaa
Qodax wareenkeeda
Waslad aad ka dheeftiyo wixii
**Weyne** kugu beego
**Ilaah** waaxidaa maamuloo
Lala wadaagayn e
Warkeeda na dadkoo idil ba waa
Laga waraabshaaye
Wax kaste na asbaab baa waddoo
Lagu wareejaaye
Waayaha adduunyada intaad
Weerar daba qaadan
Maxaa dhacay naftaadiyo caqliga
Weli ma waydiisay ?

Naftaadani wisiisiga qabtee
Wiishka lagu qaaday
Naftaadani markii laga wanqalay
Waabo laga waayay
Naftaadani ugaadh waqalka sudhan
Waran la laacaysa
Naftaadani waqooyi iyo bari
Saacad wada laacday
Naftaadani waxaan welita dhalan
Weerar ula taagan
Naftaadani maxaa sida tan wacay
Weli ma waydiisay ?

Weedh kale na waa iga dardaar
Wiil yar baad tahay e
Wixii dhacay wakhtiga soo socdiyo
Saaka waxa joogi
Waaxyo soohan weeyoo kolla ba
Kala walxoobayn e
Ku waantow wixii dhacay adduun
Barasho weeyaan e
Gudo waajibkaagiyo wixii
Laysku weyneeyo
Wasakhdiyo ka dheerow waxaan
Waarin magaciisu
Waagii dillaaca ba u tolo
Weelka lagu maalo
Waxoogaa markaad seexata ba
Camal u weydaaro
La wandaafi ruuxii wanaag
Guri u waabaaya
Wecel iyo walaalkaa dad-cuna
waabi xumihiisa
Weligaa waswaas iyo khannaas
Idhan* ha weydiinin

***Idhan** : miiq bir ah oo lagu sameeyo weelalsha, sida dabaqqa, masafta, iwm. Waxa lagu tusmeeyaa wixii aad u yar.*

DHAMMAAD

## *ADDUUNYADAN*

*In kaste oo lagu qaaday dalka Ciraaq dagaallo kala duduwan, wuxuu hadda na adduunkoo dhan ku qoslay, la na yaabay gardarradii badheedhka ahayd ee uu Biil Kilinton ku weeraray dalkaasi iyo dadkiisa ba, ka dib markii lagu soo eedeeyay kufsasho iyo gogoldhaaf. Waxaan cadhadaydii ku muujay maansadan soo socdta oo aan tiriyey 18/12/1998kii.*

Adduunyadan dareen iyo wax-garad
Deyrka laga saaray
Adduunyadan daciifkiyo ku tuman
Ubadka daaduumay
Adduunyadan dugaagowdayee
Dubatay beerkeega
Adduunyadan dariiqyada ku qalan
Dumarka naafoobay
Adduunyadan dulmiga **Reer-galbeed**
Cidi ba diidaynin
Adduunyadan dubbaha **Reer-galbeed**
Lagu dikaynayo
Adduunyadan dameeraha carbeed
Laysku didinaayo
Adduunyadan dastuur been ah iyo
Xooggu yahay diinta
Adduunyadan xornimo diiday ee,
Damaccu naanaabshay
Dacwad iyo wax-diid iyo illeen
Dood iska ba daaye
Adduunyadan ninkii nolol dalbaday
Looga dacareeyay

Adduunyadan ninkii awr dabraday
Hebel ka sii daayay
Adduunyadan ninkii laas darsaday
Daadka laga raacshay
Dabqaad iyo dillaal iyo haddaad
Dayday noqon weydo
Ama noqon dabbaal nacas ahoo
Debinta laalaadsha
Ama aad dadnimada iska dhigin
Lagu duqaynaayo
Dacfi iyo haddaad diif qabto na
Lagugu daynaynin
Hadal waan ka daystaye waxaa
Daaray qalinkayga
Daftarkiyo waxaan u la dulbaxay
Deelka xarafkiisa
Ma damqado nin aan diin lahayn
Iyo damiir nool e
Dabkii xalay **Baqdaad** lala dhacaan
Dood ka leeyahay e
Awrkani* wax *dooh* ! naga yidhaa
Duunkii laga waaye
Digtii shalayto **Suudaan** helshaan
Daawo loo helin e
Durba muu na weeraray wadday
Naga dul jeexdeen e ?

Dabbaa iga holcaayoo qalbigu
Way damqanayaaye
Maskaxdayda duufaan cadhaa
Demiyay laydhkiiye
Siddeed sano dalkii laga dul baxay
Ee la kala daadshay

*Awr : neef geel ah oo lab. Maansadu waxay awr ku tilmaamaysaa dawladda Maraykan iyo madaxweynaheedii xilligaa, Biil Kilinton*

Dalkii daasaddii muuqata ba
Diirad lagu aasay
Maxaa loogu duuloo madfaca
Loogu darandoorshay ?

Difaac wuxuu lahaan jiray dalkii
Daaduf laga yeelay
Dalkii looga ba'ay danab qarxiyo
Wax u dahsoonaada
Duunyada dhulkiisiyo inuu
Dahabka iibgeeyo,
Iyo debad xidhiidhkeed dalkii
Looga dacareeyay
Maxaa loogu duuloo madfaca
Loogu darandoorshay ?

Darxumiyo dadkii loo xidhxidhay
Cudurro daacuun ah
Dawadoo gabaabsiya darteed
Ubadkii loo duugay
Dumarkii daryeel waayay ee
Diricyadii iibshay
Maxaa loogu duuloo madfaca
Loogu darandoorshay ?

Dugsiyada aqoontiyo waxaa
Dakharro loo geystay
Saaruukha doondoon ku helay
Dumarka fooshooda*
Ee duugay ubadkay dihdeen
Saacad dabadeed ba
Qiiqqaa daruuraha noqdee
Samada duuraaya

***Dumarka foolshooda :*** *ereyyadan abwaanku waxa uu ku tusmaynayaa dumar iyo carrúúr tiró badan oo lagu qariyay dhulka hoostìisa dabadeed na Maraykanku bambòòyin ugu galiyay gòdadkii ku na xasuuqay.*

Dambaskiyo damaarkuu* ka tagay
Cadawga soo duulay
Dunidaan su'aalaye maxaa
Diriran loo oogay ?
Muxuu "**Kilinton**" doondoonayaa
Diide nabaddiiye
Ma **Saddaam** ayaa dooday oo
Daacad noqon waayay ?
Ma daraahimtii uu bartaa
Loo dardari waayay
Ma darmaantii uu roorsadiyo
Deynta lagu haysto
Ayuu qiil u daydayi inaa
Ceebta laga daayo ?
**Yuhuud** daba nashlayn iyo carruur
Dubasho mooyaane
Wax kaloo dembiga loo qabsaday
**Daa'im** kaga dhaafo
Miyaa doora-weynoow kufriga
Daaqad laga saaray ?

Nin daad qaaday oo digo cuskaday
Dulucdu sii dheere
Ha yeeshee dadkaygoow ma ogid
Daadka soo galay e
Duruuftaad maraysaan horaa
Looga sii digay e
Dib u soo akhriya diinka iyo
Sadarka duugoobay

Dibindaabyo uun bay wadaan
Maro ku daahnayn e
Haddii ay **Saddaam** doonayaan
Daw kalaa badan e

***Damaar*** **:** *(erey af carabi ah) burbur*

Dan-yartiyo agoontiyo maxaa,
Dumarka loo laayay ?
Dembi kale na waa been cad oon
Niga dahsoonayn e
Ninka doobinaayee **Kuweyd**
Laga difaacaayi
Diyaaraadka goortii waliba
Lagu duqaynaayo
Doonyaha **Khaliijkii** qarshee
Soo durdurinaaya
Sawaariikhda duulaysa ee
Reerka duminaysa
Dab miyuu ku soo rido haddii
Daasad lagu reebay !

Dadnimo u gargaar iyo haddii
Nabad la doonaayo
Dulmigiyo haddii laga hortegi
Kibirka daalkiisa
Xuquuqdii la daayacay haddii
Boodhka laga daadin
Dib haddii na loo siin wixii
Shalay na loo diiday ?
Duruustani **Israa'iil** maxaa
Loogu diri waayay ?

**Boosniya** dadkeedii markuu
Gaalku dabargooyay
Adduunyadu in ay daawatiyo
Digasho mooyaan e
Dameerahakan meeshaa maxaa
Loogu diri waayay ?

Daliil kale adduunyada haddaan
Diirka uga qaado
Saliib dawdamaayaa miyuu
Shalayto soo duulin ?
**Koosoofa** maan lagu daldalin
Niman dugaagoobay ?
Sawkaa dadkeedii dharaar
Laga daguugaayo
Haddii daacad loo yahay xaqoo
Nabad la doonaayo
**Seerbiga** duruustani maxaa
Loogu diri waayay ?

Boqol dawladood baa la dhacay
Oon dib loo arag e
Dad baa daalay oo looga ba'ay
Degelladoodiiye
Orgi baa la dilay dooddatani
Igala duud dheer e
Dastuurradan galbeedkaa dhigtoo
Lagu difaacaaye
Danahooga weeyaan waxay
Noo dirqiyayaan e
Dad baa diinta laga saaray oo
Lagu dillaashaaye
Haddii daacad loo yahay wanaag
Dunida saameeya
Oo daalimiinta na samaan
Lagu dabbaalaayo
Xeerkani dul-saarkee **Ciraaq**
Lagu duqaynaayo
Markuu goray god diin galay* maxaa
Loo dabbiqi waayay ?

*Goray god diin gal : abwaanku waxa uu weedhdhan ku tusmaynayaa Maraykanka oo xoog ku galay Banama soo na qafaalshay madaxweynihii dalkaas.*

**Cabdul-Waarisoow*** dood kalooy
Dihadtay laabtaydu
**Carabtii** damiir dhiig leh oo
Diida laga waaye
Dulligaa haleelay inna ba
Cidi ka diirayn e
Diyaaradi markay sare kacday
*Filimo* daartaan e
Kol ba gaalka dabargoynaya na
Way u dallamayn e
Duul weeye dood iyo khilaaf
Loogu daw galay e
Boqorrada dareenkii haddii
**Daa'im** ka ba saaray
Dadweynaha gadoodee dulmiga
Daawan kari waayay
Inuu dawyada u soo baxoo
Calamo duuduubo
Ama uu dab qabadsiiyo oo
Dhagaxxa daadaadsho
Maxaa loogu diidoo debnaha
Looga dagamsiiyay ?

Dibigii walaalkii la dilay
Ee la dubanaayay
Isna daashadaashoonayee
Aradka daaqaayay
Dabadeed diyaar noqo la yidhi
Doorku waa adiye
Waa kii dardaarmee ka tagay
Erey digniineed e
Ee yidhi dugaagyahow ma dhiman
Duhurka maanta ahe

***Cabdul-Waaris*** : *waa Cabdul-Waaris Cali Aadan oo ah nin afka carabiga aad ugu gabya, waa na rafiiqqii waxbarasho ee curiyaha buuggan.*

Walaalkay markaad dubatay baad
Damacday sow maaha ?
Ragga maanta dalamaynayee
Gaalka daba joogi
Dariiqaasi uun bay socdaan
Looga sii digay e
Maxay digashadood tari berraa
Loola soo degiye !!!

Hadduu reerku daranyoobo oon
Deyr na lagu meerin
Dab haddaanan loo shidin hantida
Lagu difaacaayo
Ridii Deero aarkii dilaa
Deylo na u maqan e
**Ciraaq** laga dareeryoo haddeed
Waa bay dumiyeen e
Dabadeed dalkee lagu xigsiin
Doona magacciisa ?

DHAMMAAD

## *HADHKA SOO ROGMADAY*

*Bilowgii sanadkii 1999kii ayaan u fiirsaday waxa loo yaqaan adduun-edegaynta (* "globalisation ama globalization" *). Waxay dadka qaarkood u tumayeen durbaan halka qaar kale na ka garaacayeen caroog-digniineed. Anoo labada qar mid na u janjeedhsan waxaan soo bandhigay su'aalo dadka u dhuun-daloola jawaabo u raadin karaan. Wakhtigaa, oo aan joogay magaalada* Nuwaakshoot *ee dalka* Mooritaaniya, *waxaan idhi :*

**Ina Haayiroow**
Ii haadisoo
Warkii waan helee
Hayeeshee walaal
La iska ma hadloo
Hubsiimada darteed
Hal baa loo huree
Waxa kani hurdaa
Dhir hambaadhdha iyo
Ma higlooyin baa ?

Harag faaruqoo
La higaagay iyo
Higil* weyn miyaa ?

Ma jin hoose oo
Wax hagoogtay oo
Humbulleynayaa ?

Ma col heegan baa ?
Ma hub ciidan iyo

*Higil : muuqaal madow oo aan si fiican u qeexnayn, loo arkayn*

Qori hawsaroo
Dadka hoobiyaa ?

Hogol roob ah oo
Ilmo hililiqloo
Hibiqlayn miyaa ?

Habar salamadhloo
Heetini miyaa ?

Ma wax huuray oo
Hurgumeystay iyo
Ilko huuro loo
Igu soo hadlaa ?

Habar dumar ahoo
Wax hufaysa maa ?
Hebelkii miyaa ?

**Ina Haayiroow**
Ninka soo hadloow
Waxa kani hurdaa
Ma hasheenniyoo
Niriggii heshaa ?

Gudin haadhaysiyo
Ma hangool ayaa ?

Haad duulayoo
Wax hafaaya maa ?

Ma dugaag hamuum
La hardaafayiyo
Horor bahal ahoo

Wax hambaynin oo
Hilib doonayaa ?

Hagardaamo iyo
Horof jeexan iyo
Hadimooyin maa ?

Haadaan duntiyo
Hogag dheer miyaa ?

Car ! ma haatuf iyo
Hud-hud yeedhayoo
*Waar hayaay ! hayaay* !
Hareeraha dayoo
Ka hoyaada laa ?

**Ina Haayiroow**
Hadhkan soo rogmaday
Ma habeen galoo
La hadoodilaa* ?
Haajirid miyaa ?
Hiir subax miyaa ?
Hangallayn miyaa ?
Hanfi kulul miyaa ?
Hoosiis miyaa ?

*Hadoodil : dhis tabar yar u se muuqda mid roon. Halkan se maansadu waxa ay ku tusmaynaysaa wax la hoosaasiyay.*

Holac naara iyo
Halasiyo dab aan
La hadoodsaniyo
Ma halaaggii baa ?

*Hah** ! na soo martiyo
Hakadkeed miyaa ?

*hah ! : erey la yidhaahdo kolka wax la kahdo; cagku ! hohey !*

Ma habaas kacaa ?
Ma dabayl hufaa ?
Ma huruufid baa ?
Ma harraati baa ?
Ma hafroobid baa ?
Ma halmaamid baa ?

Ma habaar qarxiyo
Dad habaabay baa ?

Ma hallaabid iyo
Halisteedii baa ?
*Hiq-hiq !* oohin iyo
Hibatayn miyaa ?

Himbiriirsi iyo
Wax hummaagso iyo
Haydhhaydh miyaa ?

Haasaawe iyo
Ma heshiis dhacaa ?

Ma hayaan kiciyo
Wax haloosid baa ?

Ma hanoonid baa ?
Si habboon miyaa ?
Hagarbeel miyaa ?
Ma haleelid iyo
Wax-hagaajin baa ?

Hannaan suuban iyo
Haqabbeel miyaa ?

Hawo roob waddiyo
Ma hillaac *big* laa ?

**Ina Haayiroow**
Huugaankan iyo
Hadalkaan maqlaa
Ma hadaadaq baa ?
*Hooyaalay* iyo
Hawraar miyaa ?
Huube an lahayn ?

Hobollada dalkoo
Is habeeyay oo
Hees qaadayiyo
Ma ***"Hadraawiyoo"***
Qalin haysta oo
Hal-abuurayaa ?

Hadhkan soo rogmaday
Ma hawaawi baa ?
Ma hubaal dhabaa ?
Ma hawaarsi iyo
Hurdo loo galaa ?
Ma horowkac baa ?
Ma hantaaqid baa ?
Ma hoggaamin baa ?
Ma hantaatac baa ?
Wax hirgeli miyaa ?

Halgankii xaqoow !
Hanaqaad miyaa ?
Ma wax aan hayoon
Ka huluuqay baa ?
Malab hoorso iyo

Ma xareed hirqaa ?
Ma hunqaacadii
Ku hongoobid baa ?

Hoodiyo wanaag
Hordhaciisii maa ?
Dhib-u-heellanaan
Iyo hedel miyaa ?
Is-hubaalnimiyo
**Haaruun** miyaa ?
Haybtii miyaa ?

Ma hunnuu-hunnuu
Wax ba haynin baa ?

Ma hudhuu-hadhaa
Wax ku hananaf baa ?

Ma ka heensitaan
Iyo hininif baa ?
Mise waa hambayn ?

**Ina Haayiroow**
Hadhkan soo rogmaday
Ma hormoodnimaa ?
Ma horseednimaa ?
Ma horyaalnimaa ?
Ma habsaannimaa ?

Hammi been ah iyo
Hamuun gaajo iyo
Ma hamaahsi baa ?
Hanjabaad cadhiyo
Haddidaad miyaa ?

*Ham-ham* ! uun miyaa ?
Humbulyayn miyaa ?

Ma hudaanhutiyo*
Is-huluulashiyo
Ilko hoos ahaan
Isku haysta baa ?

***Hudaanhudto*** : *hoos ka daldaloolid*

Hafeefaha qadhaadh
Hifashayn miyaa ?

Hinqashaa-kac iyo
Hinjitaan dhabiyo
Hiinraag miyaa ?
Hawlqabad miyaa ?

Ma hiraanhir iyo
Hadh-hadhyoo ayaa ?

Ma halkii horuun
U hiloobid baa ?

Hebel baa i dilay
Hooyooy ! Miyaa ?
Ma dad hiigid baa ?
Ma badh hiifid baa ?
Ma ka hiilin baa ?
Ma haliilid baa ?
Ma hinaasid baa ?
Hufitaan miyaa ?
Hiirtaanyo maa ?
Dadka heer miyaa ?
Hayl-hayl miyaa ?

Hanaqgoo miyaa ?
Hoog oo ba' maa ?

Go' ma haysatee
Huwi uun miyaa ?

Ma hub qaadashiyo
Dab hulaaqid baa ?

Huugaan cadhiyo
Hafradii miyaa ?

Ma hadaafid iyo
Huleel-socosho* iyo
Hudeec-luudid* baa ?

***Huleel :*** *socod caga-jiid ah*
***Hudeec :*** *socod gaabis ah*

Ma hamuujiyoo
Hilfaha u rid oo
Ha ka haaddo baa ?

Guri hoos bannaan
Uu haawadee
Hoomay miyaa ?

Wax hagaag ahayn
Hool-hool miyaa ?

Ma hoobsoo hantida
Hoogaanso baa ?

Soo hoyda iyo
*Hoobeey* miyaa ?

Hongollaan miyaa ?
Hengellaan miyaa ?
Hantibeel miyaa ?

Ninka soo hadloow
Waxa kani hurdaa
Ma hiraab kacaa ?
Hurdo seexda maa ?
Hodannimo miyaa ?
Gacmo hoorsi maa ?
Hindhisooyinkii
Hah ka qaad miyaa ?

Haddeed haatufoow
Ha higgoon miyaa ?

Waxaad hooriso ba
Ka hitayn miyaa ?
Hiyi toos miyaa ?
Hoditaan miyaa ?
Is-hogayn miyaa ?
Ka horree miyaa ?
Iska hoo miyaa ?

Huuriga ku qaad
Hambadii miyaa ?

Ma *hus !* oo qudhaa
Ma hawaawiyoo
Hebed ii noqdoo
Hurdo seexda oo
*Haa* uun dhahaa ?

Hadhkan soo roogmaday
Ma hog diirran oo
Lagu soo hirtaa ?

Hididdiilo iyo
Ma habeenno iyo
Hoodaa is helay ?

Ma halyey ayaa
Hibo soo agmaray ?
Hangaraarac maa
Hu' u soo gashaday ?

**Ina Haayiroow**
Hardankii miyaa
La habaynayaa ?

Ma hadhuub ayaa
La hogaynayaa ?

Hargihii miyaa
La higlaynayaa ?
Ma harraad jiraa ?
Haro laga qotaa ?

Ma haweenkii baa
Heellada ku dhacay ?
Ma hadhuudh ayaa
Hadhimooyin duhur
Hadhka loo la dhacay ?

**Ina Haayiroow**
Aniga na haddeed
Faraskayga **Haad**

Kac oo halabso iyo
Heensee miyaa ?

Hayinkaan rareen
Heeryada ku xidhay
Ha hoggaamin maa ?

Hadafkaan lahaa
Ma ha hiigsan baa ?
Hindisooyinkii
Iyo himiladii
Ma iskaga hadh baa ?

Ma wanaag la hubo
Wax kaste u hur baa ?
Heegada dushaa
Soo haabo iyo
Heehaab miyaa ?
Ma hugii wacnaa
Hun ka qaadashiyo
Ka hillaabashaa ?
Hawshii an galay
Hibatayn miyaa ?
Ma halbawlihii
An ka heermo baa ?
Haldhaagaan lahaa
Ma hagaasid baa ?
Ina heedadaw
Hagitaan miyaa ?

Hormo geel ahoo
Hawdkaa ku jiray
Soo hora miyaa ?

Hiddihii wacnaa
Hilinkii caddaa
Iyo horowmarkii
Helitaan miyaa ?

Hadal iyo dhammaad
Waxa kani hurdaa
*Haaheey* ! miyaa ?
Mise waa ka *heey* ?

**Ina Haayiroow**
Ii haadisoo
Warkii waan helee
Hadhkan soo rogmaday
Halkee loo sitaa ?

DHAMMAAD

# *IQBAAL*

*Magacani waa mid qalbigayga meel weyn ku leh. Maxamad Iqbaal oonaan is arag, isku dal iyo af na aan ahayn ayaa gabayga i baray. Sidaas darteed, anna xasuus ahaan baan wiilkaygii curad ugala magac dhigay. Waa Iqbaal Aadan iyo dhalashadiisii 11/01/1999kii.*

Dhammoow curadkaan dhaloowwa
Dhammoow dheehayga oowwa
Dhammoow dhabarkiyo laftoowwa
Dhammoow dhuuxiyo dubkoowwa
Dhammoow dhinacyada jidhkoowwa
Dhammoow araggiyo dhegtoowwa
Dhammoow dhuuntiyo afkoowwa
Sankaan hawada u dhigtoowwa
Dhawaaqiyo aamuskoowwa
Dhaqaaqqiyo joogsigoowwa
Waxaan xaraf soo dhigtoowwa

Dhammoow dhakhtarkii naftoowwa
Halbowlaha dhiigyadoowwa
Halkaan ka dhaqaaqqayoowwa

Dhammoow curadkaan dhaloowwa
Dhalshii **Nebi Aadanoowwa**
Badhaadhe la dhawrayoowwa
**Ilaahay** meel dhigoowwa
Dharaar la sugaayayoowwa

Dhammoow sharaftiyo ammaantu
Halkay ku dhamaatayoowwa
Dhammoow edebtiyo xaqdhowrka
Ninkii loo dhiibayoowwa

Dhammoow dhebi iyo goboowwa
Dhammoow ubaxyada dhirtoowwa
Dhul fiican ka soo baxoowwa

Dhammoow dherer toosanoowwa
Dhammoow dhumuc soohanoowwa
Hannaan la dhameeyayoowwa
Horseed qurux loo dhisoowwa

Dhammoow dhaan soo noqdoowwa
Dhibcaha roob noo da'oowwa
Dugsiga dhalalada ceshoowwa

Dhammoow dhaqankii dalkoowwa
Dhammoow dhaantiyo fanoowwa
Dhulkoo la caroosayoowwa
Dharaaraha ciidahoowwa
Dhammoow dhaydoo caddoowwa
Dhalaalka cadceedda oowwa

Dhammoow dhiidhiga raggoowwa
Halyey lagu dhiirranoowa
Cirkaasi ka soo dhaccoowwa

Dhammoow dhabar liicinoowwa
Ugaas iyo *"Dhiisiyoowwa"*
Dhigaalka caddaaladdoowwa
Dhimbiisha xaq-doonnadoowwa

Dhammoow duni dhaayo beeshay
Dhammoow dhaqankeedi saydhay
Dhambaal loo soo diroowwa

Ninkaan hooyada dhalaysa
Dhabeesha xambaari doonta
Dhabtuu ku ciyaari doono
Habeenno u dheelmadoowwa

Ninkii dhawr jeer hawaawi
Hortayda la soo dhigoowwa
Ninkaan magac lagu dhawaaqo
**Iqbaal** uga dheegayoowwa

Dhammoow **Mahdi** noo dhashoowwa
Dalkeenna anoo ka dhoofay
Anoo dheeraaday* maalmo
Markaad dhulka soo abbaartay
Ayaan barakada la dhaanshay
Dharaartii **Nebi** udgoon e
Dhexdayduun baad ka toostay
Dhawaaqaagaan maqlaayay

***Dheerow** : fogow; meel durugsan teg. Abwaanku waxa uu halkan ku muujinayaa in wakhtigii uu wiilkiisa Iqbaal dhalshay uu joogay meel fog (dalka Mooritaaniya).*

Dhammoow **Mahdi** noo dhashoowwa
Kashkaan kugu soo dhawayn e
Dhabtayda ku soo fadhiiso

Dhammoow dhabankiyo gadhkayga
Kac oo dhegahayga weerar
Dharkaan siigada ka dhawrto
Dhareerka kac oo ku daadi
Kac oo dhifo buugaggayga
Kac oo dhinac iiga jiido

Dhammoow dhasha jaararkeenna
Dhexdooda kac oo fadhiiso
Kac oo dhirta daaraddeenna
Dharaar walba laan ku joogso
Dhallaannada aynigaaya
Xawaare intaad ku dhaafto
Kac oo soo dhigo *"iskuulka"*
Adoo dhabbadii ka weecan
dhambaalka an kuugu sheegay
Adoon dhimin hawlgalkaaga
Dhulkeenna kac oo hoggaami
Kac oo dhidibbada u jooji
Caddaaladdan dheelhallawday
Kac oo dhaqankiyo hagaaji
Dhaqaalahan toosi waayay
Tacliinta kac oo dhaqaaji
La noo soo dhoofinaayo

Dhammoow curadkaan dhaloowwa
Intaad hawlahan dhex-qaadin
Dhacdooyinka maanta jooga
Siduu u dhaqmaayo duunku
Haddaan soo dhigo hortaada
*"Nidaam"* dhafan baa u yaalla
Dhammoow buur iyo dhir weeye
Bannaan iyo dhaadhac weeye
Habeen iyo waa dharaaro
Dadkoo dhammi soo maraayo

Dhammoow curadkaan dhaloowwa
Adduunyadu waa dhibaato
Wanaag laga dhaaminaayo
Sidii ubax dhiin ah weeye
Caraacar dhexdii ku yaalla

Dhir weeyaan midho macaan leh
Dhunkaalla ka gees baxayso
Bad aanu ku dhiirran weeye
Ninkaan dhisan doonyaheedu

Dhammoow dhaar been ah weeye
Dhaqaaq iyo seexad weeye
Dhismiyo dumintiisa weeye
Dhammoow dhiddig iyo lab weeye
Heshiis iyo dhiillo weeye
Dhammaad bilawgiisa weeye

Dhammoow dulmigaa ku dhuunta
Xaqqaase dhufays u diida
Wax baa dhakhso kuugu yeedha
Wax baa dhursugaad u baahda
Intaan dhimashada la gaadhin
Sidaad ka dhigtaa se weeye

Dhammoow dunidaan dhex joogno
Dhirtaa sheekada samaysa
Ninkaan dhegahiisa taagin
Dhammoow dhagaxdaa afduubta
Ma soo dhaxo duullimaadku
Dugaag dhogorlaa hoggaansha
Sidii dhuuryada u nuuga
Ka dhuuqa wixii ka dhiiqa

Dhammoow dunidaan dhex joogno
Dad baa dheregga u bugkooda
Dad baa gaajada la dhuunta
Waxay dad ka soo dhaceen na
Dhashooda badh baa ku quudsha
Dad baa dhalanteedka beenta

Wixii dhab ah aan ka dooran
Dhaqaale hadday helaan na
Dad baa dhaqankooda xoora
Rag baa dheef gaar ahaan na
Dadkoo dhan ba siisanaaaya
Waxay dhididaan badhkood ba
Badh baa dhacadiid ku daaqa
Dad baa dhawrtiyo ka waayay
Waxay dhar ku soo gataan e

Dhammoow dunidaan dhex joogno
Maxay dhaxaltooyo moodday
Wixii horey loo dhammeeyay !
Muxuu dheeliyay rarkeegu !
Maxaa dhagarqabe dul jooga !
Maxaa dhiigyacabyo daaqa !
Dhurwaayo maxaa ku soofa !
Maxaa habar dhuudhi jiifa !

Dhammoow dhulka aynu joogno
Muxuu dadku dhaawac geystay !
Naftiisa muxuu ku dheelay !
Muxuu dumarkii dhaliilay !
Raggii na muxuu dhufaanay !
Maxaa dhaayaha la waayay !
Maxaa dhegahii la beelay !
Garaadku muxuu dhakoolay* !
Maxay dhallintii habowday !
Dhammoow dhalanguurka diintu !
Muxuu dunidoo dhan gaadhay !

Dhammoow dhulka aynnu joogno
Maxaa lagu dilay dhamaasyo !
Nin dhoohan maxaa la jiidhay !

***Dhagkool*** *: dhis, iwm, meel cidla' ah ka taag. Abwaanku halkan wuxuu uga socdaa sida garaadka aadamahu uu dhabbadii saxda ahayd u seegay, ugu na baydhay ban cad oo aan tilmaan lahayn.*

Maxaa nabaddii la dhuuxay !
Maxaa dhiriq lagu xamaartay !
Muxuu qosolkii ka dhaartay !
Inuu dhoollaha caddeeyo !
Xishoodku muxuu dhaxmooday !
Muxuu dhaygagay la-yaabku !
Muxuu dhayalkii dhaboobay !
Maxaa dheri lagu hagoogay
Runtii wax dhegaysta weyday !
Cadceeddu maxay dhalaashay !
Dabkii dhulka soo abbaaray !
Muxuu dhogortii ka qaaday !
Dhuluuluc* muxuu ku reebay !
Wixii lagu dhaadanaayay
Dhadhaarro maxaa la saaray !
Maxaa dhexdhexaad la diiday !
Maxay in ba dhinac u yaacday !
Muxuu cilmigii dhantaalmay
Markuu dhagarta u adeegay !
Dhaqaale muxuu xumaaday
Markii dhiigga na la iibshay !

Dhammoow curadkaan dhaloowwa
Markuu dadku dhaayo beelay
Markuu dhabbo toosan diiday
Xuduudda markii la dhaafay
Markii lagu maydhay dhooqo
Maxaa dhimashada la doortay !

Dhammoow **Mahdi** noo dhashoowwa
Dharaartaan maanta joogno
Inay berri dhaami doonto
Da'daadu inay na dhaafi
Ilaaha dhigaa yaqaan e

***Dhuluuluc*** *: nabarro ama finan yaryar oo òògada xoolaha ka soo dareera marka la taabtaabto marka ay dhogortoodu qoyantahay.*

Waxaan dhakafaar ka qaaday
Xilkaan dhabarkayga saaray
Sidaan u dhammaynidoono
Waxaa na dhab iigu muuqan
Dhigaallada aan ku siiyay
Dhambaalka an kuugu sheegay
Inaad ku dhaqnaani doonto
Inaad ka dhaqaaqi doonto
**Allaan** se dhankiisa eegay
U dhiibtay ammaanadayda
Inuu dhinacaaga joogo
Inuu dhaxalkay hagaajo!!

Dhammoow curadkaan dhaloowwa
Kashkaan kugu soo dhawayn e
Dhabtayda ku soo fadhiiso

DHAMMAAD

## *GOOREE*

*Waxa mar na ba la illaawi karin waa is-addoonsigii sabab la'aaneed ee ka dhacay dunidan, manta na raadkiisii iyo eelihiisii sii muuqdaan. Waa gumeysigii gaadhay heer ah in uu dadka gato oo ku xoogsado, dabadeed na qalfoofkooda tuuro. Taariikhdu markay ahayd 17/01/99kii, waxaan booqasho ku tagay magaalada* Dakaar *ee dalka* Senegaal, *dabadeed na waxaan u sii dhaafay dhankaa iyo gasiiradda* Gooree. *Gasiiraddaas waxay ku caanbaxday in ay markhaati ka ahayd sidii uu ninka cad u dulmiyay walaalkiisa madow. Halkaas waxaan ku soo arkay waxyaabo aan aad ula yaabay, oy ka mid ahayd gurigii ama gabayihii lagu kala iibsanaayay dadka, kuwaas oo i geliyay murugo aad u weyn iga na soo saaray maansadan :*

*Goorraay* gabadh suubbaneeyya
Garteeda la qaadineeyya
Geyaan weli doonaneeyya

Cadceed gurcud lagu dedaayya
Go'ii iska qaadayeeyya

Gammaan orod laga dabraayya
Xadhkii iska goysayeeyya

Dulmiga gaadmada ku daaqa
Xaqqii ku gadoodayeeyya

*Goorraay* been geed ku joogta
Dadku na sacabka u garaaco
Intay geesaha ku jiiddo

Inay god gashoy na muuqan
Runtii ku ganaaxdayeeyya

Gafuurka inaa la jiido
Inaa gabayoox* la daajo
Inay u galgaasho gaajo
Amay u gabnowdo ciilka
Gobtii iska diidayeeyya

*Gabayoox* : *meel aad u dhaxan badan oo aan gabbaad lahayn*

Gaboodda ninkii u geystay
Ninkii u gurguurtay seexad
Ninkii rabay gawraceeda
Inay gacanqaad u dhiibto
Gobtii iska diidayeeyya

Galiilyo kastoo ku wiiqday
Gobtaanan u liicineeyya

Darmaan cadaw gaasiraayya
Gasiirad la duudsiyaayya

***Goorraay*** malab hooray oo
Cadaawuhu uu gurtaayya
***Goorraay*** ubax gaaxday oo
Illeen nacab goostayeeyya

Hal uu gocor daajiyaayya
nimaan geyin maalayeeyya

***Goorraay*** gellin baan sugaayay
Goggaaga* inaan ku seexdo
Inaan kugu gaadho ciidda
Ama an gomaddayda saaro

***gog*** : *saanta dhinacca geela. Maansadu waxa ay ku tusmaynaysaa carrada gasiiradda Goore ee dalka Senegaal.*

Garoonkii xeer-darraantu
Habeenno ka goodiyaysay

*Goorraay* geeddiga socdaalka
Waxaan gobolkii **Jabuuti**
Habeen uga soo dhex guuray
Waxaa **Geeskii** iga keenay
Galbeed ugu soo socdaalay
*Goorraay* gocashada xanuunka
Gufaaca-dagaallankayga
Heshiis* waa hore la gaadhay
Gugii kontonaad na jooga
Xuquuqdii lagu go'aanshay
Ayaan weli goobayaaye
Halkuu geelii u soofay ?

*Heshiis : waa axdigii ay Qarammada Midoobay ku ansaxisay Xuquuqda Aadamaha taariikhdu markay ahayd 24/10/1948kii.*

*Goorraay* gaalkii ku heeray
*Goorraay* aqalladan gaboobay
*Goorraay* godadkaasi hoosi
Ma meeshuu gali jiraa ?

*Goorraay* geedahan qadhmuuni
*Goorraay* ma gamoor sunoow
Dhulkiisii ka soo guraa ?

Gantaalka halkaa ku yaal na
Ma kii gocomaalayaashu
Gumeysiga diidayaashu
Markay galab dhiidhiyaan
*Goorraay* lagu gani jiraa ?

*Goorraay* gurigaan hor joogi
Ma meeshii gabayahee
Dadkaaga la geynayaa ?

Dhismahan garabkayga yaal na
Godkani ma kaniisad baa ?

Giddaafaddan iyo qushaashku
Ma tii gaalkii cunaa ?

*Goorraay* gegadaa bannaani
Ma beertii gawracaa ?

*Goorraay* boqontay go'day e
Guduudanihii ku boobay
Tolkay oo gama' la jiifa
*Goorraay* gaalkii ku miidhay
Muxuu guntay daafyahaaga !
Muxuu gacmahaaga laabay !
Muxuu garbaduub ku saaray !
Si ay naxariis ka guurtay
Muxuu xadhko kuugu giijay !
Muxuu gumuc kugu asqeeyay !
Muxuu gamas kugu wareemay !
Adoo cadho googo'aaya
Muxuu gocos kugu ciyaaray !

*Goorraay* gobollada jidhkaaga
muxuu kol ba waax u goostay
muxuu gawsaha ku saaray
gagtiisa maxaa la yaabay

Muxuu gacalooy cadkaaga
intuu golxad iyo ku jeexay
Billaawe gasiiradoobay
ka muudsaday dhiig guduudan

Markuu gujiyo badhkaa ba
Muxuu geeraar ku jiiday !
Muxuu gama' kaaga dhaartay !

Kolkuu ganaciisa buuxsho
Muxuu gacalooy dugaagga
Muxuu gorgorka iyo haadka
Intuu gumburtaa is-taago
*Goorraay* gebi kuugu yeedhay !

Kolkaa golaygiyo cayaarta
Muxuu girgiraha u qiijay !
Wadaadkii* goobta keenay !

*Goorraay* geedaha dushaada
Gaskiisa muxuu ku feedhay !

Muxuu gucundhiyo dhulkaaga
Gamoorka qadhaadh ku beeray !

*Goorraay* gaaladu korkaaga
Maxay garanuug sideeda
Dadkaagii ugu gumaadday !
Maxay gabanniyo ku laysay
Dhallaan weli qaan ba gaadhin !

*Goorraay* goofane harraaday
Gumeysiga loloshka dheeri
Intuu gaadiid kaxaysto
Intuu gaadh nagu wareejo
Maxaa lagu guunyo beelay !

Muxuu goobaare caynta
Gacayrtiyo mudhaha geedda

***Wadaad :*** *wadaadka halkan ku xusani waa baadarigii isticmaarka hor socday.*

Qadhaab uga soo guraayay
Carruur uu guri ku ooday
Intuu soo gaadhin reerka
Bannaanka ku soo galaaftay !
Muxuu nin guhaadda diida
Nin aan gardarro u adkaysan
Sagoo dembi aanan geysan
Dushaada ku gawracaayay !

Muxuu gabadh doonnanayd na
Gugeedii markuu dhammaaday
Iyadoo gelbintii la joogo
Yadoo galabtuun la keenay
Ninkeedii intuu garaacay
Intuu garbaduub u laabay
Muxuu naasaha gamuumay !
Muxuu xoog ugu galmooday !
Muxuu gurrac kaga danaystay !

**Goorraay** gaal nacabsanaaye
Gumeysigu waa cadaab e
Muxuu ragga geesigiisa
Barbaar gadh-madoobeheeda
Muxuu hablo gaaridooda
Gashaantimo aan la guursan
Ku gaday gambo iyo "*sumuni*"
Waxaan "*gini*" gaadhin siistay !

Intii galiwayday iib na
Maxay gaajadu ku laysay
Halkii gabayuhu ku yaallay
Muxuu maydkii is-gaadhay !
Maxay gegadii casaatay !

Dugaaggu muxuu ku guusay !
Muxuu gorgorkii ka daalay !

Maxaa gurigaa hagoogan
Albaabka galbeed u jeeda
Habeen gurcudkoo madow ah
Dadkoo gebti lagu xereeyay
Intoo gaadiid la saaro
Dhammaan laga guurinaayay !

Waxay gellin sii socdaan ba
Markay gaajadu badh layso
xanuunku markuu badh gaabsho
Maxaa badda lagu guraayay !
Muxuu gaxashkiyo garfaadku
Kalluun is gamaarinaayay
Yaxaasku kolkaa ku goobtay !

Bannaanka intii la gaadhay
Maxaa dulle lagu garaacay !
Maxaa gebi lagu dillaacshay !
Maxaa lagu beeray geedo !
Maxaa godad lagu qodaayay !
Maxaa guryo lagu dhisaayay
Intay geeridu helaysay !

**Gooraay** gurigaa hagoogan
Maxaa godob iyo ku aasan
Gadood iyo cadho gamaarsan !
Maxaa lacnad lagu gadhoodhshay !
Muxuu cilmigii ku goofay
Maxaa lagu gubay dhexdiisa
Waxay dadnimadu galaysay !

Maxaa lagu guuldaraystay
Garaadku wuxuu gudaayay !

*Goorraay* geydhiyo baroorta
Galiilyo la ooyistaadu
Maxay dunidoo dhan gaadhay !
Maxaad gacal iyo xigaale
Gargaar iyo gacan ka wayday !
Maxaad **Guulle** u samraysay !

*Goorraay* godobtii la geystay
*Goorraay* dulmigii ku gaadhay
Maxay samadii galgaashay !
Maxaa gobo' roob la waayay !
Maxay cimiladu sal-guurtay
Gugii jiilaal la mooday
Camuuddu maxay giriiftay
Gesiin soo saari wayday !
Maxaa gabbashaa cadceedda
Intoo gibil lagu hagoogay
Iftiinku gabaabsiyoobay !
Maxay duunyadu gabnowday !
Muxuu gudhay webi **Ganaane** !
Muxuu dhulku wada gariiray !

Haddaan gacalooy sir gaara
Dadkaagu ka gaabsanaayo
*Goorraay* gees kuugu sheego
Tolkay gobanimo ma qaadan
Ma gaadhin wuxuu u toosay

*Goorraay* shacabkii gadooday
*Goorraay* halgankii la giijay
Wixii loo golongolaayay
Dhammaan loo geylamaayay

Wixii saqda loo gudaayay
Wixii loo galab-carraabay
Wixii loo galayay caynta
Wixii loo daayay guurka
Wixii seban loo gabyaayay
Wixii giiryaale mooye
Libaaxu u geeriyooday
Wixii geel loo halleeyay
Waxaan gudintiyo hangoolka
Ganuunkeennii u tuurnay
*Goorraay* gablan ka ma macaashin
Garoobi ka may mabsuudin
Waxaa mudhahiisii goostay
Raggii  horey noo gasaaray
Gumeysi ayaa u aayay !!

*Goorraay* waan garanayaaye
Illeen nacab waa geddiise
Gafuurka markaan ku jiidnay
Markaan libintii guddoonnay
Bilaash u ma guurahayn e
Gedaafo kaluu u jeeday

Middaa waxan uga golleehay
Waxaan gacalooy u jeedi
Markuu gogoshiisa qaatay
Wixii gooryaan ka daatay
Ayaa guradaada daaqa

*Goorraay* nimankuu gardaadshay
Ragguu gaarka u barbaarshay
Ragguu goonida u soocday
Markuu gabalkaa cunaa ba
Raggii wada gaardiyaayay
Raggii gogosha u sidaayay

Ragguu gabayaha ku reebtay
Ayaa hawshii guddoonsha

*Goorraay* waan garanayee
Runtaan kol na gaagaxayn e
Wixii dahab gaaxanaayay
Wixii gudahaaga buuxay
Wuxuu u galaa-baxaayay
Wuxuu **Gurey** iyo u laayay
Gumeysiga diidayaasha
Waxay gaaladu ku daashay
Ayaa fadhi loogu geeyay

Inaan gobanimo la qaadan
Waxaan gacalooy u sheegtay
Inaan ku gefayn dalkeenna
Waxaad iigu ba garaabi
Tolkay galleydii ma beerto
Tolkay geelii ma eegto
Xadiidka intuu guhaadsho
Gantaal iyo ka ma samaysto
Tolkay gaashaan difaaca
Intoo saan loo garaacay
Ayaa gebi lagu xereeyay
Gabaahiir laga hayaamay
Dhul ay gaajadu hambaadho

Geddaa waxa loo sameeyay
Si godobtii loo illaawo
Si gaalkii loogu baahdo
Si aan geed loola tiigsan
Si aan xukun loogu goynin
Si loo sii daba gableeyo
Intuu bohol nagu guraayo

Inaa gobanimo la qaadan
Waxaan gacalooy u sheegtay
Haddaan gaadiidka raaco
Haddaan jidka goo idhaahdo
Haddaan girgirkiisa qaado
Haddaan guri raadinaayo
Haddaan xarun baadi goobo
*Goorraay* waxa lagu gartaayi
Raggii boqnahaaga gooyay
Gumeystaha magacyadiisa
Ayaa gebigood la siiyay

**Goorraay** golihii aqoonta
*Goorraay* goobaha *iskuulka*
Waxaan gobta soo kacaysa
Garaadkoodii ku beeray
Inuu **Guulaha** na uumay
"*Gooriil*" iyo naga abuuray
*Goorraay* daayeer gaboobay
Inaan abtirsiin ku gaadhin
Halkay gaaladu ku taallo

Inaan gobanimo la qaadan
Badh baa gacalooy yidhaahda :
***"Hadduu Nebi Aadan gaalka***
***Ilaahay ugu gargaarin***
***Inuu gablan noqoni gaadhay"***

Inaan gobanimo la qaadan
Waxaan gacalooy u sheegtay
Raggii debedaha la geeyay
*Goorraay* gaadiidka duula
Gantaalaha samada jiidha
Siyaabaha loo ganaano

Dhirteer dawo looga gaadho
Xadiidka na loo gadhoodhsho
"*Kombiitarka*" loo garaaco
Garaad ka ma soo bartaan e
***Goorraay*** gurdan-raac habow ah
Wixii dhaqan **Reer-Galbeed** ah
Gumeysiga xeerashiisa
Inaa laga soo guddoomo
Inaa geyigii la keeno
Ayaa gobanimo la mooday
Inaa ilbaxnimo la gaadhay

Waxaan gacalooy u sheegtay
Inay guushii habowday
Dadkani guudkaaga saaran
***Goorraay*** galabtaynu joogno
Ninkii horey kuu gumaaday
Maxaa lagu kala gartaa ?

***Goorraay*** gabdhihii dalkaaga
***Goorraay*** gambo-daadintooda
***Goorraay*** guladdada-banaynta
Galgaal iska-yeelistooda
Gidaar-joogsiga raggaaga
***Goorraay*** good noqoshadooda
***Goorraay*** gacmo-dhaafiddooda
***Goorraay*** gaadmada haweenka
***Goorraay*** hablo baadi-goobka
Kolkaa boqnahooga-goynta
***Goorraay*** gacaltooyo-diidka
***Goorraay*** guurkii ka roorka
***Goorraay*** gaalada-jacaylka
***Goorraay*** khamrada u guclaynta
Wixii lagu soo gaboobay

*Goorraay* gebi dheer ka-xoorka
Ninkii ra'yigiisa geysta
*Goorraay* xididdada u goynta
Dad geyfan-ahaan la'aanta
*Goorraay* goonida u jooga
*Goorraay* is gargaarsi-diidka
Intaas iyo boqol gedaafo
Maxaa geyigeenna keenay
Haddii gobanimo la qaatay ?

Waxaan gacalooy u sheegtay
Inay guushii habowday
Gumeysigu waa cadaab e
Dhulkeenna inuu ka guurin
*Goorraay* godadkuu ka jeexay
*Goorraay* buuraha guntooda
Dhulkuu ku gabraaranaayay
Hadmay cid ba weli gufaysay
Miyaan xabsiyada la geynin
Ninkay gaaladu nacayso ?

*Goorraay* gobolkii dhaqaaqa
*Goorraay* shacabkii gurguurta
Inuu garbiyaa da'diisa
*Goorraay* guntigaw adkaysta
Mid baa lagu soo gujjaaye
Maxaa gobanimo la qaatay ?

*Goorraay* gabdhahaaga suubban
Gabood-fal anoo u yeelan
Anoo ku gefayn xaqqooda
Raggii gabay waajibkooda
Raggii guushii haleeyay

Raggii danahooga gaara
Gumeysiga kala heshiiyay
Miyay googarad toshaan ?
Garaysi miyay xidhaan ?

*Goorraay* gabbalkaa dhacaaya
Intuu soo galin habeenku
Gartaada hadmaa la qaadi ?
Hadmaa geedaha la geyni ?
Hadmaa guddi loo xilsaari ?
Hadmaa la gorfayni dooni ?
Hadmay guurtidu dhammayni ?
Hadmay soo gebogebayni ?
Hadmaa xukun lagu go'aamin
Inaa xabsiyada la geeyo
Raggii dadnimada gumeystay
Raggii gawracay dareenka ?

*Goorraay* gadhwadeennadii na
Hadmaa laga goyni qaanta ?
Hadmaa gobanimo la qaadan ?
Hadmuu geeddigu dhammaani ?

*Goorraay* maansadan "*Garsoora*"
Haddaan soo-gebogebaynta
Gunaanad ku-sii-dhaweynta
Guntiimo intaan dul saaro
Intaan guudkeeda feedho
Haddaan madaxa u galaalo
Haddaan dhaclahii ku giijo
Cabaadh iyo dahab guduudan
Haddaan gaadada u saaro
Haddaan cagaheeda gaaban

U soo gado kabo u gaara
Kolkaa ubax lagu gartaa na
Haddaan gabbaldaye u dhiibo
Intaan goroddaw salaaxo
Geyaanka haddaan hor keeno,
Toloow yaa garani doona ?
Tolow yaa guursan doona ???

DHAMMAAD

## *CANAB*

***In loo asteeyo jacaylka maalin u gaar ah oo lagu xusso aad baan ugu farxay, waxaan se kaga farxad badnaan lahaa haddii maalin walba loo huri lahaa jacaylka. Waa waraaq aan u diray 14/02/1999kii jacaylka iyo cid kaste oo qof jecel, aniga oo jooga magaalada** Nuwaakshoot **ee dalka** Mooritaaniya.*

Cishadii jacaylkiyo
Cishqigii i laasimay
Ciid looga dhigayeey !
Yartii aan calmaday ee
**Canab** baan u dirayaa
Ubax caynba-caynoo
Casaan ugu sarreeyoo
Cidhifyada huruud iyo
Caddaan lagaga beegoo
Salkiisa na cagaar iyo
Caleen lagu sargooyoo
Cosob iyo ugbaadoo
Carfigiisa aadmigu
Ku illaawo ciilkiyo
Cidhiidhiga adduunkee
Toloow maw cuntamayaa ?

Ciidyahay adduunyada
Dookh waa cajaayib e
Rag baa cuudka xoolaad
Iyo maalka caabuda
Badh na ciidan xoogliyo
Carshi ay ka taliyaan

Ayay cududda saaraan
Anna **Canab Ugaas** iyo
Cishqiga igu baahaa
Caqliga iga qaadoo
Cishadii la joogo ba
Cirka oogadiisiyo
Xafladiyo ciyaariyo
Caroos baan ku kulannaa

Kol na ciidda hoosiyo
Waxaan kula caweeyaa
Cadaab aan dhammaan iyo
Cidla' laga dhaqaaqiyo
Guuriyo carraabiyo
Cadho laga heshiiyaa
Cishadaannu kulanno na
**Canab** laafyaheediyo
Cillaankay isa saartiyo
Cadarkiyo bukhuurkiyo
Cabaadhkiyo silsiladdiyo
Socod aan cuslayn iyo
Jidhka cidhibsigiisiyo
Dhoollaha cadayntiyo
Codkeeday khalkhaliyoo
Tinka caaradiisiyo
Cidhibtaan ku joogsado
Dab curuuqda qaadiyo
Cadanyo igu beeroo
Dareen laygu caydhshiyo
Cir baa igu darrooroo
Carrabkaa i laabmoo
Calooshayda waxa jira
Anigoon cabbirin baan
Dib u soo carraabaa
Cashar iima noqotee

Faruurtaan cunaayoo
Naftaan ciil badaayoo
La canaantamaayoo
Halkii baan ka celiyaa
Cagtan daalka loo qoray

Nafta waxan cabudhiyoon
Kaftan sii cabbaystoon
Isa sii cidaado ba
Casarkaan is aragneen
**Canab** soo hor joogsado
Naf an ceeb lahayn oo
Dhabannada na caaniyo
Codcod uun la moodiyo
Cududaha jidhkeediyo
Cambaruudka naaskoo
Dharka soo cadaadshiyo
Indho xuural-caynoo
Cidhif iiga jeedooy
Igu soo caddayn baa
Araggay cawira oo
Cadceedda iga qariyoo
Ciddidoon qaniiniyo
Cammuud miisitaan iyo
Carruur baan u laabtaa

Ciidyahay jacaylkani
Sidaan ciidan ugu ahay
Waxa kuu caddayn kara
Cudurrada dhammaantood
Wixii culumadeenniyo
Dhakhtarradu ka caagaan
**Canab** eegmadeedaan

Kaga caafimaadaa

Cidladiyo socdaalkiyo
Camalkiyo wax-qabadkiyo
Wixii caato keeno ba
Cid kale u ma baahdee
Caqligayga uun baan
Dib u soo ceshaayoo
Nafta ciirsigeedaay
Intaan **Canab** xasuusnahay
Kolla caajis ima helo

Cishqiyahaw hubaashii
Cudur iyo xanuun iyo
Cuqdad iyo ma tihid nabar
Iyo cadow wax laayee
Cilmi layga qariyoo
Qalbiga i camira oo
Dhaxanta iga celiyiyo
Webi laga cabbaad tahay

Inaad ceeb ka dheer tahay
Cadraddaan jeclaadiyo
**Canab** saw imaad barin ?
Anna sow carbuuntii
**Caadilkii** abuuriyo
**Casiissow Ilaahay**
Xaq intaan u caabuday
Mahaddii umaan celin !

Cishqiyahow naftaydiyo
Wiilkayga curad iyo
Cilmigiyo aqoontiyo
Caqligiyo garaadkiyo

Cimrigayga kuu huray !

Adna beriga ciiddeed
Anigiyo yartaa **Canab**
Adigaan ku cugannee
Noo qiiji cuudkiyo
Cusburka iyo fooxoo
Cadar noogu maydhoo
Cishqiyahow na barakee !
Weligaa cusboonow !

Shimbirtu ba codkeeday
Ku ammaantay cayntiyo
Cufka ay ku hoyatee
**Alloow** caashaqaygiyo
Ciidaha jacaylkiyo
Naftaan caawa tabayiyo
Ubaxyada casaanka ah
Carradaan ku hooydee
Cimilada macaan lee
**Carta** buuraheediyo
**Caska** iyo **Tajooriyo**
**Cookaar** dhexdiisiyo
Degta **Khoor-Cangaar** iyo
**Cassal** baallaheediyo
**Randa** iyo **Casaamiyo**
**Casa-Geela** iyo **Ubukh**
**Cambaado** ku beeroo
Colaad iyo dagaal iyo
Cadaawaha ka eegoo
Cimrigooda dheeree !!

DHAMMAAD

## *SHACABYAHOW !*

*Waxaan shaki ku jirin in dawlad salkeedu yahay shacab. Jiritaanka iyo horumarka dal walba wuxuu ku xidhan yahay kol ba sidii shacabku u tooso. Heestan, oo aan tiriyay 03/04/1999kii, waa baraarujin taasi la xidhiidha.*

Shacabyahow ma toosnaa ?
Sheekada ma daynaa ?
Shidhka aan ku boodnee
Shaqo maw dhaqaaqnaa ?

Shacabyahow ma toosnaa ?
Shisheeyaha ma dhaafnaa ?
*Shalillaa!** cirkaa sare
Ma isku la shareeraa ?

***Shalillaa** : erey af carabi ah oo tusmeeya bilowga fiican ee qasaa'idka*

Shacabyahow ma toosnaa ?
Macdanaha ma shiillaa ?
Shirkadaha ma badinnaa ?
Shaaha na ma beerraa ?

Doonyaha shiraacyada
Iyo shawladleyda ba
Badda mawgu shaydhnaa
Shabag lagu ugaadhsado ?

*"Shoomeerka"* daaliyo
Dhallinyarada shiiqdee
La shiddowday baahida
Shuqul maw abuurraa ?

Shacabyahow ma toosnaa ?
Sharraxaadda maanta ah
Wixii shalay la soo maray
Ma ku shaabbadaynnaa ?

Sheekhyada dalkeenniyo
Odayada ma shirinnaa ?
Waxay shaandho mariyaan
Shukri mawga celinnaa ?

Shabaabyahow ma toosnaa ?
Sharad maysla dhigannaa ?
Shiish meel ma saarraa ?
Shishe maw dhaqaaqnaa ?

Shacabyahow ma toosnaa ?
Shallaytada ma daynaa ?
Sharka xeerashiisiyo
Shakiga na ma dhaafnaa ?

Shibbanaha xuruufta ba
Haddaan shaqalka lagu darin
Shey lagu ma qeexee
Shinni maw ekaannaa ?

Shacabyahow ma toosnaa ?
Shiidaal iftiimiyo
Shamac iyo cadceed iyo
Shoocaac ma noqonnaa ?

Shacabyahow adduuyada
Ma "*shoofeerinnaayoo*"

Xiddigaha shisheeyiyo
Shuhuura ba ma dhaafnaa ?

Shacabyahow ma toosnaa ?
Shuuq-shuuq qarsoon iyo
Shifto iyo xumaan iyo
Shirqool mayska daynaa ?

Shacabyahow ma toosnaa ?
Shakaallada an jebinnee
Shaxda nolosha loo dhigay
Shardigeen ku badinnaa ?

Nin shaxaad ku nooloo
Sharaf iyo dadweynuhu
Wanaag ay ku sheegaan
Shacabyahow ma maqasheen ?

DHAMMAAD

## *SAABXIDH*

*Taariikhdu markay ahayd 09/04/99kii ayaa laga sugayay dalka Jabuuti in ay dadku u dareeraan doorashada madaxweyne cusub ka dib markuu madaxweynahii hore, Xaaji Xassan Guuleed, ku dhawaaqay in uu na ka qayb-qaadan doonin baratankaas. Aniga oo dalka markaa debed kaga maqnaa, waxa aan jeclaaday in aan kaga qayb-qaadto hawlshaasi maanso ta-looyin iyo tusaale xambaarsan, anoo farta ku fiiqaya hawlsha culus ee sugaysa madaxweynaha cusub. Maansadani waa saab aan is-leehay, haddii la qaato, wuxuu dhiisha maamulka ka dhabi doonaa jabitaan. Wakhtigaa waxa aan joogay dalka* Mooritaaniya.

Qorrax soo baxdaay mood*!
Saakiyo berraay nool*!
Samadiyo dhulkoow marag !
Waxaan joogi waa subax
*Abriil* waa sagaalkii
Sannadku na sagaal buu
Ka sagaashan dheeryahay
Hadda saacadaydu na
Saddexdii habeennimo
Ayay saa'id leedahay
Anigu na sebaanyahow
Waxa aan ku suganahay
Sahan iyo waxbarashiyo
Dal sokeeye weeyaan

Jimcayahow samaan iyo
Sadaan kugu aqaan oo

***Mood*** *: erey ducco iyo milgeyn ah oo lagu soo dhaweeyo wax lagu farxay.*

***Nool*** *: erey ducco ah oo «cimrigaa ha dheeraado!» la nuxur ah.*

**Saatirkaa** ku sheegee
Shacabkii sinnaantiyo
Sooryada ku caanbaxay
Markay saaka toosaan
Sawdkiyo kalsoonida
Ninkay siinidoonaan
Ayaan sacabka midig iyo
Salaan kuugu dhiibiye
Sadarkaygan gaadhsii:

Madaxweyne silig iyo
Saxariir la soo arag
Salow iyo dhibaatiyo
Sas wixii na soo maray
Gobanimo la soo sii
Dalku saafi noqoy oo
Saaxirkii la kala guur

Farxaddii la soonyoo
**Rabbi** loo sujuudyoo
San-ku-neefle oo idil
Siliccii illowyoo
Saxansaxo xornimo iyo
Lagu seexay nabaddii

Dabadeed la soo socoy
Soddon jeer la soo toos
So'daan maanta joogniyo
Saldhiggaa la soo gaadh

Adiga na sarreeyoow
Haddii Eebbe kugu simay
Ogow saaka dabadeed
Xil baa qoorta kuu sudhan

Waxaan uga socdaa waa :
Shacabkii ku saanyaday
Ee sawdka kuu huray
Wax bay kaa sugaayaan

Sarkaalkii la doortoow
Ma sugnaato duniduye
Si bay maanta joogtaa
Suuq baa la moodaa
Dadku uu ka simanyahay
Seeriyo xuduud iyo
Wax-wax sooca loo diid

Saaruukh la tuuriyo
Baaruud la saydhiyo
Soodhkii wax tariwaa !
Dhaqaalaa silaaxoo
Sallaan dheer ku joogoo
Ninkii saaqyo haystaa
U sarreeya maalmahan

Saaxiibbo adag iyo
Isagoon saxeex wadan
Dalka soofa keligii
Salabaa la mariyaa

Si kaste ba ha noqotee
Siyaasaadka oo idil
Waxa lagu saleeyaa
Mabaadii' la wada sido
U samaysan kala gaar
Iyo suul-dhabaalayn

Madaxweyne suun iyo
Meel barafku saarmiyo
Saxaraha bannaan iyo
Dhulka seerayaashee
Buuruhu safteenee
Kaymuhu suqduud iyo
Surin ay u diideen
Saanacaa abuuroo
Uumaha u sooroo
In ba soohdin buu dhigay
Mid na saabbir maahee
Sababaha arsaaqdoo
Idil buu ku saydhoo
Sirta noloshu way taal

Dalkeennu na sabool iyo
Saan diiran maahee
Hadday dunidu suuq tahay
Salkeedaan ku naalaa

Waxaan uga socdaa waa :
**Sidney** iyo **Bikiin** iyo
**Singabuurta** bari iyo
**Landhan** iyo **Suweed** iyo
**Salfadoor** dusheediyo
Dalka **Saantiyeegiyo**
Halka **Saan*** ku taalliyo
Cid kastoo sarraysaan
Saamayn karaynaa

Madaxweyne seerkiyo
Sabaddada agteennu na
Si bay maanta joogaan

***Saan** : waa soo gaabiska magacca magaalada Saanfaraansisko ee carriga Maraykanka*

Suus baa badhkood galay
Sar-sar buu u kala jaray
Badh baa selellitaan iyo
Sooyaamid mooyee
Iska siibay nabaddii
Badh bay silica gaajadu
Subag iyo barwaaqada
Kula seexataa gogol
Badh baa sabasabayntiyo
Seetada* yaqaan oo
Sixirka na adeegsada
Badh baan saancadkoodiyo
Maalmaha sugaayiyo
Wax ku saabsan garanayn

Waxan uga socdaa waa :
Saaxiibbadeen iyo
Sabaddada agteenna ah
Maxaa suuragelayoo
Lala soormi karayaa ?
Maxaa lagu safaadayn ?
Si kastooy u kulushahay
Danta saaku waa maxay ?
Maxaa sahandambeetiyo
Saakuunta noo daran ?
Yaan sacab u dhiibnaa ?
Yaan dhabarka siinnaa ?

Hadal waa nin saafiyo
Nin kaloo sarriigee
Wixii sadaradaydani
Kaga saabsanaa debad
Ma sarboo ma sigibtiray ?

***Seedtó*** *: xadhigga labada jeenyòòd lagaga xidho ishinka iyo gammaanka.*

Si wanaagsan maw dhigay ?
Ma u diiday saranseer ?

Imika na sarreeyoow
Male waa sed gaaroo
**Rabbi** baa ku siiyee
Adna hawl Suldaan iyo
Soojeed habeen iyo
Shacab baa ku sugayee
Danta guud nin seexdiyo
Sufahada ka dheeree
Hawlaha rag siibtoo
Ayaamuhu soleen iyo
Dadka suubban la ogow
Garta niman sigsaaggiyo
Simbiidhada ka eegoo
Kala saafa ugu dhiib
Wixii soo siyaado na
Culimada siraaddiyo
Odayada su'aaloo
Weligood ha sii dayn

Safaaraadka debedda na
Rag siyaasadoodiyo
Cilmigooda sida oo
U samaysan la ogow

Yay na niman sakhraamoo
Dadku uu saluugiyo
Sonkor-jecesha aadmigu
Saaxiibbadaa noqon

Weligaa sufey iyo
Nin sakhaalitaan iyo

Si-kaste-ba-ciyaar iyo
Inuu saaxir kula talin

Sirta dawlad leedahay
Sanaadiiq ma deeqdee
Sadri kuu ilaashiyo
Rag sameeya la ogoow

Taladaa sisibatoo
Kolkol kaa sannaadhoo
Kolla kaa sirgaxantee
Dad na ruux ku saaciday
Waa kii ku saxayee
Sahwiguu arkaayaa
Qalbigaaga yuu sarin

Guulaha sokeeyiyo
Sahan kaa xumaadaa
Hadafkaad u socotee
Suntan yaanu kaa qarin

Sannadkii ku dhaafa ba
Miisaanka saar oo
Ka kaleed u socoto na
Saadaali weligaa

Markay sheeko siriirtee
Ama xaajo suranto na
Samahaa daweeyee
Sal-ballaadhin la ogow

Salow iyo colaad iyo
Siigiyo abaar iyo

Sarrifkoo xumaadaa
Sawaabkaaga yuu lumin

Dadkood saamaxdaa iyo
Samirka na ha moogaan

Shacabka na sirdoon iyo
Yay na seefi kaa xigin

Isa-seegga beeluhu
Sabab yaanay kaa dhigan

Safka soo kacaayiyo
Hooyada saraw qaad

Saqadleyda hoosiyo
Sancoleyda taageer
Saxadiyo aqoontiyo
Siyaaxada horowmari

Fanka saxarka diidee
Runta lagu sifeeyee
Seetada ku daaqiyo
Suugaanta qiimee

Wax inaan samayniyo
Sinaacadda ha moogaan

Badda *saaradiin* iyo
Kalluun seebab weyn iyo
Milixdaa sabbaysiyo
Luul nooga soo saar

Dhulka "*saans*" shidaal iyo
Saliidaha habeenkii
Dadku uu siraatiyo
Biyo nooga soo saar

Buurahan sisiladda ah
Sibidh iyo xadiid iyo
Macdan baa sujuudiyo
Dahab nooga soo saar

Saraccaa laf-dhabaree
Sisintiyo bariiskiyo
Sonkortiyo hadhuudhkiyo
Timirtiyo sarreenkiyo
Sinjibiilka kulul iyo
Seytuun na noo beer

Ilbax laysma siiyoo
Waxa sooha aadmiye
Soo saar dadkiisii

Sidaas baan saboolnimo
Ku sabootiyaynaa

Sidaas baan barwaaqiyo
Nolol soormaseegto ah
Ku salaamidoonnaa

Calankeennu saas buu
Samadaa dusheenna ah
Ku salaaxidoonaa

Adigu na sidaasaad
Taariikhda baal sugan
Ku saxeexidoontaa

Hayeeshee sarreeyoow
Wanaaggaa la sugayaa
Wuxuu suuragelayaa
Markuu shacabku sawdkiyo
Sacabkiisa kula helo
Eed sees-dhigaalka ba
Si u wada dhaqaaqdaan

Anna saabxidhkaygii
Bal an soo sargooyee
Mar kaliyo salaantii
Saaxiibbaday hoo !

*DHAMMAAD*

## *DUNI AAKHIR-SEBAN*

*Maalinkii ay taariikhdu ahayd 26/06/1999kii ayaan hoos ugu fiirsaday adduunyada oon ogaaday in ay tahay dhallaan-habaabis laga gungaadhayn. Waxa aan dib ugu laabmay taariikhda oo waxa aan ogaaday in ay weligeed ba ahayd duni aakhir-seban.*

Duni aakhir-sebaneey !
Daar lagu negaan oo
Laga wada dareeroo
Durba laga dhaqaaqaay !

Daas reerka hoosgala
Ku darrooshimeeyoo
Daldaloollo badaneey !

Qaran meel daleed oo
Dambas weyn ka baxay oo
Dabayluhu lulaaneey !

Gebi soo dumaayoo
Dandannaaniyaayoo
Dugsi aan lahayneey !

Daruur lagu hayaamoo
Doog aanan bixineey !

Daad-xoor sabbayn oo
Dadku uu wax moodaay !

*"Tiinoo"* dalooloo
Biyo lagu daldalayaay !

Waxaan lagu degaynoo
Dedaal lagu baxshaayeey !

Daal iyo harraadeey !
Damac iyo madhnaaneey !
Dood iyo is-jiidheey !
Dacwad iyo xasaradeey !
Dulmi iyo wax-boobeey !
Dembi iyo cadaabeey !
Dacar iyo qadhaadheey !
Deyn iyo su'aaleey !
Dakaniyo colaadeey !
Duumiyo xanuuneey !
Been lagu dagmaayeey !
Dalxiis lagu hungoobaay !
Daranyada hoggeedaay !
Dacdarriyo wax ba'aseey !
Dariiq aan dhammaaneey !

Imisaad nin doobiyo
Ugub gaari dumaroo
Isku doonnanaan jiray
Ama labo is-doortoo
U diyaar ahaa guur
*"Doolar"* iyo duq weyn iyo
Doqon soo dhex galisoo
Dabadeed is-arag oo
Derbi weli ku kala xidhan !

Imisaa nin daar dheer
Ku dekee lahaayoo

Wuxuu duunyo haystiyo
Dahabkii ku madhiyoo
Dedaal weyn ku bixiyoo
Xooggiisii ugu daray
Kolkay dherer daraaddii
Daruuraha dhex-qaaddee
Ranji lagu daguugee
Marmar lagu daleeyee
Deyr lagu wareejee
Durdur lagu faruuree
Lagu beeray doog ee
Loo diiday meel dhiman
Inuu dego ha joogtee
Isagoo dagnaantii
Jaad uun daldalayoo
Daankiisu buur yahay
Weli daawi kaga bogan
La darbeeyay galab oo
Illeyn diirrimaadkii
Samada uga duuloo
Isaga na la duugoo
Dadka hoose lagu daray !

Nin dukaan lahaan jiray
Ka dillaalan jiray suuq
Maxaad damac ku beertoo
Wax ba haw danaynin e
Xaaraan dudubiyoo
Degdeg uga macaashoo
Dadka iibi tidhiyoo
Isna kuu doqnooboo
Kol ba dhinac u duuloo
Badda midha ku daadshoo
Ku dabbaashay ciiddoo

Darandoori yidhi oo
Ku dambeeyay gaajiyo
Daal iyo wareer iyo
Inuu daas la hoos galo
Faqri aan dawoobayn !

Deris iyo walaal iyo
Saaxiibbo daacad ah
Iyo duul iskaashaday
Dan-wadaag ahaan jiray
Imisay daraaddaa
Warmaha is dareenoo
Ama kala durkeen oo
Deyrkii colaaddiyo
Dakano u dhexaysaa !

Nin dulqaad lahaayoo
Danyarta-u-adeegiyo
Deeq lagu ogaan jiray
Oo daadahayntiyo
Loo doortay madaxnimo
Imisaad dagaal jirin
Dareenkiisa galisoo
Hebel baa ku dilayiyo
Kan kalaa ku dagayee
Iska daafac tidhiyoo
Cidla madhan la doodoo
Dalka mooday kelidii
Inuu Daa'im siiyoo
Calankii na duubtoo
Shacabkii dulleeyoo
Dulmay oo xad-dhaafoo
U dullaamay gees oo
Dadku wuxu adkaysto ba

Kol uun lagu dillaacoo
Deldel loogu jiidoo
Laga diiray sharaftii !

Imisaad nin diintiyo
Dugsanaayay **Nebigoo**
Xaqqa diirsanaayo
Degganaan ku caan baxay
Kol uun aad la duushoo
Durbaanka u garaacdoo
Deyrkii **Islaamkiyo**
Dawgii ka baxay oo
Dhaxalkii dayacay oo
Dib haddeed u soo noqon !

Da'dii soo kacaysa ba
Imisaa ku doontoo
Digniin aanan qabin oo
Gabadh dihin ku moodoo
Deyn kuu galaysoo
Diric iyo marriin iyo
Dahab kuu gadaysoo
Dhabarkaagan duubmiyo
Dhafoorkaagan diisiyo
Daankaagan dhadhay iyo
Duqnimada ku haysiyo
Daalkaagan arag oo
Ku dabbaasha dhooqada !

Imisaa dad kuu xidhan
Ku daboolan uub oo
Xabsiyada diyaarkiyo
Xabaalaha ku daa'imay !

Imisaa dad kuu xidhan
Daaraha dhexdoodiyo
Ku dekeeya nolol wacan !

Imisaa dad kuu xidhan
Dacdarrada la jiifsada
Dekadaha dhexdoodoo
Diiwaanka maalkiyo
Daftarkaagu uu nacay !

Imisaa dad kuu xidhan
Dabran oo is-moog oo
Diyaaraadka raacoo
Ku wareega dunidoo
Xafladaha u "*daans*" taga !

Imisaa dad kuu xidhan
Dabuub iyo wax-sheeg iyo
Hadal aad u diidoo
Debnahooy dhaqaajaan
Wadka kaaga daranyahay !

Imisaa dad kuu xidhan
Dambarkaaga nuugoo
Dallacaad sugaayoo
Darajooyin kugu qaba !

Imisaa dad kuu xidhan
Muuqaagu dagay oo
Defka kuu tumaaysoo
Dabcigaaga yeeshoo
Kaa dabadhacaysoo
Kaa doortay aakhiro !

Imisaa dad kuu xidhan
Dacas aad ka dhigatoo
Diintaada haystoo
Digrigaaga badiyoo
Sidaad doonto yeeloo
Dacashooda kuu huray !

Imisaa dad kuu xidhan
Inta kuu dahsoon iyo
Dulucdaada fahantoo
Danta oo qasbaysiyo
Damac kuu agjoogtoo
dareenkaaga aan qabin !

Imisaa dad kuu xidhan
Inta kuu dahsoon iyo
Dulucdaada fahantoo
Dhan uu kaaga duuliyo
Duni kale ka raadsada
Dayaxiyo marriikhoo
Dariiq uu u sii maro
Weli daydayaayoo
Inuu kaa dulboodiyo
Dagaalkaaga soo wada !

Dembigaaga awgii
«*Gaafaa duraa*»* iyo
Illaa doorka maanta ah
Magaccaa ma doorsamin
Duni aakhir-seban buu
Dadku kuugu yeedhaa !

*Allay lehe !* dul xumidaa !
Dabcigaagu ba'anaa !

***Gaafaa duraa :*** *erey af oromo ah oo macnahiisu yahay : beri hore*

Dareenkaagu naqanaa !
Damiirkaagu madhanaa !
Carrabkaagu danan iyo
Daandaansi badanaa !
Addinkaagu diranaa !
Wax ku duubi ogidaa !
Madaxaagu digashiyo
Dibindaabyo badanaa !
*Alla !* digagub weyneey !
Haraggaaga duugga ah
Kol ba doorin ogidaa !
Habka loo dillaashiyo
Dabinkiyo ugaadhsiga
Xadhko daadin ogidaa !

*Allay lehe !* dux li'idaa !
Doobigaagu madhanaa !
Dalbahaagu weynaa !
Difaaccaagu siganaa !
Dabarkaagu fududaa !
Dawadaadu jabanaa !
Inta ceeb dahsoon iyo
Dacfigaagu badanaa !
Hayeeshee Dagaageey !
Dadka kani ku aaminay
Kaa doortay aakhiro
Garaadkoodu daranaa !

Duni aakhir-sebaneey !
Weligaa ba soo duul
Ubadkaaga soo didi
Dugaaggaaga soo kici
Dabaylaha sidoodiyo

Duufaanno xoog badan
Wax kaste ba duqqeeyoo
Bankaa soo durduriyoo
Duryan oo hadaaqoo
Digtaatooradeeyoo
Waxaad haysa soo daa

Anu dawlad baan ahay
Duruus gaar ah loo dhigay
Waxa aan dul joogaa
Ogow dooni weyn oo
Dakhalkeegu adag yahay

Ogow dawliskaygaan
Jannada u diraayoon
Malab soo dartaayoon
Weligay durduurtaa

Ogow waan ducaysnoo
Dirkii awliyaad oo
Digrigiyo cibaadoda
Ku duqoobay baanoo
Dallad baan hagoognahay

Dalamada baxaysiyo
Dawankaad maqlaysaa
Dirir iyo col weeyoo
Ogoobeey dilkaaga na
Daliil baan u haystaa

Duni aakhir-sebaneey !
Haddii aanan danab iyo
Madfac duuban kula dhicin

Hadduu diirku kaa bixin
Hadduu dakharku kaa badan
Ilmo daadanaysiyo
Hadduu duufku kaa quban
Midho daafiyeed oo
Daayeer qaniiniyo
Haddaan digada kaa dhigin
Daqiiqaha haddaad noqon !

Damqashada xanuunka leh
*Darraadeey !* haddaad odhan
Dadkii aad xaraashtiyo
Haddaad daacin godobtii
Dafiraadahaagii
Dib haddaad u soo fiqin
Dawaafkii ka sheekayn
Dawarsiga haddaad badin
Dacwaddaadu sii socon !

Duni aakhir-sebaneey !
Maansadan dabiibka ah
Duhurkiyo dharaarta ah
Tolmahiyo dawaarka ah
Didmadiyo sugnaanta ah
Dab-ridka ah digniinta ah
Daljirkiyo xasuusta ah
Dabayaakhadeedii
Ma ku deeqay hadalkii ?
Madaxxaaga maw degay
Mise waan dardaarmee
Daleed baan ku shubayaa ?

Duni aakhir-sebaneey !
Dulqaad hayga eegin e
Kuuma na debcaayee
Imika ba is-derajee
Saddexdii dalaaqood
Horaan kuugu deeqee
Dudoo haygu soo noqon!!!

DHAMMAAD

## *DADWEYNOOW !*

*Waxa ay maraysey arrinta Soomaaliya meel aad u foolxun, markuu Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle ku dhawaaqay hindise cusub oo lagaga xaldoonayo dhibaatada dalkaas ku habsatay. Wuxuu taabtay dhul qarsoonaa, taas oo ka markhaati kacday in uu yahay nin ku xeel-dheer siyaasadda. Waxay ahayd arintaasi mid dadku, meel kaste ba ha joogaane, ay u sarakaceen. Anigu na waxaan dedaalkii Madaxweynaha ku darsaday gabayga hoos ku qoran, oo waxa aan ugu baaqayay bulshada Soomaaliyeed in ay ajiibaan dhawaaqa walaalkood. Waxa aan tiriyay gabaygan 27/10/1999kii anoo jooga magaalada* Nuwaakshoot *ee dalka* Mooritaaniya.

Deelleyda maansada **Rabbaa**
Iigu dawgalay e
Anigaa laa ii doortay oo
**Daa'im** ii qoray e
Khalqi ku ma durreeyee xaqaa
lagu difaacaaye
Kol ba daranyo ii muuqataa
Lagu dabiibaaye
Sidii oday da' joogaan qof dagan
Ugu dardaarmaaye
Waxaan maanta daadihinayaa
Danaha **Soomaale**
Daad soo buqdhaday baa qalbiga
Soo dillaacsadaye
Maanta na an soo daro baddaa
Debinta soo dhaaftay

Qaran dumay qabiil deedamiyo
Degello aafoobay
Dal jibaaday taariikh deldelan
Magac dameeroobay
Calan dacayda laalaadiyoo
Midabku doorsoomay
Sharaf dakharradii lagu hubsaday
Maro ku duubaysa
Gacal daanka uun haysta oo
Madaxu uu daalay
Gocor durugsanoo kugu digtiyo
Gaal durduradiisa
Difaac-li'ida daranyada xadkiyo
Cadowga soo duulay
Webi diriray duufaanno roob
Danabyo loo yeedhay
Yaxaas duurka soo galay dugaag
Xaadhimaha diiday
Abaar dubatay dooggii baxiyo
Dogobka qiiqaaya
Dad xayiran dillaallo* u xanniban
Dano is waydaartay
Doqonniimo dembi loo tartamay
Derajo loo ooyay
Magaalooyin daayeer dhaxliyo
Gobol daleedoobay
Derbi liicay daaraha burburay
Kaabadaha diiday*
Saqaf diiran dariishado* furfuran
Sibidh la daandaanshay
Dekad xidhan dariiq laga hadhoo
Miino lagu daadshay
Madfac dedan is-goys dayday tugan
Dawga cidhifkiisa

***Dillaallo*** *: eregan waxay maansadu ku tilmaamaysaa qabqablayaalsha dagaal ee Soomaaliya.*

***Diid*** *: (qof daalan ama bugka) dhacdhac.*

***Dariishad*** *: daaqad*

Dable qaawan oo qori derderan
Deliga loo saaray
Gumac duuban oo layska diray
Diga-gubkuu keenay
Dhiig daatay nabad loo darsaday
Dhimasho diinoowday
Mayd debedda yaal oo hadda na
Cidi danaynaynin
Lafihii dadkii hore ka hadhay
Ood duddumo mooddo
Uur dooxan dumar lagu kubsaday*
Qoriga daabkiisa
Nabarrada dahsoon iyo qalbiga
Dacarta ooyaaya
Cilmi dabay aqoon laga degdegay
Dib-u-dhacay keentay
Dugsi xidhan **Lafooloo** dayacan
Dawlad laga quustay
Dawo madhatay daacuun qarxiyo
Duumo iyo qaaxo
Dhakhtarkii dedaaloo sidii
Deero lagu tuujay
Dabar-go'a ku dhacay duunyadiyo
Dalagyadii beerta
Dahab iyo mallaay* cadow daldalay
Debad u iib geeyay
Xashiish dooxa lagu beeray iyo
Webiga daaciisa*
Qashin iyo sun deebaaq ah oo
Xeebta lagu daadshay
Hooyada daryeel weyday ee
Daabtay ubadkeegu
Dalanbaabi gaajiyo colaad
Odayyo loo duugay

***Kubso :*** kufso.

***Mallaay :*** kalluun

***Daacca :*** *faafka*

Dacdarriyo darxumo raagtay iyo
Diifta iyo ciilka
Shacab diday dagaaggiyo qaxiyo
Alalka daadduunka
Duni yaabban daad meel kasta ba
Wada dinaafaaya
Dawarsiga dawaafkiyo baryada
Ficilka doofaaray
Damac biiray diin laga hadhgalay
Male dalaafoobay*
Dabci fidhidhay dacwado is qabasaday
Morome* deynoobay
Dirkii soo kacaayoo ku lumay
Debaduhuu joogay
Dhaqan diilalyoodiyo* dubkoo
Layska wada doorshay
Dafiraadda isirkaad lahayd
Ceeb ka duruggeeda!

***Dalaafow :*** *ayaan-darro ha kugu dhacdo; leelleel; ayaandarayso.*

***Morome :*** *muran*

***Diilalyood :*** *dhaxmood*

Intaan soo dareersheen xumaan
Daaray magacceega,
Duuf iyo waxaan sheegin uu,
Diiday qalinkaygu,
Waxaan daabacayn oon u nacay
Sadarka diiwaanka
Nin damiir leh uun bay dhibtaa
Doqoni waa moog e
**Soomaali** na duruus way u tahay
Lagu dawoobaaye
In yar aan ku sii daro dadoow
Dulucdu waa meel e

Gurcudku ba hadduu kugu dadmuu
Dunida saameeyo

Dab ood hurisid baa kaaga roon
Dood ad badisaaye
Khaladkaa daliil laga dhigtaa
Dawga kuu suga e
Nolosha na ninkii daydayee
Doonayaa hela e
Shacabkii dedaali na carruu
Dahab ka shiilaaye
Daalka na nasniimaa ku xiga
Daa'im abidkiiye
Dirqaa lagaga maalaa wakhtiga
Maalintuu dudo e
Dacaydaa la laacaa si uu
Kuugu soo dego e
Daruur* baan arkaayoo haddeed
Soo dannaaniday e
Dambarkeega **Maandeeq** berraa
Loo dabbaaldegiye
Hayeeshee dixaa kaa xigiyo
Kadaro* duud dheer e
Malaa waan dahaadhaye bal an
Hoos u daadego e!

*Daruur* : *maansadu waxay eregan ku tusmaynsaa shirkii Soomaalida ee Carta.*

*Kadaro* : *wadaròwga magacca kadár*

Niman buu dagaalkani u yahay
Duunyadoo kale e
Oo dahab ka maaloonan rabin
Labo is-daysaaye
Niman baa dalkoodii u gubay
Inay dillaalaan e
Oo dano shisheeyiyo wax ba'as
Loogu daw galay e
Jabhadahan is wada diiddan baa
Nabadda doonayn e
Derajada raggaw waashay baan
Nabadda doonayn e

Duqaytida in baa doorsantoon
Nabadda doonayn e
Dibjirkiyo dul-saarkoo dhan baan
Nabadda doonayn e
Nimankii horow dumiyay baan
Daacad ka ahayn e
Dawladaha Galbeedkaan mar na ba
Daacad ka ahayn e
Deriska na badh baan rabin dadyahow
Inaad is-daysaan e
Nin wali ba dan uu leeyuhuu,
Fiin u degayaaye
Durbaankay tumaayaan dhammaan
Digasho weeyaan e
Shacabyahow digtoonoow hadda ba
Waa duruuf adag e

*Fiin* : *shaxda bubka affarteeda gees midkood.*

Waxaan duulal soo sheegay ee
Diiddan noloshaada
Direysyada madow iyo wixii
Dhaqan *digtaatoor* ah
Uubaha daloolee hadda na
Cawska lagu daahay
Dabar iyo mareeg duuban oo
Damacu soohaayo
Iyo dabasho jaan baa jirtiyo
Sheeko dacawood e
Kacoo diirad qaatoo mar kale
Deyrsha cadawgiinna

Madaxaa* damqaday baad tihiin
Ul iyo diirkeed e
Gobannimo haddaad dooni waa,
Doorka maanta ah e

***Madax*** : *ereygan waxay maansadu u la jeeddaa madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle*

Nin dardaarmay weeyee dadoow
Maqal dabuubtiisa
Dalladdaa* walaalkiin ku shira
Way dugsoontahay e
Dedaalkiisa nabadduu dalbiyo
Duco ku taageera
Dayaxii wa kaa soo baxay e
Yaanu daranyoobin
Dariiqii wa kaa lagu dhacoo
Waa la degayaaye
Darandoorri xaajada ku gala
Darar horaadkiiye
Dulmigii horeetiyo dhacii
**Daa'im** uga laabta
Dareenkii is-quudhsiga watiyo
Ficilladii daaya
Daandaansi waa loo dhintay e
Dadoow walaalooba
Dakanada* illooboo tixgelin
Nabad ku doondoona
Duuduub horuu noo dilay e
Nabarka daaweeya
Danta guud ka doorbida waxay
Kooxi dihanayso
Isu daysta harag iiga durug
Labo ku deeqaynin

Taariikhda doonnani inay,
Niga dumaalloobin
Oo dawlad loo wada dhanyahay
Duunka maqashiiya
Dawaarshoo wixii dhiman ku tola
Dun iyo miiqeeda
Dabadeed dabbaalkiyo ka dhaba
Cadow ku soo duula

***Dallad** : maansadu waxay ereygan ku tusmaynaysaa taandhadii magaalada Carta laga dhisay si loogu qabto shirweynahii dib-u-heshiisiinta Soomaaliyeed.*

***Dagkano** : dhiig la kala qabo; dhagar; aano.*

Sidaasaad qarniga dihin ku gali
Ood wax daadihin e
Ood daansha-daanshooniyood
Daaqi midhihiis e
Wataa doonidii **Nuux** e kora
Daal la soo aragye

Dadweynoow dareenkaan qabiyo
Adi dantaadii dheh
Daliilkii la waayoo la helay
Saaka dabadeed dheh
Waa soo dillaaciyo habeen
Sii dabayshaday dheh
Dabin kuu xidhnaayoo la furay
Darifyadiisii dheh
Doqon kuu ma sheegtee xaqii,
Naga dahsoonaa dheh

DHAMMAAD

## *QOORTEEDA YAA SUDHI ?*

*Waa sheeko gabowday in jiirka iyo bisaddu ay col yihiin. Waxa se la hubaa in hardanka u dhexeeya labadaa xayawaan ka tarjamayo xaqiiqda abuurka oo ku dhisan is-caabinta iyo dheelli-tirka nolosha. Waxa aan doonay 21/11/1999kii, anoo jooga carriga* Mooritaaniya, *in aan faca soo kacaya ugu reebo sheekadaas hab suugaameed. Wuxu waa jiir iyo bisid, laakiin haddana waa aadamaha.*

Dunidaa qardoofkiyo,
Qardabada u dhalatoo
Markuu **Qaadir** uumee
Loo joojay qodimmada
Qiiq baa ka boodoo
**Qaabiil** ba **Haabiil**
Qalad uu sameeyiyo
Dembi ku ma qisaasin e
Dabcigoo qalloocdiyo
Damac qiiro keenaa
Walaalkii ku qaadoo
Qabri buu ku soo riday

Taariikhda qoran iyo
Quruummii ka weynaa
Qac intii la soo maray
Colkii ugu qadhaadhaa
Een qiil na loo helin
Qiso weeye yaabloo
Bisad qawlal weyn baa
Jiirkii quraac iyo
Qado uun ka dhigatoo

Qadhaabkii u diiddoo
Qaati uu ka joogsaday

Qaraxxii dagaalkiyo
Wixii laysku qoonsaday
Qolo sheegtay maan arag
Hayeeshee qiyaastii
Qushaash ay hambaysuu
Soo qaado yidhi oo
Qolkii ay galaysuu
Hoostiisa qoday oo
Qurbush buu ku soo yidhi

Dabadeed qas baa dhacay
Qalalaase iyo boob
Jiirkii *«el»** buu qoray
Hayeeshee la soo qabay
Faruhuu qaniinoo
Qufac buu ku waashoo
***«Qirtay waxan sameeyee***
***Ii qaata»*** buu yidhi
Qosol bay ku jiiddoo
***«Taa ku ma qancaayee***
***Haddaad qaanta bixinayn***
***Inaan qoorta kaa jaro***
***Ilamaa qiyaamaha***
***Ayuun baan qolkaygii***
***Kaga quusan»*** bay tidhi

Jiirkii qamuunyuu
Qalbigii gariiroo
Qamandhaco madow baa
Jaahiisa qarisoo
***«Ballan ii qabtuu»*** yidhi

*« **El buu qoray** » : hadal carruureed la nuxur ah : dadab-u-carar.*

Bisaddii qaniinyiyo
Feedh iyo qanjiidhay
Qabadsiisay jiirkii
Qaylqaylinaayoo
*«Qoob hayga qaadin e*
*Qasrigii dhis»* bay tidhi
Isna uu qiyaamoo
Intuu yara qaboojuu
Isku qariyay siigiyo
Qiiq uu afuufoo
Booraan qayacatiyo
Qodax luu ka hoos galay

Dabadeed qoraal buu
Qolqolkeedii soo dhigay
Qori uu ku daabacay :
*« kibir baad la qooqdaye*
*Waa waxaad qabweyneey*
*Dagaalkaas ku qaaddaa !»*

Kolkaas bay qulquladdii
Qaaraadka gaadhoo
Qof waliba dareemoo
Jiirkii god qodashiyo
Qarin waaye boholuhu

Qarammada midoobaa
Qisaddii ka yaaboo
**Qaahira** fadhiistoo
Qabanqaabshay nabad oo
Qorshahoogii socon waa

Guddigii markuu qaday
Isku qaylsay jiirkii
Qabashada shir weyn iyo

Qodobbada is gaadhsii
Qar kaste ba iskaga imay
Madal qiimo badan iyo
**Qulunquul** ku soo urur
Kol qaboono ay tahay
Qun yar waajibaadkiyo
Loo qaybsay hawlaha

Badh baa qaatay xaabiyo
Qalitaanka xoolaha
Badh baa gaadhka lagu qoray
Badh baa qaadka loo diray
Badh na qaabka meeshiyo
Ku qamaame gogoshii

Waxay *qalamtu* ! Badata ba
Hawshii la wada qabay
Lagu *feede** qadadii
Dabadeed qarkaa kale
Qaaciga la soo dhigay
La taqsiime qaadkii
Xaajada la qaadqaad
Ninkii qaa'idka ahaa
Ayaa qoorta taagoo
Qudbad dheer akhriyay oo
Ku qatimay warkiisii :
***«Toloow ! waan qarracannoo***
***Qabiilkaan ka beermoow***
***Qurbaan baad u noqoteen***
***Bisad xeerku qaban oo***
***Qaanuunka diiddoo***
***Qusunkeennii goysay e***
***Qaamuuska baadhoo***
***Waa inaad qadhmuuntaa***

***Feed :*** *erey af faransiis ah oo macnahiisu yahay ciid. Maansadu waxay halkan u adeegsanaysaa dhammaadka cunnadii casuumadda*

*Qawlaysanaysee*
*Qumayowday waa hore*
*Qalab lagu difaaciyo*
*Qaraar aad ka gaadhaan*
*Qorraxdaas intay dhicin»*

*Qaaq !* baa la wada yidhi
Farxad aan qiyaasnayn
Qaacii sigaarkiyo
Qaxwihii la wada dhigay
Nin ba qawl la soo bood

Mid baa qaatayoo yidhi :
***«Qalcad baan dhisaynnaa***
***Dhammaanteen na qarisoo***
***Qufulnoon furmaynin e***
***Innoo qoosha dhoobada»***

Qaadaadhig dabadii
Qodobkaasi mari waa

Mid kaloo qandoodaa
***«Qorshaan nii hayaa»*** yidhi :
***«Sixir laga qaniiniyo***
***Qardhaas baa ku filan oo***
***Wax ba qaadimaysee***
***Innoo geeya qori-is-maris»***

Mid kalaa qayaxay weedh :
***«Talo waa qax»*** buu yidhi

Mid qamaamayaa yimid
***«Sun u qoosha»*** buu yidhi

*«Ha la qalo»* mid baa yidhi
Mid na qabato soo fidi
Mid na qaanso soo tuur

Mid qamuunyo haysaa
Qardajeex ku soo galay
Qufacyoo wuxuu yidhi :
***«Ha la keeno qaadhaan***
***Dabadeed qaraashida***
***Qalanjada maroodiga***
***Qandaraas u siiyoo***
***Quwaddeeda weyn iyo***
***Intay qoobka saartay***
***Qolfoofkeeda tuuriye»***

Qaadaadhig dabadii
Malahii rag soo qubay
Qawl toosan laga waa
Q*idh* ! bay sheekadii tidhi

Nin qareen ahaayoo
Talin jiray qajeelo ba
Mar na qaadi laga dhigay
Ayaa qalin la boodoo
Ra'yigiisa qeexoo
Wuxuu yidhi : ***«qoqobe xidhan***
***Ku qarsoontay xaajadu***
***Qabyadii ayey tahay***
***Qasadkiyo ujeeddada***
***Qaar baa na weli garan!***
***Waar qaylo badan iyo***
***Qabqab ! loo ma baahnee***
***Waxaan quudarraynnaa***
***Nabad qudha hadday tahay***

*Waxan laga qaxaayaa*
*Qumayadan haday tahay*
*Koor qalalamlayn baa*
*Qool looga dhigayaa*
*Nin waliba qasli'i buu*
*Ku qadhaaban doonaa*
*Markaan qababaxdeediyo*
*Qabqabteeda maqallo na*
*Qalwo hoos galnaa iyo*
*Qodannaa god dheer iyo*
*Quusnaa badweynta ba*
*Qodin maan ku xidhannahay ?*
*Ciddee baa na soo qaban ?»*

Qushuuc baa la wada dhacay
Malahaa la qaayibay
Qosol laysla jiidhyoo
Ilmaa qoysay laabaha
Qarqarkaa sareetiyo
Qanaantaa la wada ruxay

Qaddar uun yar dabadii
Ninkii koorta soo qoray
Markii ay ka qaadeen
Ayuun buu qumbacashada
Qawsaar gabooboo
Qadhqadhaayi soo kacay
Wuxuu yidhi : *«qasaarnay e*
*Qaraarkaynnu gaadhniyo*
*Qalabkii wa kaasiye*
*Qooraansi weyneey*
*Waa quduro yaab lehe*
*Qoorteeda yaa sudhi ? »*

Boqollaal qumbuladood
Oo laga qafloonaa
Iyo qaylo-dhaan iyo
Qabsin baa ku soo degay
Jiirkii qoslaayoo
Qashuush baa ka soo hadhay

Badh baan qoobba qaadin e
Qummudoo engegay oo
Qudhdhoodii ku waayoo
Ku qonbobay halkoodii

Badh baa qulubsanaantii
Koortii la soo qoray
Dusheedii qurruudsaday

Qoladii u roonayd
Qacdii waa dhawaadkay
Qallaafo u dhaqaaqdoy
Ka hulluuqday **Qulunquul**

Qofkii ugu dambeeyiyo
Qabanqaabiyaagii
Wuxuu qaac afuufoo
Buuriga qadhiidho ba
Qorraxdii *wac !* soo tidhi
Ayuu qaatay kabahoo
Qoraal buu halkii dhigay
Qori uu ku daabacay :
***"Wax la quudarreeyo ba***
***Laga quusay nabaddii"***

DHAMMAAD

## *DAHABO*

*Marka aad ka maqantahay dhulka hooyo, badanaa cabsida iyo caloolyowgu, xiisaha iyo dareenku ! Waxa qiimo yeesha wax kaste oo ka yimaadda xaggaa iyo dalkii. Hadda ba, bal ka warran kolkaad weydo wax kula soo xidhiidha, ku soo booqda oo ku soo xasuusta? Sow markaas, ma aha in aad mar u heestid dalkii hooyo mar na u halaahashid? Sidaas darteed ayaan guuxan tiriyay 30/11/999kii anoo jooga dalka* Mooritaaniya.

**Dahabooy** dawadii naftaay !
**Dahabooy** dumarrada dhammaan
Taan dhexdooda ka doortayeey !

**Dahabooy** debed baan jiraa
**Dahabooy** daltabyaan qabaa
Ee dadkeennii halkay mareen ?

Miyay cajal duuban iyo
Jaraa'id la daalacdiyo
Waraaqaha soo dirayn ?

Ma "*boostaa*" diiddan oo
Daadinaysa intayda uun
Oo dagaal bay iga rabtaa ?

Ma diyaarad la saara oo
Dusheeda la soo dhigiyo
Doonni baa na dhulkii ba iman ?

Ma bayaadka la daabiciyo
Khadkii baa dabargo'oo
**Dubay** baa laga soo wadaa ?

Ma qoraalkay dawladdii
Dadkii ha la joojo tidhi
Oo dastuurkaa laga tirtiray ?

Da'daan la barbaaray iyo
Raggaan dugsanaayay mee ?
Oo maxaa daranyadan i baday ?

Intaan la dardaarmi jiray
Ee duruusta an siini jiray
Deftarkaygii miyuu ka lumay ?

Hablihii ma cirkaa ku dumay ?
Raggii ma dhulkaa la degay ?
Oo maxaa deriskii na helay ?

Ma dareenkoogaan ka baxay
Ma inaan debadaha ka helay
Dad ka fiican ayay qabaan ?

**Dahabooy** dhulkan waan ka diday
Oo duruuftiisaan ku nacay
Oo dubkayguu fiiriyaa
Oo illayn ima doonayee
***«Cagtaadu i daalisee***
***Iga duul»*** buu igu yidhaa

Ajaanib dullaysan buu
Dadkiisu na ii arkaa
Oo si bay ii soo dayaan

**Dahabooy** majo daab la' baan
Dawadayda ka raadiyaa
Oon naftayda ku dooxayaa

Sidii qof la dooriyaan
Dariiqqa ka baydhayaa
Oo cidlaan dalanbaabiyaa

**Dahabooy** duurkaan galaa
**Dahabooy** daaqaan cunaa
Oo dugaaggaan weheshadaa

Waan dudaa duddumaw baxaa
Oo duleedka magaaladaan
Duunyo been ah ku soofiyaa

**Dahabooy** daad baa i sida
**Dahabooy** dabar baygu xidhan
Oo dharkaan ku dhex duugganahay

**Dahabooy** cunno daayay oo
**Dahabooy** waxan daanka dhigi
Dacar buu ka darraanayaa

Hurdadaan ku dhex daalayaa
Oo markaan is yar duub idhaa
Degdeg baan uga soo sasaa

Waan dannaani dhaqaaqayaa
Dirqi baan u tallaabsadaa
Oo duqoobay intaanan dhalan

Dabaylahan foodhyayaa
Daruuro ma soo wadaan
Ee anay ii doodayaan

**Dahabooy** cirka noo da'aa
Indhahayga darroorayuu
Oohintiisa ku soo daraa

Markuu dacfigayga iyo
Dacwadayda u fiirsado na
Danab buu soo aa'ayaa

**Dahabooy** in kastoon dux qabin
Waxa aan ku dawoobayaa
Waa inaan dib u soo noqdaa

Waxaan ku dawoobayaa
Dalladdaadoon hoos galiyo
Daafyahaaga inaan barkado

Waxaan ku dawoobayaa
Waa inaan **Dooraale** iyo
Xeebihii u dabbaal tegaa

Waxaan ku dawoobayaa
Waa inaan dekaddii *"Eskaal"*
Ku cawaysimo daanta bari

Waxaan ku dawoobayaa
Inaan **Dikhil** soo dhunkado
Oon **Dumeera** dalxiis u tego

Waxaan ku dawoobayaa
Waa inaan buurtii dednayd

**Dhaay** dusheeda ku soo nastaa
Waxaan ku dawoobayaa
Inaan dooxyada **Randiyo**
**Duuda** maango ka soo cunaa

Waxaan ku dawoobayaa
Dixdii shimbiruhu digriga
Iskooda u duubayeen
Ubaxii loo doonan jiray
Inaan soo daawadoon
Daabulooyin ka soo gurtaa

Waxaan ku dawoobayaa
**Dahabooy** *dirhamkii* an helo
Dakhligaaga inaan ku daro

Waxaan ku dawoobayaa
Inaaan danahaaga guud
Weligay ba difaaco oon
Ninkii soo duula ee
Jawhartaada damaaciya na
Diimis aan ka waraabiyaa

Waxaan ku dawoobayaa
Inaan dugsiyada dhigoon
Aqoonta daryeelo oon
Wixii dib-u-socod ah iyo
Jahliga na la dagaalamaa

Waxaan ku dawoobayaa
Waa dadkaaga shaqaynayoo
An dedaalka ku biirsadaa

Daadaheeya **Jabbuutiyeey**
Daanshadaanshoodee hadda na
**Dahabooy** daaraha dhulkani
Dariiqyadan laysku xidhay
Deyrarkay isku meeriyeen
Tiriigan indhaha derderay
*Doollarkay* isku baabayaan
Fadhdhigay ku dangiigsadaan
Nimcaday ku dekaynayaan
**Dahabooy** dhan kastoon ka dayay
Qalbigayga ma deeqayaan!

**Dahabooy** araggaaga iyo
Daymadaadii waayay oo
Indhahaygu ma doogsadaan

Haddii **Dahabooy Ilaah**
Cimrigayga dib iigu dhigo
Oon ammaantaaduun daldalo
Oon duceeyo dharaar waliba
In kastoon ku dedaali laa
Debnahaygu ma oofiyeen

Waxaan se la diidi karin
Duul ka doodi na uusan jirin
Oon daliil na u baahanayn
Inaad detay uurka oo
An damiirka dhexdiisa iyo
Kugu daabacay dhiigga oon
Xubbigaaga u daacad ahay

Diinta-nuura **Jabbuutiyeey**
Doonidii **Nebi Nuux** dhisaay

Dakhalkaaga **Alloow** adkee !
Oo dadkaaga abaaro iyo
Baahi loo daaduumo iyo
Duullimaadyo **Alloow** ka hay !

Degelkaaga dabayl cas oo
Dumisaa waxa jooga iyo
Duufaanno lagaa dedyoo
Derbigaaga **Alloow** adkee !

**Ilaah** dambarkaaga iyo
Duunyaduu kugu saydhay iyo
Macdanaha dihin ee dahsoon
Daafyahaagu la ciirayaan
**Dahabooy** deeqsii bulshada !

**Dahabooy** dawadii naftaay !
Cadawgaaga **Alloow** dullee !
Dawladdaada **Alloow** quwee !
Digrigaaga **Alloow** kor qaad !

Diiriyoow calankaaga **Deeq** !
Dunidoo dhan ha daawatee
Dayaxaasi **Alloow** kor saar !

**Rabboow** dalabkiyo baryada
An xaggaaga u soo dirsaday,
Ducadayda **Alloow** ajiib !!!

DHAMMAAD

# *QARNIGII LA SOO MARAY*

***Waa qiimaynta qarnigii aan soo marnay oo loo tiriyo wanaag badan, sida horumarka is-gaadhsiinta, caafimaadka iyo la-dagaallanka cudurrada. Waxa kale oo loo aaneeyaa ceebo farabadan, sida ku-tumashada dhaqannada, diimaha iyo akhlaaqda, gumaadka aadamaha iyo is-addoonsiga. Maansadan, oo la magac baxday*** *"Qarnigii La Soo Maray",* ***waxaan ku qoray dalka*** *Mooritaaniya* ***taariikhdu markay ahayd 10/12/1999kii.***

Bismillaahi qalin waa ka kow
        Qabasho hawleed e
Qasadkaan la soo kacay haddaan
        Qoro xuruuftiisa
Qarnigii la soo maray kolkay
        Qolo ba meel aadday
Hadduu qaar horuumaray badh kali
        Qoobka rogi waayay
Haddii uu **Qarbiga** soo-kiccii
        Qooqqu sare joojay
Hadduu qoomiyaadkii dib dhacay
        Qawlallada jiiday
Shacabkuu qafaalsho ba hadduu
        Qaybshay degelkiisa
Qarqarsiga hadduu xadhig qallalan
        Qoorta kaga duubay
Qaniinyada hadduu meel kaste ba
        Qawda kaga saaray
Qado iyo haddii uu ka dhigay
        Subax qureeciisa
Qabuuraha hadduu buuxiyoo
        Qalasho dayn waayay

Qasnad waxay lahaayeen hadduu
Qaatay midheheeda
Hadduu qiimihii aadamiga
Qoomay sharaftiisa
Haddii *"qaati"* laga joogsadoo
Qaylo lagu waashay
Qaamuuska ceebaha hadduu
Qaatay gebigii ba
Ma ka qoomameeyaa toloow
Qaladdaduu geystay ?
Haddeed qaawinnee muu **Qarbigu**
Qirani ceebtiisa ?
Cudurdaar miyuu soo qaddimi
Waa qaraar adag e ?
Qaantii ma soo bixin haddaan,
lagu qisaasayn e ?

Qarkan kale haddaan fiiriyoon
Qoro xuruuftayda
Qarnigii la soo maray dadkay
Qubatay laabtoodu
Dadkii dhiiggu qayraamay ee
Xoogga lagu qaatay
Dadkii qori afkii iyo rasaas
Lagu qafaalaayay
Haddii uu qamaamuu dhammaan
Quudhsashada diiday
Qufulkii hadduu jebiyay iyo
Qoolkii lagu meershay
Hadduu qaatilkii weeraruu
Qooddi uga dhaartay
Qaskii laga ma daynin e si baa
Loogu qariyaaye

Xad qoqoban qumbulad loo guntuu
Qiil u laayahay e
Dalkiisuu qotaa oo hadda na
Wuu qatoonyahay e
Qaxootuu dhulkiisii ku yahay
Uu qulqulayaaye,
Qasad toosan baa looga ba'ay
Oow qafloonyahay e
Qaraarrada na waa loo dhigaa
Sida **Quraankiiye**
Gobannimo hadduu qaatay uu
Qaran ku geeraaray
Tolow way qabyowday e miyuu
Qirani ceebtiisa ?
Qalin-daarka muu sixi haddaan
Lagu qasboonayn e ?
Ma ka maarmi qayrkii toloow
Quduro weeyaan e ?
Qorshayaal kaleetiyo ma degi
Qodobbo loo aayo ?
Oo qaali weeyee xornimo
Dhaba ma qoondayni ?

Qaaf kale na waa kan e haddaan
Qoro xuruuftiisa
Qarnigii la soo maray hadddii
Qalab la soo saaray
Haddii qaansadii laga tegoo
Qori la liishaamay
Saaruukha qaylyee cirkiyo
Qaaradaha jiidha
Diyaaraad qanaantaa dambiyo
Madaxa qoolaaban

Iyo qaar qummaati u kacoo
Qarandi aad moodo
Iyo qiiq haddii laysku ganay
Qaac naflaha duuga
Quwad laysku sheegtaa hadday
Qaladday miisaanka
Qab weyn iyo hadduu kibir qarribay
Nolosha qaabkeeda
Qorraxdii timaadda ba hadday
Qaraxday baaruuddu
Qummanaan toloow may u noqon
Dunidu waa qoyse ?
Miyay qiimageli nabaddu waa
Qodobka koobaad e ?
Qardabada miyaa layska dayn
Noloshu waa quude ?

Qalinyahow haddii aan mar kale
Qoro xuruuftayda
Qarnigii la soo maray haddii
Qalab la soo saaray
Haddii qamarka loo kala badshoo
Sahayda loo qaatay
Qorraxdiyo haddii lagu karsaday
Dheriga qiiqqeeda
Qabowgiyo kulaylkii haddii
Jeebka lagu qaadtay
Quruuruxu haddii uu hadliyo
Qamadidaan beernay
Xanuunnada qudhlaha* hoobiyee
Qaati laga joogay
Qaruuraddo haddii lagu guroo
Qarax na loo diiday
Qibladii furnayd iyo dhulkii
**Qaadir** kala baacshay

*Qudhle :* nafley

Qolqol laga wareegiyo haddii
Qayro laga yeelay
Qof fogaaday oo meel shishiyo
Duni qarsoon joogay
Qarka kale haddii laga arkoo
Qawlka lala gaadhay
Safarkii qadhaadhaa haddii
Qaayib laga yeelay
Qarni lagu ma soo koobi karo
Qiime nololeed e
Qolo lagu ma aamino dhammaan
Siraha qaarkood e
In uun baa qarsoonoo kolley
Quuddarrow maqan e
Qorshaa laga sugaayaa markuu
Qoon yimaado ba e
Qalinkiyo garaadkii toloow
Horay ma loo qaadi ?
Mise guul yar baa lagu qancoo
Geeddi laga quustay ?

Qaaf kale haddaan soo qabtoon
Qoro xuruuftayda
Ilbaxnimadu waa labo qar oo
Qodimmo dhaadheer e
Ninka dhinac ka qaataa na wuu
Kala qalloocshaaye
Qarnigii la soo maray hadduu
Qeexi kari waayay
Qalbigii haddii lagu tuntoo
Ciidda lagu qooshay
Qushuucdii haddii laga tegiyo
Qiimihii edebta
Damac aan qiyaasnayn hadduu
Qoonsi badan keenay

Qawlaysi maahee haddii
Qiiro laga dhaartay
Garbo dheer haddii laga qubtoo
Madaxa loo quusay
Qosolkii haddii laga hadhoo,
qalaq dadkii laayay
Fan qarriban qabiil iyo haddii
Qaadka lagu waa shay
Rag is-qabi hadduu soo bixiyo
Qoysas laga yaabay
Haddii qaawanaantii gabdhaha
"*Kuubab*"* lagu qaatay
Wax kastoo qurxoonaa haddii
Qawyo laga xooray
Qanjidh iyo haddii geed qalaad
Qaybta laga raadshay
Qabsin-ood haddii uu ku dhacay
Socodkii qaynuunka
Qadaadkaa haddii loo dhacoo
Laga qamuunyooday
Ibaxnimadu waa labo qar oo
Qodimmo dhaadheer e
Qabqablaynta maa lagu darsani,
Samada qawlkeeda ?
Qiyamkiyo akhlaaqdii toloow,
Dunidu may qaadan ?
Qarda-jeexxa maa layska dayn
Lagu qasaartowye ?
Qummanaan ma loo socon haddeed,
Qulubtay beeshiiye ?
Mise waa qiyaamiyo dadyahow
Xaajo laga quustay ?

***Kuub** : galaaska abaalgudka loo siiyo cid kaste oo tartan ku guuleysadta; koob*

DHAMMAAD

## *MAGAC AYNU KU FAANNO*

*Dhammaadkii qarnigii tagey, sannadkii 2000 bishi-isii 1aad, ayaan booqday dalka* Maali *oo aan kula kulmay dhallinyaro Reer Jabuuti ah oo dhakhtarnimada ka bara-ta jaamacad ku taal caasimadda dalkaas ee* Bamaako*. Wax-aan aad ugu farxay sida raggaas looga jecelyahay dalka ay joogaan iyo magaca fiican ee ay ku leeyihiin jaamacadda iyo meesha ay degganyihiin.*

Mahad aan la qiyaasin
Mawlaheenna ayaa leh

Mudnaan aan lala soormin
**Nebigii Mustafaa** leh

Macne aanan dhammaanin
Murti aan laga daalin
**Quraankeenna** macaanee
Maaxanaaya ayaa leh

Mu'min baa xassilooni
Iyo muunad qurxoon leh

Martisoorid **Jabuuti**
**Maan-ka-deeqa** ayaa leh
Midnimaa na awood leh

Muran aanan dhammaanin
Dad magaalo ayaa leh

Mooradoo la dhammeeyo
Macaluul na la sheegto

Ogaan laysku masuuxsho
Miyigeenna ayaa leh

Musuqmaasuqa tuugo
Maammul aan cidi dooran
Oo mar-dhoof ah ayaa leh

Itaal laysku muquunsho
Naxariis laga maydhay
Dawladdaasi **Maraykan**
Ee maqiiqan ayaa leh

Maskax aan la ba maalin
Muruq aan la adeegsan
Maalmo aan la xisaabin
Maal shisheeyuhu boobo
Muslimiinta adduunka
Maanta joogta ayaa leh

Masiibooyin qaboobin
Dab munaafaq shidaa leh

Mashaqooyinka guurka
Qoys masayr galay baa leh

Magac aynu ku faanno
Dalka ***Maali*** dhexdiisa
Raggii an ku maraa leh

Niman weeye mashquulsan
Madaxooga dhisaaya
Habeenkii mirta toosa
Dharaartii maktabaadka
Masalooyin ka baadha
Kol na geed la maroojay

Ama muuq la gadhoodhshay
Kol ba qaab u malaasa
Midab gaar ah u yeela
Ka maleega kiniinno
Oon muwaafaqadoodiyo
Malahooga ka yaabay

Niman weeye midkood na
Kaftan uu ka mansuugin
Oon ka maarmin xafiiltan
Oo majaajiladooda
Iyo maadda dhexdooda
Masrax aanad u baahan

Niman weeye maqsuud loo
Muran been ah aqoon oo
Anshaxoogu mullaaxyoo
Gebigood na mataanoo
Mas'uuliinta *iskuulkiyo*
Dadka meesha ku nooli
Dhammaantood martabeeyoo
Ka mabsuuday warkooda

Anna waan mustareexay
Mar hadday dhallinteennu
Midigteeda ku hayso
Wixii aan ka malaystay
Een horow muhanaayay

DHAMMAAD

## *GUURE HABEENAAD*

***Cigaal Shiidaad, oo ay Soomaalidu u taqaanno in uu yahay shakhsi maad iyo murti badnaa, sheekooyinkii laga soo weriyay midkood ayay maansadani ku arooraysaa. Waxay soo baxday 07/01/2000.***

Sheekiyo wixii
Dadoow shaahidi
Mid ba waa shinkii

Sheekaa la yidhi :
**Shidaad Cigaal**
*"Sheef"* buu ahaa
Afka shaarub dheer
Ku shagaartay oo
Shafka taagi jiray

Galab uu shir tegay
Ayuun baa shantii
***«Marti sharaf leh baa***
***Meel aan shishayn***
***Reerkii shalleel***
***Shamiraysa oo***
***Shiraac loo goglaa»***
Sheekhow! la yidhi

Shaadh buu gashaday
Degdeggii shaqada
**Shamis** ba iska jiidh
Huri shooladdii
Shaahhii dulsaar
Xeradii shuq odhay
Ka shidhee wan weyn
Shilis ow lahaa

Shiilyoo casee
Shuuro na la kari

Markay shey kaste ba
**Shamis** waa diyaar
Shaqlay oo xidhxidhay
**Shidaad** ku tidhi
Ayuu shaal huwaday
Oo sida shabaab
Shixnaddii cuntada
La shiraaco yidhi

*Show !* waa habeen !
Oo shaadir iyo
Wax shaqlaa arlada
Shalay lagu gembiyay
Wuxuu shuuriyuu
Shanqadhii baxda ba
Shakaal-joogsado ba
Sheeddii ka arag
Qori waa la shiday

Shaki oo istaag
Shafka saar carrada
Wadnahaa shiddada
Shaabuug la dhacay

Sharad buu is la galay :
***«Kolley waa shabeel***
***Maya, waa shar kale***
***Shaashloow libaax***
***Mayee, waa shirqool !***
***Ama waa shuftiyo***
***Shaydaan madow »***

Isla shawr hadda na
Shaandhee malaha
Shanshaduu cuskaday
Shiddaar buu is yidhi
«*Oo ha u shanqadhin*
***Shibtaaduun ahaw !***»

**Shidaad** halkii
Isagoo ku shilan
Sharaftii na gabay
Subaxii shinsaday
Shoocaac iftiin
Is na sheed ka arag
Qori waa la shiday

Shanta saar afkoo
Shalleeyoo cadhoo
Shaydhshaydh carrada
Dabadeed shax buu
Gufidii* dul shudhay
Shamac uu ku dhigay :
***«Qoriyahow shaqlani***
***Sheygaad tihiyo***
***Shakigii i galay***
***Shardi weeye qudha***
***Guurahan i shilay***
***Ee shaahidka ah***
***Dabadeeto shalay***
***Haddii aan shirrabo***
***Sharcigaan ka baxay !»***

***Guffi :** geedka marka la gubo ama la gooyo, intiisa dhulka ku hadhdha*

DHAMMAAD

# *GACALLE*

***Waa sheeko aan wax badan ka la noolaa oo ku saabsan wiil yar oo soomaali ah oo ka mid ahaa kuwa badan ee ay geeridu ku heshay iyaga oo ka baydadaya dadkoogii iyo dalkoogii hooyo. Maansadani waxa ay ku dhalatay -08/01/2000- beer ku taalla magaalada*** *Selibaabi* ***ee dalka*** *Mooritaaniya*.

Go'iwaa **Cabdoow !**
Safarkaan galnee
Gebagebo ahaa
Guusha u ekaa
Maxaa geeridiyo
Ku dhammeeyay gabay ?

Gabay gabay **Cabdoow !**
Geeraarka tiri
Oo gaydh darteed
Ilmo gobo'da hay
Dhar guduudan xidho
Hengeloo gadhkiyo
Gorodda iska xiir

Godkan waxa ku jira
Gaban baa la yidhi
Geeskii ka yimid
Oo lagu gablamay

Talo way gudhaye
Warka aan guntoon
Diiwaan geshee

Bal gunaanad oo
**Guullaha** u bari

Gacalloow wadkiyo
Geeridu ba waa
Xaq gaboobay oo
Loo wada gudboon
Hayeeshee geyiga
**Rabbi** kuu gartiyo
Gurigaan ka naxay

*Caku !* waa gelgelin
Waa goob cidla' ah
Ooy guunyo jirin
Oo gaajo iyo
Faqri loogu go'ay

Gacalloow kolley
Gabadh suuban iyo
Nin garaad leh oo
Gob ah baa ku dhalay

Gacalloow kolley
Goortaad arlada
Guudkeega timid
Xaflad gaar ah baa
Gole weyn dadkii
Gool loogu qalay

Gacalloow kolley
**Gini** hooyadaa
Gobkii aabbahaa
Guudkiyo degtiyo

Goshay kugu hayeen
Gacmahay kol kale
Kugu goobayeen
Gujo iyo xanuun
Iyo geedsaray
Gebi kaa cesheen
Nin geddaa ku koray
Oo gaaruftoo
La gardaadshay baad
Gar **Allee** ahayd

Gacalloow kolley
Gellin hore *Iskuul*
Lagu geyni jiray
Ayaa kuu go'naa
Galabtii na orod
Golay iyo ciyaar
Gocostaad tiqiin

Gacalloow kolley
Gugaagii tobnaad
Ayuu gaacintii
Qalad waa la galay
Oo gaaxan jiray
Furka goostay oo
Gawdii ayaa
Gilgishoo dalkii
Wada gaadhay oo
Gurcud baa dharaar
Loo guuray oo
Warmaa laysla galay
Gellin tiirsanaa

Gacalloow kolley
Goor aad baxdood
Geed fuushanayd
Ayuu qori la ganay
Gantaal soo wahsaday
Gurigii dunshoo
Gobkii aabbahaa
Ku galaaftay oo
Hooyo na *"garaaf"**
Lagu gaadhay oo
Dhakhtar gaalo layd
Lagu geeyay ooy
Gu' dhex jiiftay oo
Fidhidhkii galgalay
Laga soo guroo
**Guulloow Ilaah**
Ka gargaaray oo
Adna gaadh ahayd
Garab jooga oo
Ad gannooday oy
Talo kugu gudhnayd

Gacalloow kolley
Geyigii markuu
Noqday goob dagaal
Garaadkii markuu
Gabay waajibkiis
Gaas iyo kabriid
Markii laysku ganay
Gaajadu markay
Wax gumaaday ee
Maydkii godlamay
Markii gaal kibroo

***Garaaf*** **:** *(erey af faransiis ah) halis*

Guusaayi yimid
Markii gebi la diday
Intii guurtay ee
Ilaa **Gaarisiyo**
"*En Ef Dhii*"* gashaad
Gacalloow ahayd

***«En Ef Dhii»*** : *NFD; Gobolka Waqòòyi Bari ee Kiiniya*

Illeen waa garoob
Geeridu heshoo
Aqalkeed gubtay e
Guunyo ay dhaqdiyo
Geel kuu ma wadin
Waxay kuu gaddiyo
Adigoon gesiin
Gacalloow dhadhamin
Dhan na gabadaniyo
Dhaxan goohaysaa
Ku guhaadisoo
Go'na aanad qabin
Ayuu baadigoob
Idin geeyay meel
La gedaamanyiyo
Gego oodan oo
G*iraam** lagu baxshoo
Lagu guusanyahay

***Giraam*** : *(gm) maansadu waxay ereygan ku tusmaynaysaa raashinka lagu bixiyo xerooyinka qaxootiga*

Gacalloow kolley
Gini hooyadaa
In kastooy geddaa
Gabadh ay ahayd
Guur iyo jacayl
Geed bay sudhoo
Aday kuu go'doo
Gidaar bay dharaar

Gebigeed laxoox
Ku gadaysay oo
Adna geerash baad
Kol ba gaadhi jabay
Ku gannooday ood
Ku guraysay biro

Gellin baad sidaa
U gurguurateen
Noloshii na guul
Girgirka u dhigteen

Gacalloow kolley
Gundhiggii ayaa
Is gabaabsiyoo
*Giraamkii* ayaa
Godlan waayay oo
Gadaal baad mar kale
Gocashada wax hore
Gar u qaadday oo
Ilmo gaaxataa
Gobo' kaa tidhoo
Gu'iwaaye maad
**Yurub** gaadhid baad
Ku go'aamisoo
Dhallin geediyoo
Galiilyada waqtiga
Gorof ku la dhantoo
Dhibtu soo gubtaad
Galab raacday oo
Socod baad guntiga
Isku giijisoo
Gurbal baa la yidhi

**Galbeedka Afrikaa**
*"Fiisaha"* gaddee
Inna geeyadii
**Gaanaad*** mar timid
Mar na **Gaambiyaad***
Ma gashaa is tidhi
Giddi **Koodifaar***
Iyo gobollo kale
Waxaad goobaysiyo
Gacan kuu ma fidin
Guuraad mar kale
Gaadiid ku timid
**Dal*** go'doon ahoo
Gaaroodiyoo
*"Tareen"* guuxayaad
Kaga gudubtay oo
Waxad soo guddo ba
Geyigii **Shinqiid***
Ayaad goor hurdada
Dadku gama'sanyahay
Gaadhiga ku timid
Adoo juuqda gabay !!

Nin Garaad ahoo
**Selibaabi*** gala
Ayaa kuu gurmaday
***«Dhakhtar geeya»*** buu
Geeshkii ku yidhi
Ma galgalan wax badan
Gellin maanad dhibin
Malag gaar ahoo
Nafta uun guraa
Galab kaa la tegay !
Iyagu na gobtii

***Gaana, Gaambiya, Koodifaar*** *: dalal ku yaal Galbeedka Afrika*

***Dal*** *: dalka halkan ku xusani waa waddanka Maali*

***Shinqiid*** *: Waa magaccii hore ee dalka Mooritaaniya*

***Selibaabi*** *: waa magaalo ku taal xuduudda ay wadaagaan dalalka Mooritaaniya iyo Maali*

Raggii kuu gurmaday
God bay kuu qodeen
Gaaraadamoo
Gacalloow dab iyo
Gogol aan lahayn

Kolley geeri baa
Gebi* loo dhashee
Waxa aan se garan
Ma gunaad horoo
Is gamaariyaa
Gacalloow ku dilay ?

*Gebi* **:** *dhammaan; idaylo*

Ma giddaafad iyo
Gujuf baad dharaar
Soo garab martoo
Jin baa kuu gabbaday ?

Ma wax aanad geyin
Ayaa gaajadii
Ganacaaga tegay ?

G*irigiri** miyaa
Iyo baab gurracan
Iyo geedo jaan ?

*Girigiri* **:** *erey qalaad oo la nuxur ah falka ama baabka*

Ma rafiiq gunaa
Adoo gama'sanaa
Ku gabraartay oo
Qori gaaban iyo
Dhagax kugu gujoo
Ku la gaaday oo
Gu'ii kaa furtoo

Gurcud kaa baxsaday ?

Gacantood go'day e !
Ma sun gooray bay
Galaas kuu shubeen ?

Dhan kaste ba ka gee
Ajashaa go'nayd
Sababtii se gibil
Gebi* bayga xiga
Adna gacalliyoow
Garatee codkaa
Guudkiyo ifkani
Ma soo gaadhi karo
Hayeeshee gidaar
Xaqa lagu gudbaa
Gar **Allee** ma jiro
Gadaal baa la garan
Gocorkii lahaa
Hadday godob ahayd

*Gebi : jar. Waxa maansadu ereygan u adeegsanaysaa hubaalsha ah in dadka adduunka iyo kuwa aakhiro ay kala xidhanyihiin*

Gablantaye ayaa
Gabadhii u tega !
Gabankii ka baxay
Inuu gaadhin **Yurub**
Uu luxudka galay
**Gini** yaw warrama!

Gurigaa ba'yeey !
Geeridu xumaa !
Geyigii fogaa !
Gacantay madhnaa !
Gamuun iyo rasaas
Iyo gumuc sidii
Ayaa ii ganaay !

**Alloow** yaa gargaar
*"Tigidh"* ii gadaay !
*Go'ayeey !* Hadda na
Ma dadkaan ka garan ?

Go'ayeey mar kale
Ma gunaanad iyo
Nafteedooy gubtiyo
Golxad haadhayooy
Isku gawracdiyo
Kafankaan u geyn ?
Sheekadan gurracan
Iyo guuldarradan
Afku muu godlani ?

Gacalloow kolley
Dembi maanad galin
Hawl maanad gabin
Geel maanad dhicin
Hantigoosad iyo
Gacandhaaf ma falin
Xashiish geedahii
Ka ma ganacsanayn

Xukun maad gembiyin
Ma gummaadin beel
Gabadh doonanayd
La ma goosanayn
Guluf weerariyo
Geesh maanad wadan

Gucumaale aar
Oo reer gilgilay
Maad raad gurayn

Geeraar ma tirin
Gocor uu ka naxay
Gafuur taagi jiray

Kolla gebi-kayeedh
Googgaa ma odhan
Gobolkaad ka timid
Gacalloow ma nicin

Waxad galabsatoo
Geeridan ku baday
Godkan iyo cidladu
Gar **Allee** ma jirin

Anaa kuu gartay e
Waxa geystay niman
Gawsaha listoo
Jidhku gaamuroo
Ganacii ka baxay
Gaagaabtay oo
Gadhmaleys ahoo
Dul galaalan oo
Gurcudkiyo ku nool
Gaajada dadkoo
Geyn-geyn* leh oo
Garaad laga dhaqoo
Gurran oo dhammaan
Gaashaamo xidhan

Waxa gaystay niman
Gobolkaad ka timid
Googoostay oo
Mid ba gees xidhoo
Ku gabraarta oo

***Geyn-geyn*** *: baro-baro uu dufanku jidhka ama marada qofka ku reebo; gaashiyo*

Gacal iyo xigaal
Dadka goor waliba
Kun u gawracdoo
Haddaan gorofyo dhiig
Galabtii la siin
Gaggaboo bakhtiya

Waxa gaystay niman
Garta maalin oo
Wax garwaaqsan oo
Gawaan-raac ah oo
Shaydaan gamoor
Ku gardaadiyoo
Gabayguu tirsho ba
Goroddaw luloo
Geestii waliba
Daba gaardiyoo
Ganaaxiisa jecel

Waxa gaystay niman
Damiirkii go' weyn
Iyo gibil madow
Gebi lagu marqoo
Laga giigay oo
Qalbigii gudhoo
Dhiiggii gobnimo
Gobo' laga helayn

Waxa gaystay niman
Sharaf aanay geyin
Gabadh aan jeclayn
Gelbiskeed raboo
Nin ba goonidii
Gabbaatiga u sida

Waxa gaystay niman
Hadduu geesi kaco
Guubaabo iyo
Nabad soo gocdaa
Gaagixiya oo
Gujiyoo ka naxa

Waxa gaystay niman
Halkii lagu gablamo
Gaaf iyo aroos
Isku giijiyoo
Geeridu la tahay
Guul ay dhasheen

Waxa gaystay niman
Galoof-ololka iyo
Geesaaska iyo
Guddi been ah iyo
Ged xun uun la baray

Waxa gaystay niman
Gawriira oo
Ku gannooda uun
Gomaddooda oo
Umadaha gudbiyo
Gees kale an dayin

Waxa gaystay waa
Niman goof ahoo
Iimaanka geed
Laga guud dhigoo
**Ilaahay** ka go'ay

Waxa gaystay niman
Garbaduuban oo
Gadh-wadeen ahoo
Naftoodii ka gaday
Gaal noo shiroo
Golayaal shishiyo
Gulufyo an la arag
Gadaashooda ay
Ka *giidaynayaan**

***Giidaynayaan** : (erey af faransiis ah) hoggaaminayaan; hagayaan*

Waxa gaystay niman
Waxa ay galaan
Ama ay gudaan
Weli aan la garan

Waxa gaystay niman
Godobtay faleen
Guurtida ka talin
Dembigay galeen
Sida looga goyn
Iyo gebogebada
Xabsiyada la gayn
Weli aan la garan

Gacalloow walaal
Gefka waxa lahaa
Shacab gaabiyoo
Gogol laga dhigtoo
Garanuugta iyo
Guunyada badhkeed
Garaad dhaanta oo
Gaaskii xayiray
Ku gadoodin oo

Billad-geesi uun
Garbahaw sudhoo
Kol ba gool u qala

Gefka waxa lahaa
Oo gaystay shacab
Gacalkiisa aan
Gocorrada ka garan
Oo gabayihiyo
Oggol gawraccoo
Gasaarkiisa jecel

Waxa gaystay shacab
Gumeystaha u qaba
Gaalkii cad oo
Hadduu soo guntado
Gundhatiyo shamiis
Midabka na geddiyo
**Giirre** na la baxo
Gacanqaada oo
***«Garaad noo dhashoow!***
***Guddoon dacayda oo***
***Gundhi uun»*** yidhaa

Gacalloow walaal
Gef kastoo la falay
Ka gaddoontay oo
Soo gebageboow
Adi geedigaa
Gurcudkii se weli
**Geeska Afrikaad**
Ka ma guurin oo
Gibilkii ku dedan

**Soomaali** gebi

Xaas wada gam'oo
Laga gaydhanayn
Gacalloow ma jiro

Giddi qaaradaha
Gobol aan tegnoo
Guulguul la'aan
Gacmo iyo kal furan
Soo gala yidhaa
Gacalloow ma jiro

Gar **Allee** mar buu
Godka aakhiraad
Guudkiyo ifkani
Guul uu u yahay

Gacalloow mar kale
Kolley guurihii
Waxad sii guddo ba
Gudub baad lahayd

Meel lagu gam'oo
Shaqo goohaysaad
Naftan golongoshee
Galiilyadu ku tiil
Gaadhsii lahayd

Gacalloow kolley
**Gini** hooyadaa
Xajka goor waliba
Gee baad lahayd

Gacalloow kolley
Guri yeelo oo
Guursaad lahayd

Marka uu gudgude
Gelbinaaya nabad
Geyigii ka da'o
La guntado heshiis
Oo gaaridii*
Loo xulo nin gob ah
U gudboon bulshada
Soo guur ayaad
Gacalloow lahayd

*Gaari* : *dhabeel, fariid. Halkan maansadu waxa ay ku tilmaamaysaa dalka Soomaaliya*

Hayeeshee guddoon
Gelbis baad ahayd
Godka aakhiruu
**Rabbi** kuu gartoo
Guhaaddiyo dhibtiyo
Is-gumaadka iyo
Gawraca tolkaa
Iyo gaajaduu
Giddi kuu nacoo
Guryihii **Jannada**
Gabdhihii ku jiray
Iyo geedihii
Ku gedaamanaa
Iyo guud ahaan
Galladdii dhex tiil
Ayuu kuu gartoo
**Ilaah** kuu gingimay

Anna **Guullahaan**
Galabtii waliba
Gacmo hoos dhigtaa
**Gini** hooyadaa

Gadaashaa inuu
U geshaa halkii
Gargaarkiisa iyo
Wiil geesiyoo
Abaalkii u guda!

Gacalloow walaal
Gebogebo ahaan
Gama' oo jannada
Salaan iiga gee
Gardarradu dadkay
Godka aakhiraad
U taxaabtay gebi

DHAMMAAD

## *HIBO*

*Tixdani waa hawraar jacayl oo aan u tiriyay, bishii labaad ee sannadka 2000, Hibo oo aan ka dhex raadinaayay gabdhaheenna Geeska Afrika!*

**Hibooy** waxan ku hammiyaa
Waxaan ku hawaawiyaa
Jacayl hoobaan baxshoo
Hadhkiisa an joogsannee
Sidayda ma heellantahay

**Hibooy** waxan ku hammiyaa
Waxaan ku haloosiyaa
Inaad haye uun tidhaa
Halkaan ku la doonayee
Sidayda ma heellantahay

**Hibooy** haasaawe dumar
Dartaa baan uga hadhoo
Hankaygu siduu jeclaa
Adaan nafta kuu huree
Sidayda ma heellantahay ?

Halbowlaha dhiiga wadi
Jidhkaaga miyuu habaa ?
Dhaqaaqa ma heetidaa ?
Kol uun iyadoo na hubin
Naftaadu ma hawlgashaa ?

**Hibooy** kugu hiiqay oo
Cirkaan heehaabayaa
Si aan kuu soo heloo

Hangool baan tiirsadoo
Hamuun baan kuu qabaa

**Hibooy** waxan ku hammiyaa
Waxaan ku haloosiyaa
Habkii loo soo dhaqnaa
Inaan isku hoysannee
Kac oo hinjiyoo ila qabo

**Hibooy** waxan ku hammiyaa
Aroos hanaqaada oo
Barbaartu ka heesto oo
Hagaagoo haybad lee
Kac oo hinjiyoo ila qabo

**Hibooy** waxaan ku hammiyaa
Halyeeyyo inaan dhalniyo
Inaan himilooyinkiyo
U hiilinno caashaqee
Kac oo hinjiyoo ila qabo

**Hibooy** waxan ku hammiyaa
Inaan nolol hoodo badan
Hantaaq iyo hoog lahayn
Halkaasi ka sii wadnee
Kac oo hinjiyoo ila qabo

Hannaan quruxeey **Hibooy**
Hurdaad igu soo martoo
Waxaan kaa haybiyaa
Hablaha **Geeska Afrikee**
Kol uun "*how !*" may tidhaa ?

DHAMMAAD

## *QOSOL QOONSI LEH*

*Waa sheeko-xariir jirta oo dhaqankeenna ka mid ah, badanaa na loo adeegsado marag ahaan. Waxaan u dhigay qaab suugaameed taariikhdu markay ahayd 18/02/2000, si ay ugu fududaato filka soo kacaya, markhaati na ugu noqoto qofkii u baahda.*

Adhi baa aroor
Eygii ka diday
Xalay eegayoo
Isna uu arkoo
Ka-abaal-dar iyo
Eed laga galiyo
Ihaanuu tirsaday

Ma adkaysanin e
Ashkatuu* qortoo
Erguu soo dirsaday

Guddi odayyo baa
**Ayshaca** ku galay
Arrinkoodiyoo
Axad baa la shiray

***«Adigaa guddida***
***Soo urursadoo***
***Arji soo qortay e***
***Eygoow! waxay***
***Ashkatadu ahayd***
***Akhri»*** baa la yidhi

**Ashkato :** ashtako

Aqbalyoo arlada
Ushiisii ku jeex
Wuxuu yidhi : *«Ilaah*
*Ballan-oofin iyo*
*Wuxuu igu ogyahay*
*Inaan aamin ahay*
*Abidkay na adhi*
*Waan eegi jiray*
*Ajashaan xataa*
*Ka ilaalin jiray*
*Oon iyo harraad*
*Ma aroori jirin .*
*Ma ugaadhsan jirin*
*Si an loogu iman*
*Anigoo wax kale*
*Eryanaaya meel*
*Weligay indhaha*
*Habeen na isma galin*
*Ma na aamusayn*
*Ooddaa muskiyo*
*Irriddaa la xidhay*
*Ku ma aaminayn*

*Anu waxan lahaa*
*Axsaan baad fashee*
*Wuxuu iiga diday*
*Uf! na iigu yidhi*
*Markuu aayar kacay*
*Ummadyahay su'aal*
*Ma ul baan la dhacay ?*
*Ma eebaan sitaa ?*
*Mise erey xun oo*
*Adyadaan ku idhi ?*

*Mise* aydhis *iyo*
*Ifilaan hadda ba*
*dad Alloow qabaa ?»*

Adhigii is-eeg
Orgi weyn u yeedh
Oo aabbe iyo
Afhayeen ka dhigay
Arrin weeye horay
La iskaga arkee
Isa soo maqiiq
Onkodyoo salaan
Ku asqee dadkii
Gartiisii abbaar
Wuxuu yidhi : *«abaal*
*Anigoon inkirin*
*Nin kan ooyayaa*
*Waxan uga ordaa*
*Duqqii aabbahay*
*Aarkii makalay*
*Adeerkay na cunay*
*Yeygii ayaan*
*Aradka igu helay*
*Dhurwaagaan arkeen*
*Adduunyada u nacay*
*Afkoodii ayuu*
*Ummadyahay sitaa*
*Anigu na afkaa*
*Inaan aaminaa*
*Waa eed kalee*
*Ma ba eegi karo»*

Wixii erey la yidhi
Ayay odayyadii

Ku iftiimiyeen
Garaad lagu ogaa

Lagu ool halkii
Wax la eelqodo ba
Affartii ayaa
Eygii la yidhi :
***« Arrinkii dhammaa***
***Afkaagani dhurwaa***
***Orod oo u gee***
***Ama adhiga daa***
***Oo eeg wax kale»***

DHAMMAAD

## *ALLOOW !*

*Aad marka aad ugu fiirsato adduunyada iyo makhluuqaadka, ama naftaada ba, waxa aad arki Weynida iyo ammaanta Ilaah mutaystay. Subxaan!!! Waxa aan qoray maansadan 28/03/2000.*

**Alloow** aayaadka koonka
Markaan eegeen ilaalshay
Awooddaadaan ka yaabee
Adaa mahad iyo ammaan leh !

**Alloow** khalqigiyo abuurka
**Alloow** noloshiyo arsaaqda
**Alloow** dhimashada adduunka
**Alloow** soo saarka uunka
Markaan eegeen ilaalshay
Awooddaadaan ka yaabee
Adaa mahad iyo ammaan leh !

**Alloow** aasaas dhigaalka
**Alloow** arladaan ku joogo
**Alloow** buuraha ku aasan
Siday uumaha u deeqday
Markaan eegeen ilaalshay
Awooddaadaan ka yaabee
Adaa mahad iyo ammaan leh !

**Alloow** cirka oogadayda
Siduu udub ba ugu joogin
**Alloow** xidigaha ileeya
**Alloow** qorraxdiyo iftiinka
Markaan eegeen ilaalshay

Awooddaadaan ka yaabee
Adaa mahad iyo ammaan leh !

Barwaaqada iyo abaarta
**Alloow** fadka ururintiisa
**Alloow** ibihiyo darroorka
**Alloow** onkodkiyo hillaacca
Markaan eegeen ilaalshay
Awooddaadaan ka yaabee
Adaa mahad iyo ammaan leh !

**Alloow** badda uubaheeda
**Alloow** anfacaad ku beerytay
**Alloow** abaqaalka geedda
Awaaraha iyo dabaysha
Markaan eegeen ilaalshay
Awooddaadaan ka yaabee
Adaa mahad iyo ammaan leh !

Alloow ubaxiyo dillaacca
**Alloow** midabkiyo udgoonka
**Alloow** engeggiyo dhacdiinka
Iniin soo saariddiisa
Markaan eegeen ilaalshay
Awooddaadaan ka yaabee
Adaa mahad iyo ammaan leh !

**Alloow** aarkiyo dugaagga
**Alloow** halaqiyo abeeska
**Alloow** aargoosigooda
**Alloow** iintiyo suntooda
Markaan eegeen ilaalshay
Awooddaadaan ka yaabee
Adaa mahad iyo ammaan leh !

**Alloow** ayaxxiyo aboorka
**Alloow** asal-raaciddooda
Itaal yaridiyo adaygga
**Alloow** aaye-u-shaqaynta
Markaan eegeen ilaalshay
Awooddaadaan ka yaabee
Adaa mahad iyo ammaan leh !

**Alloow** oonkiyo harraadka
**Alloow** oogtiyo shidaalka
**Alloow** oomaarka qiiqqa
**Alloow** odaxdiyo wareenka
Markaan eegeen ilaalshay
Awooddaadaan ka yaabee
Adaa mahad iyo ammaan leh !

**Alloow** orodkiyo dedaalka
Abaabulka reer-samaynta
Ujeeddada iyo abbaarka
**Alloow** awlaad masruufka
Markaan eegeen ilaalshay
Awooddaadaan ka yaabee
Adaa mahad iyo ammaan leh !

**Alloow** istareexa ruuxa
**Alloow** kolla oohintiisa
**Alloow** illowgiyo xasuusta
**Alloow** aqbalkiyo wax diidka
Markaan eegeen ilaalshay
Awooddaadaan ka yaabe
Adaa mahad iyo ammaan leh !

**Alloow** xeerkiyo aqoonta
**Alloow** ereyyada samaynta
**Alloow** alifkiyo dhigaalka

**Alloow** ummadaha u soorka
Markaan eegeen ilaalshay
Awooddaadaan ka yaabee
Adaa mahad iyo ammaan leh !

**Alloow** anigiyo naftayda
**Alloow** unugyada jidhkayga
Afkiyo ilkahaa dhexdiisa
Ishaydiyo aragtideeda
Markaan eegeen ilaalshay
Awooddaadaan ka yaabee
Adaa mahad iyo ammaan leh !

**Alloow** adhaxdiyo xanjaadka
**Alloow** uuskiyo albaabka
**Alloow** seedaha adkaynta
**Alloow** dhiigiyo aroorka
Markaan eegeen ilaalshay
Awoodaadaan ka yaabee
Adaa mahad iyo ammaan leh !

**Alloow** addinkiyo dhaqaaqa
**Alloow** gacantiyo adeegga
**Alloow** amarrada dareenka
**Alloow** uurkiyo wax-doonka
Markaan eegeen ilaalshay
Awooddaadaan ka yaabee
Adaa mahad iyo ammaan leh !

**Alloow** aayaadka koonka
Markaan eegeen ilaalshay
Awooddaadaan ka yaabee
Adaa mahad iyo ammaan leh !

DHAMMAAD

# *ADDUUN WAA BOROTAN*

*Waa qayb ka mid ah sheekooyinkii maaweelada nafta. Waa qurbaha iyo kacdoonka dareenka ee joogtada u ah qof kasta oo xiise u haya dadkiisa iyo dalkiisa ba. Taariikhdu markay ahay 23/04/2000 ayaan duhur dabadii gam-i' waayay, wax na akhrin kari waayay. Waxa aan ku baqday badda oo aan aad ugu raaxaysto markaan daalo. Ku ma aan dabbaalan, waan se hor fadhiistay oo waan u fiirsaday. Waxay na ii sheegtay in ay naftu daalka necebtahay, taasi na tahay qiimadhaca aadamaha. Waxay i tidhi : "daal waa nasniimo e".*

Anoo buuq iyo wareer
Naftayda ku baahsanyahay
Ayaan soo booqday shalay
Badweyntoo saacad baan
Shiraaca ballaadhsadoo
Wixii boholyow an qabay
Markuu iga soo baxaan
Su'aal u badheedhay oo
Waxaan idhi : ***«buug la furay***
***Sidiisa u baacsaneey !***
***Maxaad la bullaamaysaa ?***
***Maxaad la buseelaysaa ?***
***Birqaankani kuugu wacan ?***
***Badhkaa ba badhkiisa kale***
***Muxuu ugu boodayaa ?***
***Bilaadka Allee xasilan***
***Maxaa adi kaaga ba'ay ?***

Waxay tidhi : ***«Baabulloow !***
***Runtoon baydh-baydh lahayn***

*Dhaqaaqiyo bootintani*
*Hadday ku la baadil tahay*
*Bankaad aragtee hurdaa*
*Muxuu soo biiriyaa ?*

*Anigu been iyo fudayd*
*Bilaash u ma goohayee*
*Ogoow biyihii fadhiyi*
*Waxay bedelmaan dharaar*
*Hadda na way baaba'aan*

*Waxaan la butaacayaa*
*Naftayda u boobayaa*
*Waxaan nii beerayaa*
*Barwaaqiyo nolosha bidan*

*Waxaan nii beerayaa*
*Kalluun beeshii cuntaa*
*Ka reeba bisaaraddoo*
*Waxaan beexaamiyaa*
*Billado luuloo qurxoon*
*Bangiga bilicdaanan ahay»*

Waxay tidhi : *«Baabulloow !*
*Haddaan dhaqdhaqaaqu badan*
*Belaayaa dhici lahayd*
*Barbaar baan nii kacdeen*
*Dhir baan nii soo baxdeen*
*Bir baannad samaysateen*
*Fadkaa buuraha ah bay*
*Dabayluhu baahiyeen,*
*Biyaa na idiin da'een»*

Waxay tidhi : *«Baabulloow !*
*Waxaan la buseelayaa*

*Dadkaan ku baraarujaa*
*Inuu fadhi baaqashiyo*
*Ba'naan iyo baahi yahay*

*Waxaan barayaa naflaha*
*Ninkii bahardaadsadaa*
*Wakhtiga baashaaliyaa*
*Inuu bacaraarka ciid*
*Ku qaadani boodh leh oo*
*Ku baaryi halkii la dhigo*
*Kolla na cidi baayacayn »*

Waxaan idhi : *«Baarcadeey !*
*Ma boodbood iyo dhib baad*
*Belooy ! ila doonaysaa ?*

Waxay tidhi : *«Baabulloow !*
*Ninkii bilcan doonayaa*
*Meherka ka ma baydadee*
*Haddaad fanan buurahood*
*Bilkeedin naftaada ood*
*Dhibaatada uga ba'daa*
*Basaanbas ad eeddo iyo*
*Boholahaa kuu hantiya*

*Haddaad baarkaa sariyo*
*Burkii wacan aanad cunin*
*Haddaad bakhtiga iska nicin*
*Bakhshiish aad qaadatiyo*
*Baryootan ayaa ku mudan »*

Waxay tidhi : *«Baabulloow !*
*Besbaas iyo noqo kulayl*
*Dabkaagu inuu bakhtiyin*
*Mar kale balanbaalis noqo*

*Dadkoo dhan bedbaadisoo*
*Bariidada ugu dedaal*
*Barbaarnimo yay ku helin*
*Bartaad u socdaal lahayd*
*Inay kaa baadi noqon»*

Waxay tidhi : ***«Baabulloow !***
***Ogoow taladaan bislayn***
***Bandiirad an loo dallicin***
***Ka baaraandegin ninkeed***
***Bashiishatay oo luntoo***
***Bakooro ayaa heshoo***
***Jidhkeedaa barara oo***
***Bug ! teedaa laga naxaa»***

Waxay tidhi : ***«Baabulloow !***
***Hadday bawdadu jabtiyo***
***Barriiq waa laga kabmaa***
***Badhtame waa laga noqdaa***
***Bassaastu se waa qalbiga***
***Bugtaan quus baa u daran»***

Waxaan idhi : ***«Baarcaddeey !***
***Dhaqaaqqii kaa bartee***
***Dariiqqee ii bannaan ?»***

Waxay tidhi : ***«Baabulloow !***
***Inaad baxsataa kolley***
***Is-biimayntaa ka roon***

***Wixii kaa soo hor baxa***
***Naftaadood uga baqdaa***
***Inaad beerka u dhigtiyo***
***Inaad barkataa ka roon***

*Ogoow baabuur nin kale*
*Baaskiilkaagaa ka roon*

*Aniga boqor baa i dhalay*
*Baddaalshay ayaa ka roon*

*Badeecad ninkii lahaa*
*Haddii uu soo bandhigo*
*Inaad badhbadhaadho ood*
*Sambiilka ka buuxsataa*
*Albaabka intaad ballaqin*
*Inaad baadhaa ka roon*

*Inaad baastiyo bariis*
*Bilaaddo ka keenataa,*
*Waxaad adu beeratee,*
*Dhulkaaga ka soo bixiyo,*
*Ogoow badarkaa ka roon*

*Adoo hawlaha badshoo*
*Dhammaan kaa baylahaan*
*Adoo iska baaba'shoo*
*Mid uun ka bogtaa ka roon*

*Ogoow boobkiyo dhaciyo*
*Inaad booliga cuntaa*
*Adoo booraan liqoo*
*Kolkaa bakhtiyaa ka roon*

*Bulshaa keli kaaga roon!*
*Kun baa boqol kaaga roon!*
*Inaad xaqa baafisaa*
*«Ciddee badan ?» kaaga roon!*

*Inaad ballamaha jartaa*
*Adoo burburoo markaa*
*Ku biira camuudda oo*
*Lagaa bogsadaa ka roon*

*Hadduu hebel kaa badsho na*
*Inaad boog yeelataa*
*Bagood ku tidhaahda iyo*
*Bogaadin ayaa ka roon*

*Bishaaro ! ninkii yidhaa*
*Bilkhayr ! uun baa ku roon*

*Barjood u fadhiisatood*
*Sigaar isku buufisood*
*Naftaada buquujisaa*
*Bustaanka inaad tegtiyo*
*Inaad badda soo martiyo*
*Dadkood soo booqataa*
*Birqaan madhan kaaga roon*

*Ogoow buuriga qadhmuun*
*Inaad buskudkiyo xanjada*
*Halkiisa ku buuxisaa*
*Inaad bannaftaa ka roon »*

Waxaan idhi : *«Baarcadeey !*
*Haddeed an bilkeediyee*
*Sidee baan uga bogtaa ?»*

Waxay tidhi : *«Baabulloow !*
*Adduun basar buu rabaa*
*Baxaanbax ayuu rabaa*
*Nafluhu buug buu rabaa*
*Aqoon barashay rabtaa*

*Bidixdu midig bay rabtaa*
*Belaayo adkaysi iyo*
*Ogoow* Bissin *bay rabtaa*
*Dhammaan barakada Ilaah*
*Biloow ! mahad bay rabtaa*

Waxay tidhi *: «Baabulloow !*
*Malaha waan kugu badshee*
*Waxaad sii beegsataa*
*Hillaac* bilig ! *soo yidhaa*
*Bishoo dhalatoo cuddoon*
*Barqood u bariisataa*
*Bartaadood soofisaa*
*Barnaamijyo kuu hir-gala !*

*Hayeeshee buugga iyo*
*Ku biirso dardaarankii :*
*Adduun waa borotan oo*
*Nnkii badiyaa iska leh*
*Hayeeshee baahi uun*
*Ogoow bahal loo ma cuno»*

DHAMMAAD

## *DHAGAXYAHOW !*

*Arrinta Bariga Dhexe oo maraysay meel xun ayaa dareenkayga kicisay. Waxa aan aaminsanahay, oo aan jeclahay, xornimada iyo in ay ummad kastaa ba hesho xuquuqdeeda.*

*Waxaan ogaaday in uu dhagaxxu yahay wehelka keliya ee ay Falastiiniyiintu haystaan, ka dib markii ay dunidu ka gaabisay u hiilintooda. Sidaa darteed ayaan dhagaxxa u la hadlay maalintii (12/10/2000) uu* Shaaroon *galay xaramka muqaddaska ah ee* Al-Qudus.

Dheriga ba haddii la daboolo
Dhadhdhaarrada haddii la kor saaro
Dhamacdiyo haddii lagu tuulo
Dhuxul iyo *bensiin* iyo xaabo
Inuu tuuri dhiilka dul yaalla
**Dhuuxoow** daliil u ma baahna

Dhagaxiyo rasaasta is-dhaaftay
Dhagartiyo colkaasi la dhaanshay
Dhimashada dadkaa u badheedhay
**Aqsa** dhiigga maanta ku daatay
Dhacdo maaha aan la filaynin
Dhaaxaa dabkaa la dhuraayay
Waa qarax **Galbeedku** dhidteeyay

Dhagaxyahow ! dhulkayga dhulkayga
Dhagaxyahow ! dhulkayga la qaatay
Dhagaxyahow ! dhallaanka dhallaanka
Dhagaxyahow ! dhallaanka la laayay
Dhiillada haweenka ku raagtay

Dhagaxyahow ! cadaawaha dhiirran
Dhagaxyahow ! shisheeyaha dhuuntay
Dhagaxyahow ! tolkayga la dhoohay
Dhagaxyahow ! markaan dhab u fiirshay
Dhankan iyo dhankaa ba ka eegay
Dhagaxyahow ! adaan kugu dhaa tay
Dhunkashada afkayga mutaystay

Dhagaxyahow ! adaan kugu dhaatay
Dhalashada aday la wadaaga
Dhoobuu **Ilaah** naga uumay
Naas qudha adaa ila dhaadhyay

Dhagaxyahow ! dadkaad aragtoo dhan
Dhagaxyahow ! dhammaan ba tolkayga
Adigaa dareenka ku dhaama
Dhiidhdhiga adaa kaga fiican
Dhaleecayn ba koodu ma dhaafo
Rasaastoodu *dhaw !* ma tidhaahdo
Dhulku maalintuu uga baahdo
Madfaccu na dharaaraha ciidda
Dhegahii ayuu iga qaaday
**Israa'iil** se dhaawac ma gaadho
Dhabarkiyo xanjaadku ma liico
Dhallaankeenna goorta ay layso
Dhagkafaar kol uun ka ma qaaddo
Qori dhuumahiisa la shiishay
Dhinacceeda loo ma ba jeedsho

Dhagaxyahow ! adaan kugu dhaatay
Adigaa dhawaaqan maqlaaya
Dadku uu dhegaha ka furaystay

Taahiyo dhibtaan tabanaayo
Dhagaxyahow ! adayga dhegaysta
Adigaa dhaqso uga jawaaba

Dhagaxyahow ! markaan kugu dhuunto
Adigaa rasaaasta i dhaafsha
Adigaa dhufays u wanaagsan

Dhagaxyahaw ! markaan kugu dhoogto
Adigaa yuhuudda dhalaasha
Adigaa ninkaad ku dhacayso
Dhuuxiyo wadnaha ka abbaara
Adigaa dhafoorka caseeya
Dhiigiisa ciidda waraabsha
Adigaa dhulkayga nacsiiya
Oo dhoofka dooro yidhaahda

Dhimashiyo qadhaadhka is-dhiibka
Dhagaxyahow ! adaa dhadhansiiya

Dhagaxyahow ! adaan kugu dhaatay
Kaa dheer dhalliil iyo gaabis
Dhinacayga goorta ad joogto
Dhereg iyo ma raadiyo dhuuni
Dhaxan iyo kulayl ma dareemo
Hurdada u ma dheelal-hallaabo
Gaalka na ma dhoogani waayo

Dhagaxyahow ! dhigaalka **Quraanka**
Wuxuu **Eebbeheen** ku dhex sheegay
Inaad tahay dhimbiil iyo naaro
Dhambaal uu horowgu diyaarshay
Dulmigiyo ciddii ku dhaqaaqda
Dhamacdii **Abraha** lagu daadshay

Dhagaxyahow ! haddii la dhibtoodo
Taariikh haddii la dhidbaayo
Dhagar-qabe haddii la ridaayo
Dal burburay haddii la dhisaayo
Wax kastoo nafluhu dhaqanaayo
Ama dheef ah uu hedlanaayo
Ama dhaxalgalee la qabtaa ba
Adigaa laf-dhabar ka ahaada

Dhagaxyahow ! dhammaadka kufaarta
Baaqii **Rasuulku** dhabowye
Dhali goolashaan u dhafraayay
Dhimashadu **Yuhuudda** ha dhaafto
Dhiisiga **Maraykan** ha gaadho
Dhaawaccu siduu u arooro
Ha la dhaygagoo ha la yaabo
Dharbaaxada markaad ku habsiiso
Dhaayaha markaad kaga qaaddo
Dhabannada kolkaa ha ku booddo
*«Yaa iga dhabaay !»* ha ku oydo

Dhagaxyahow ! dhammaadka **Yuhuudda**
Dhagaxyahow ! tummaati-dhacaaga
Ha dhabiilin dhaabidda xoogga
Dhiigyacabka meel haw dhawrin
Dhiddig iyo lab haw kala saarin
Dhegahooda gawdu ha awdo
Dhama' iyo wareer ha asiibo
Dhalmadeys raggoodu ha qaado
Dhakhtarrada kol kaa ha ku yaaco
Dawo dhibic ha loo heli waayo

Dhagaxyahow ! dhammaadka **Yuhuudda**
Dhuxul naara oo la dhalaashay

Dhakadooda maalmo ku hoori
Dhareerkiyo ilmada kaga daadi
Dharka ay sitaan ha sumoobo
Dheehiyo dubkoodu ha daato
Dheecaanku haysku faruurmo
Dhurwaagu na raqdooda ha boobo

Dhagaxyahow ! kacdoonka an dhaarshay
Dhabbadaa inaan laga leexin
Inuu dhuuni-raac ku adeegan
Inaan dheeman iyo lagu iibsan
Dhawrtiyo waxaan u dhigmaynin
Markuu dhaysiyee la dhawaado
Dhayal yaa na looga war doonin
Illaa uu dhulkaygu xoroobo

Dhagaxyahow ! kacdoonka an dhaarshay
Dhiigiyo ilmada la waraabshay
Ee lagu dhaqaaqasha beelay
Ha dhaxlaan dadkaan dhalidoonno
Marka aad **Yuhuudda** dhammayso
Ha dhaqaan waxay uskagaysay
Ha dhisaan waxay ku cagaysay
Dhirta iyo wanaag ha la beero
Dhigashada aqoontu ha faafto
Ha la dheelo maalmaha ciidda
Wax kasti ba ha dheellitirraado
Daalkii haddeed ha dhammaado,
Dhab **Ilaah** ha loogu sujuudo

DHAMMAAD

## *SAAXIIB*

*Saaxiib la'aantu waa nolol la'aan, is-waydiintu se waxay tahay : sidee loo helaa saaxiib ? Waa su'aal u baahan in lagu foorarsado oo loo helo jawaaab. Waxa keliya oo aan sheegay dhawr tilmaamood oo aan lahaa waa kuwa ugu muhiimsan laakiin way badanyihiin waxa looga baahan yahay saaxiibku. waxaan tiriyay maansadan/02/2001dii.*

Subcintii "*Iskuulkaan*" beryahan
Seeto la lahaaye
Oo joojay suugaantan oo
Soome qalinkiiye
Haddii aan silsiladdii waxyiga*
Sadar ku soo biirsho
Xalay saanta goortaan dul tagay
Ama sariirtayda
Een sahan adduunyada u diray
Raadsha sadodayda
Saaxiib ayaa laygu yidhi
Waa sed gooniya e
Sifahiisii oo kooban qoro
Sidatan weeyaan e

Saaxiib Suldaan lagu hirtoo
Sikhiya oo toosan
Oo suuqqa khayrkoo wixii
Suubban lagu iibsho

*Waxyi : ereygan waxa ay maansadu ku tusmaynaysaa gabayga*

Saaxiib sarkaal geesiyoo
Laga saliilyoodo
Kibirka na sunkiisiyo ka dheer
Saaxirnimadiisa

Saaxiib an been kugu sasabin
Faan na kugu suuxin
Hayeeshee wanaag sahadiyoo
Quusta laga siibay

Saaxiib ballama oon sahwiyin
Sahal na aan moodin
Oo sebiga kaa hadha mar na ba
Baylah uga seexan

Saaxiib ku saacida haddii
Sabadka aad joogto
Safarka na subraarkoo kaloo
Sahayda loo qaato

Saaxiib haddaad seegantahay
Surinka kuu sheega
Sax markaad ku joogtiyo xaqa na
Sawdka kugu biirsha

Saaxiib haddii meel sollo ah
Talo lagaa saaro
Sallaan aad ku soo qaadatiyo
Sababo kuu raadsha

Saaxiib haddaad saaqantoo
Qalad ba kaa siibto
Samir iyo dulqaad yeesha oon
Seefta kula boobin

Saaxiib samaanta u ordoo
Xumahu saamaynin
Oo saamaxaad iyo heshiis
Nabad ku suureeya

Saaxiib sinnaan iyo midnimo
Shey kaste ba siista
Oo aan sokeeyaha dartii
Gees iskugu soocin

Saaxiib su'aaluhu sarsarin
Selel na qaadsiinin
Oo aan saluug yeelan oo
Saafa hadalkiisa

Sirtaad gunudday saaxiib xajoo
Saydhin cidhifkiisa
Oo gebi wixii lagu sigtiyo
Saxar ba kaa eega

Saaxiib markaad socoto aan
Goynin sibirtaada
Oo uu sufey kugu ag xaman
Soohan garan waayay

Sakaarkiisa saaxiib u dhiga
Soodhka kugu beegan
Oo silic daraadaa u mara
Lagu saloolaayo
Adiga na sawaab kaaga rabin
Wuxuu samaynaayo

Saaxiib garaad lagu suntoon
Samada heehaabin
Maskaxdu na siraaddoon fudayd
Xaajo uga siiban
Qalbiga na adayg laga sasiyo
Saancad laga maydhay

Sacab furan markuu soo fidshuu
Kugu salaamaayo
Saaxiib sansaanyaha farxadi
Saani ugu taallo
Oo sida suxuur soo iftiyo
Subaxa aad moodo
Oo ay sankiisiyo wejiga
Cadhadu siigaynin

Saaxiib an soortaada cunin
Sado markaad joogto
Selawgiyo abaarta na wax kale
Kugu la soo soofin
Ama aan sabool kaaga tegin
Saabbirnimadaada

Saaxiib baddoo saafiyoon
Sebanku dhooqaynin
Oon saaqyo kugu iibsannoon
Lagu gu soofaynin
Oo aan *sigsaag* kuula iman
Ku na siyaasaynin

Saaxiib intaas oo sife ah
**Saatir** ugu deeqay
Oo weli ba saa loogu daray
Saayid iyo dheeri

Waa seeb la'aantii dabbaal
Suuragal ahayn e
Hadduu saamigaa yahay sujuud waa
Sad gooniya e
Haddii kale saraab yuu nin na ba
Kugu la saaxiibin

DHAMMAAD

## *DAA'UUS*

*Waxay ahayd maalin barakaysan oo ciideed markaan ka baxay gurigayga subax hore si aan u soo laydhsado iskugu na diyaariyo Ciidaas* Al Adxa*. Waxaan si kedis ah u milicsaday daa'uus dul fadhiya guri. Waxay ahayd markii iigu horaysay een arko makhluuqaas la-yaabka leh. Waxa aan hadda ba ku soo gudbiyay dareenkaygii milaygaas, 05/03/2001, maansadan :*

Alloow waa munaasab e
Maanta na maiid baa ?
Milaygu na ma subax baa ?
Maqlay sheekadiisee?
Muuqaan arkaayeen
Milicsaday ma daa'uus
Lagu maararooboo
Ku maaweelo aadmigu
Maalinkuu wax haystaa ?

Mar kalaan u fiirsaday
Kol ba waan miliilicay*
Magnad igu haleelyoo
Inaan meel u jeestoon
Ka mashquulo ii diid

*Miliilic : eegmo naxariis iyo kalgacal xambaarsan*

Ma muraayad dahaboo
Macdan lagu daleeyaa ?

Ma murjaan la taxay oo
Laga maydhay ceeb baa?

Ma buraaq muraad iyo
Micraaj loo diyaarshaa ?

Ma dhirtoo magooshoo
Xalay mayay ku hooroo
Ubax lagu marriimaa ?

Ma mashruucyo beeroo
Muuskoo dhalaaliyo
Maangiyo bartiikh iyo
Mafafaay bislaadiyo
Mesengadu is gaadhoo
Midhihii ka soo dhacay
Xidhay maagadkiiyoo
Maansheeyay roob baa ?

Ma mallayga **Ubukhoo**
Badda mawjaddeedii
Intuu meel iskugu yimid
Damaashaad ka mirayaa ?

Ma cirkoo sidii miis
Xidigaha mirtii xalay
Lagu wada macsuumaa ?

Ma mullaax xariireed
Iyo maro qurxoonoo
Midabyada dhammaantood
Lagu muunadeeyaa ?

Ma ugaas muxtaramoo
Taaj madaxa geliyoo
Madal loogu yeedhoo
Moromiyo shil taagnaa

Male looga sugayoo
Majliskii fadhiistaa ?

Maamuus-dhaqaaqiyo
Miyirsiga tallaabada
Xarragada macaanka leh
Masarrada la daba dhigay
Miiganaa ma gabadh baa ?

Ma marwada haweenkoo
Meherkeedu dhacay oo
Minankii aroosnimo
Maqrib loo gelbinayoo
La dul dhigay malkhabad oo
Miisaan u socotaa ?

Laabtiisan miisani?
U mohday e ma naaskii
Lagu muday dareenkaa ?

Mijintiyo miskaha iyo
Meegaarka guudka na
Ma muurkoo la raray oo
Meel loo hayaanshaa ?

Luquntiisan miiqani
Ma minaarad dheer oo
Masjid lagu qotomiyaa ?

Indhihiisan miimkiyo
Lagu meershay kuulshu na
Ma madheedh bislaadaa ?

Codkiisu na mashxarad iyo
Ma makiinad hees iyo
*Miisiig* garaacdaa ?

Ma-huraanka quruxdoow !
Maankayga deeqdoo
**Macbuudkii** ku uumaa
Wanaag kugu mannaystoo
Magac dheer ku siiyee
Maxaan kugu miseeyaa
Ma malaa'iig baad tahay ?

Misbaaxaa cadceediyo
Dayaxaa madowgiyo
Mugdiyada iftiinshaa
Ma mataanahaagaa ?

Miidaha jannada iyo
Malabkiyo macaankiyo
Miskigiyo udaygu na
Ma xareed la miiroo
Kaa maaxday adi baa ?

Maskaxdiyo dareenkiyo
Murtidiyo waxgarashadu
Ma markhaatigaagaa ?

Ma-huraanka quruxdoow !
Waxa igu maqaala ah
Inaad meel hadh weynoo
Webiyadu maraan iyo
Kaymaha mushaaxdee
Bankan moora-duugga ah
Magaaladan abaarta ah

Mahiigaankan boodhka ah
Maxay kuu dhex keeneen ?
Ooy kuu maxbuuseen ?
Ama muusanawgiyo
Muskan xeeran kuu qoray ?

Masaladdani yaabka ah
Midda igala sii weyn
Muhiim baad ahaydoo
Dhirtii aad midawdeen
Kaa maarmi maysoo
Muunsoonimaysee
Bal maxaa muraadoo
Aadmiga ka maqan ooy
Kuu soo muquunsheen ?

Maan-gaabne aadmigu
Kolkuu meherad waayee
Masruufkiisa haystuu
Marinkiyo habaabaa
Majaraha wanaaggee
Masrixiyo ciyaartiyo
Maadeyska filimmadu
Miyay deeqi waayeen ?

Maan-gaabne aadmigu
Isagaa martabaddiyo
Mudnaanta isa siiyoo
Muruq buu ku qaataa
Haddii uu wax maagoo
Marmarsiiyo waayee
Adna muu ku soo maray ?

Maan-gaabne aadmiga
Loo maarawaayoo

Inta uu macaash yidhi
Madaxa isku taagyoo
Dunidii ma-guur* iyo
Madbakh weyn ka yeelyoo
Hawadii macaanayd
Waakaa musmaar iyo
Ku dalooshay miinee
Macnihii ka siibee
Adna muu ku soo maray ?

*Ma-guur* : *xabaalahii dadkii hore; xabaal ma-guur*

Maan-gaabne aadmiga
Damac baa mashquulshoo
Maskaxdii ka qaadoo
Arladii madoobayd
Masaafooyin dhaadheer
Waakaasi madhiyee
Murxiyee caddeeyee
Maqasyada ku xiiree
Adna muu ku soo maray ?

Maan-gaabne aadmigu
Madfacuun ma tuuroo
Makhluuqaad kaleetiyo
Maroodiga ma laayee
Dhexdiisuu is miidhaa
Shirqoollada maleegaa
Mahadhooyin reebaa
Maxastiyo agoontiyo
Masaakiinta jiidhaa
Macaluul u loogaa
Oo meel ma seegaan
Mashaqooyinkiisuye
Adna muu ku soo maray

Maangaabne aadmigu
Manfac raadintiisii
Mamnuucaad u geysoo
Mabaadii' la dhawriyo
Inuu yahay mas'uul iyo
Maslaxadda ilowyoo
Dhulkan uu murdiyay oo
Imika na marriikhuu
Mitirsaday dhawaan oo
Waakaa maqiiqan e
Adna muu ku soo maray ?

Ma-huraanka quruxdoow !
Inkastoon macruufkiyo
Miciinkaaga jecelahay
Muftaaxii ma haystoo
Iga murugtay xaajadu
Magdhaw kuu ma heli karo
Mawd kaa ma celin karo
Maal aan ku siisto na
Midigtayda ku ma ogi
Bal se aaban mahadshee
Ninkan maamulkaagee
Maareeya reerkani
Martiqaad ma leeyahay ?
Muxubiyo kalgacal iyo
Naxariis ma muujaa ?
Milayada qabowga na
Ma ku mayrac geeyaa ?
Adigu na mabsuud iyo
Mustareex miyaad tahay ?
Mise macangag weeyaan
Iyo nacas masiiboo
Murug baan la hoydaa ?

Ma-huraanka quruxdoow !
Midhidhada ordaayaa
Muddadii ba gaabshee
Masallada an qaatoon
Masaajiidda gaadhee
Mar kaliyo is-arageen
Iyo maaxda xiisaha
Adigu na musaamaxo
Madiix kuu ma tirinin e
Waxaan maansadaydii
Meeriskaa ku soo xidhay
Mucjisiyo inaad tahay
*Mutxaf* aan la gaadhayn!!

DHAMMAAD

## *« YOUR BABIES ARE KILLED »*

***Maansadan waxaan tiriyey dhammaadkii bishii dissaambar ee 2001da, xuskii ciidda Kiristanka oo sannadkaa ku beegmay xilligii diyaaradaha*** *Maraykanku* ***ay duqaynayeen dalka*** *Afgaanistaan*. ***Waa baabaa Nuweel ninka aan is lahaa wuu joojin karaa! Laakiin ma yeelin.***

*"Baabbaa Nuweeloow"*
Duqqii baaniyaalkee
Isa soo bokhraayoow
Bilaash baad gadh weyn iyo
Bustaha isku saartee
*"Your babies are killed!"*

*"Baabbaa Nuweeloow"*
Buseel iyo ciyaar iyo
Boodboodka ciiddiyo
Bukhshaddii yaraydeed
Nagu baabanaysiyo
Buskud qaybintii iyo
Farxad baad u baratay e
*"Your babies are killed!"*

*"Baabbaa Nuweeloow"*
Gellin baad barwaaqiyo
Nabad lagu bariistiyo
Barashiyo walaalnimo
Bandhig aad ka sheegtay e
Baqaagu maanta na
Ma badhaadha uun baa
Sawkan laysla baahee
*"Your babies are killed!"*

*"Baabbaa Nuweeloow"*
**Buush** iyo **Baleer** iyo
**Shaaroon** bahdiisiyo
**Buutiinka** ruushkiyo
**Barliskooni** iyo **Jaak**
Iyo nacaska **Baajbaay**
Berigay yaraayeen
Boqor maad ahayn ood
Ku barbaarin nabadiyo
Is-jacaylka beelaha?
Sawkaa bamkoodii
Iyo baaddilkoodii
Lagu baaba'aayee
*"Your babies are killed!"*

*"Baabbaa Nuweeloow"*
Tolkaa baarqabkiisii
Sawkan baabacayntiyo
Nala jiidhay booddada

Sawka berisamaadkii
Boggiisii la laabee
Colaad loo badheedhee
Loo guuray bahalnimo!!

Bahwadaagta gaaladu
Sawtan biliqadaydiyo
Boobka u dhaqaaqdee
Beledkaan lahaan jirey
Loo boratamaayee
Lagu soormay **Boon** ee
**Buud** iyo **Hinduusku** na
Badhaadhaha ka qaybgalay

Baaqaagu manta na
Ma birqaama uun baa?

*"Baabbaa Nuweeloow"*
*"Bii fiifti tuu"* iyo (B52)
Baaruudda qaraxdiyo
Sawkaa bamkiinnii
Bacaraarka ciiddiyo
Noo geliyay boodhkee
Dadkaygii ku barakacay!!

Dalkaygii balaadhnaa
Sawkan buurihii iyo
Banaankii la simay ee
Beeruhu gubteen ee
Biyahii gudheen ee
Bini-aadan daayoo
Ka baxsaday dugaaggii
Baqaagu manta na
Ma buseela uun baa?

*"Baabbaa Nuweeloow"*
Carruur baacu madhan oo
Basaas ay ku raagtoo
U baahnaa gargaaroo
Baroor qawdhankoogii
Rasaas loogu biirshoo
Bakhshiish loogu soo diray
Buskud iyo garnayl baa
Ku soo beegmay ciiddan e
Baaqaagu maanta na
Ma buseela uun baa ?

*"Baabbaa Nuweeloow"*
Masjidkaa burburay ee
Laga yeelay budushiyo
Kitaab baalalkiisii
Mid ba meel babbanayiyo
Barahii *iskuulkiyo*
Arday balanbalaysoo
Qalin *«beensalkii»* iyo
Buugtii ka carartaa
Ku soo beegmay ciiddan e
Baaqaagu maanta na
Ma buseela uun baa?

*"Baabbaa Nuweeloow"*
Sawkan **Beytulaxam** iyo
Bartii **Ciise** lagu dhalay
Laga baaqday ciiddee
Baqdin loo xeroodee
**Carrafaad** na **Buush** iyo
Bixin waayay **Jaanbool !!!**
Baaqaagu maanta na
Ma birqaama uun baa ??

*"Baabbaa Nuweeloow"*
Aday kuu bannaantee
**Buush** soo su'aaloo
Buuq iyo dagaalkani
Idinkaa bilaabaye
Ma **Bin Laadin** doon baa ?
Ma **Islaam** burburin baa ?
*Batrad* iyo ma boob iyo
Dal ballaadhsi uun baa ?

*"Baabbaa Nuweeloow"*
**Buush** soo su`aaloo
Haddeed waan ka baqannay e
Muxuu, beerka-lagu-jiid!
Ku badhaadhayaa oon
Ku bariidinnaa yooy
Budkiisiyo harraatida
Dhashu kaga bedbaadaa ?

Ma barbaarta toostee
U baxaysa diintaa
Boholyowgan haystiyo
Cabsidani ku beertoon
Ka buquujinnaayoon
Badankooda laynaa ?

*Qushi!* Barakadiisu ye
Beydkii **Ilaah** iyo
Qubaddii baxnayd iyo
Barxaddii **Rasuulkiyo**
Ma bayaanka diintani
Beledkuu ku soo degay
Dadka booqanaayaa
Laga baajiyaa gebi
Mise buurta **Carrafiyo**
Kacbadaan burburinnaa ???

Ma **Quraanka** beenshoo
Beddeluu na leeyahay ?

Xajkoo loo baqooliyo
Salaaddoo la badiyiyo

Soon looma baahnee
Ma ka booda buu yidhi ?

Sakadoo la bixiyaa
Bidco weeye muu yidhi ?

Badowyahay ! dhaqaaqoo
Dhaqankayga beentiyo
Bugtaantiyo xanuunka ah
Ma bartuu na leeyahay ?

Ma billaawahaygiyo
Warankaygan ba'an buu
Bam inaan samaystiyo
Biro weyn u qaatoo
Ha la baaba'shuu yidhi ?


*"Baabbaa Nuweeloow"*
**Buush** waxaad tidhaahdaa
Adeer beerka xaydha leh
Gelin baad u baratay e
Haddeed waa lagaa baxay !!!

Boqorrada Carbeed iyo
Inta kaa baqaysee
Bogga kuu tumaysa na
Buruudkoogii uu dhacay
Shacabku na bannaannada
Wuxuu ugu baxaayaa
Wuxuu baanankaaga na
Biraha ula dhacayaa
Cadho boodday maahoo
Berri kaa qaboobiye
Haddeed wuu baraarugay !!!

*"Baabbaa Nuweeloow"*
**Buush** waxaad tidhaahdaa
Halkii aad ka booddaa
Laga soo bilaaboo
Dayaxaa balaadhani
Bil yar buu ahaayoo
Sidii uu u beermaa
Loo baaba'shaayoo
Bilaaash looma yeelin e
Taariikhda soo baro !!!

Adna baabulweynoow !
*"Baabbaa Nuweeloow"*
*"I don't believe you"*
Inaad barako leedoo
Ilaahay buruud iyo
Burhaan kuugu deeqood
Nabad iyo barwaaqiyo
Badhaadhaha horseedee
Haddeed waan ku baranay e
Bulbusha iska soo xiir !!!

DHAMMAAD



*Aadan Xassan Aadan "Belelloo" wuxuu ka qalinjabiyey dugsiga hoose ee Baab Al Mandab iyo dugsiga dhexe-sare ee Sacuudiga ee magaalada Jabbuuti. Ka dib wuxuu galay 1996kii dhammaadkiisii, jaamacadda International Islamic University of Malaysia (Human Sciences), wuxuu na ka soo laabtay bilawgii 1998kii duruufo gaar ah awgood. Isla sannadkaa wuxuu galay Kulliyadda Shareecadda ee jaamacadda Al Imaam Maxamad Ibn Sacuud University qaybteeda Mooritaaniya iyo Kulliyadda Qaanuunka iyo Culuunta Dhaqaalaha ee jaamacadda Universite de Nouakchott (Department du Droit) iyo kulliyadda Faculte des Lettres et des Sciences Humaines (Department Anglais) ee isla jaamacaddaa.*

• • •

"Aadan Xassan Aadan wuxuu aad u daneeyaa dhaqanka iyo suugaanta Soomaaliyeed, kuwaas oo la'aantood uu na ahaadeen hal-abuurka tayada leh ee uu maanta yahay.
Aadan ***"Beleloo"*** wuxuu hadda ba ka mid yahay da'da cusub ee labadaas aqoonood kulmisay.
Sidaa awgeed, ka sokow saamaynta ballaadhan ee ay ku leeyihiin abwaannada Soomaaliyeed ee maansada casriga ah hoggaamiya, sida Maxamad Ibraahim Warsame "Hadraawi", oo had aad uga dhadhansanayso ka dab-qaadashadiisa, hadda na Aadan ragga saameeyay waxa ka mid ah Maxamad Iqbaal kii Baakistaa".

M. C. Riiraash

• • •

*"U fajaaso beeraha fad baa soo fanqooqsaday e"* ayuu wahabka nooga kicinayaa Aadan Xassan iba-furka buuggiisan la magac-baxay "Saabxidh".
Gabayaagii hore waxa caado u ahayd inay gabayadooda ku aslaan faan iyo tookh badan. Waagan danbe se waad aragtaan is-dhuubidda Aadan Xassan faanka uga ilaalinayo suugaantiisa. Waa hab-dhaqanka casriga ah. Asagaa igala toosan kii hore.
Suugaanta buuggani waa fad ceel-ka-geeye oo cir fatahay ku doojinayo beeraha maanka iyo baahida laabta. Waa suugaan bilan, ka soo burqanaysa hibo baaxad weyn, ka tarjumaysa dareen xumo-diid ah, ku salaysan adduun-arag oddoros dheer oo aqooni badhi-taarayso, ku bishaaraynaysa hodontinimada ku duugan da'yarta reer Jabuuti ee dareenkoodu ku baraarugay inay dhaqankooda u fiirsadaan, afkooda ku dhaataan, una adeegsadaan kororsiga aqoonta iyo iba-furka hibada albaabada garaacaysa. Kuwaas ayuu tusaale wacan u yahay Aadan Beleloo.
Hambalyaannu leenahay!

M. D. Afrax